

QIIMAHA: ETB 9.25
ISBN: 978-99944-2-112-1

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada

WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA BUUGA ARDAYGA FASALKA 8aad

JDFI WW






# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## BUUGA ARDAYGA

## FASALKA 8aad




Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya,
Wasaarada Waxbarashada



## Daryeelka haboon ee Buuga Ardayga

Buugani waa hantida dugsigaaga si haboon u daryeel, ha u geysan waxyeelo hana xoorin buugan.

Waa kuwan 10 siyaabood oo kaa caawin karra daryeelista buugan:-

1. Buuga ku jaldiyee walxo adag sida bacda balaastigada jaraa'idka duugaaha ama wargeysyada oo kale.
2. Buuga dhig had iyo jeer meel qalalan oo nadif ah.
3. Xaqiiji iney gacmahaaga yihiin nadiif marka aad isticmaalayso buugan.
4. Waxba ha ku qorin jaldiga kore iyo gudaha hoose ee boggaga buuga.
5. Astaynta buuga bogagiisa u isticmaal jeex waraaq ah ama callamad-xadhig yar.
6. (Bataatan), mar naba ha ka jeexin buuga wax sawir ah ama waraaq ah.
7. Hadii ay jeexanto waraaq ka mida ah boggaga buuga fadlan isku dhaji adiga oo isticmaalaya xabag/koolo.
8. Si taxadar ku jiro buuga u geli boorsada
9. Si taxadar ku jiro u maaree marka aad cid kale u dhiibuyso/u gudbinayso buuga
10. Isticmaalka ugu horeeya ee buuga cusub fadlan u/jiifi dhinaca bogiisa dambe, islamarkaana markiiba fur dhawer bog adigoo si tartiib-tartiib ah u kala qabanaya boggaga. Taasina waxay jaldiga buuga u horseedi doontaa xaalad wanaagson.

Calamada Dawlad - Deegaanada ay ka kooban tahay Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalke Itoobiya


Calanka Dawlad- deegaanka Tigraay


Calanka Dawlad- deegaanka Canfarta


Calanka Dawlad- deegaanka Amxaarada


Calanka Dawlad- deegaanka Oromiya


Calanka Dawlad- deegaanka Somaalida


Calanka Dawlad- deegaanka Benishangul- Gumus


Calanka Dawlad- deegaanka Qaramada, Qowmiyadaha iyo shucaubta Konfureed


Calanka Dawlad- deegaanka Gambeela


Calanka Dawlad- deegaanka Hararida

XubnahaDawlad-Deegaanadu waxay u dhigan yihin sida ku xusan qodoba 47aad ee dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga federaalka Itoobiya.

# WAXBARASHADA MILGAHA QARANKA IYO ANSHAXA

## BUUGA ARDAYGA
## FASALKA 8aad

**Qoraha :**
**Maxamed Bade**

**Tafatirayaasha:**

Maxamed Cabdi Rooble
Maxamed Faarax
Deeq Axmed

**Jamhuuriyda Dimuqraadiga Federaalaka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada**

**Laxmi Publications**

Mahadnaq

Dib u habaynta, daabacaada iyo qaybinta buugta waxaa maalgaliyay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud ee loo yaqaano (GEQIP), kasoo ujeedadiisu tahay in la kobciyo tayada waxbarashada ee ardayda fasalka 5-8 ee dhamaan dugsiyada dalka Itoobiya.

Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya deeqda ay ka heshay mashruuca kor u qaadida tayada waxbarashada guud (GEQIP) waxay usoo martay ururka horumarinta caalamiga ah (IDA) Credit No. 4535ET, the Fast Track Initiative Catalytic Fund (FTICF) iyo qaybaha kale ee bahwadaagta horumarinta Talyaniga, gargaarka Holand iyo Boqortooyada Ingiriiska ee ka timaada waaxda horumarinta caalamiga ee loo yaqaano (DFID).

Waxaa kale oo gacan ka gaystay soo saarista buuga ardayga iyo Kan baraha ee ku lamaan, shaqsiyaad iyo ururo (hay'ado) kala duwan oo fara badan, islamarkana aanan halkan lagu soo koobi Karin. Hase yeeshe, waxaa xusid gaar ah mudan, Mayra Maarbi, oo wakhti badan gelisay kobcinta awoodeed ee qorayaasha buuga ee wasaarada, si loo soo saaro qalab xidhiidh isdhexgal iyo jawi saaxiibtinimo la leh hawlaha baris-barashada. Taageerada maaliyadeed ee u midawga Yurub u fidiyay hawlaha shaqo ee Mayra ka waday Itoobiya, waa mid loo jeedinayo amaan/bogaadin. Waxaa kale oo mahadnaq halkan looga soo jeedinayaa: Golha Faderashinka ,-J.D.F.I, Wakaalada Warbaahinta Itoobiya, Wasaarada Dhaqanka iyo Dalxiiska , Wasaaradii hore ee Warfaafinta, Macadka daraasaadka Itoobiya,Ururka Macalimiinta ee Itoobiya, iyo Wakaalada wax soosaarka iyo baahinta (fidinta) qalabka tacliinta ee Itoobiya,oo dhamaantood u fidiyay taageero  dhanka sawirada ah. Waxaa mahadnaq mudan shaqadii Helen PaPworth ee tabaruca ahayd, iyada oo ahaan jirtay Waaxda Cilmiga Milgaha qaranka iyo Anshaxa islamarkana tafatirtay,hubisay buuga ardayga iyo buuga baraha ee ku meelgaadhka ahaa.Waxaa kale oo mahadnaq mudan tabarucayasha Ingiriiska ee lagu meleeyay wasaarada dhexdeeda ee awood noo siiyay inaan isticmaalo khibradooda mashruucan iyo kuwo kaleba.

Waxaa kale oo la ilaawin Karin oo mahadnaq balaadhan mudan Xafiiska Waxbarashada Dawlad Deegaanka Somalida oo door wayn ka qaatay dadaalka loogu jiro in la soo saaro buug taya leh.

© Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka Itoobiya, Wasaarada Waxbarashada.

Daabacaada koobaad, 2002 T.I

Dib u qabaynta, daabacaad iyo soo saarida buugta waxaa wasaarada waxbarashada u sameyay shirkada gaarka ah ee daabacaada Laxmi iyo Gopsons Paper Ltd, Indiya heshiiska tirsigiisu yahay GEQIP No.ET-MOE/GEQIP/IDA/ICB/G-10/09-B.

Xuquuqda buugani way dhawran tahay.Qayb ka mid ah daabacaada dib looma saari karo lamina kaydsan karo si markale dib loogu soo saarro ayadoo la adeegsanayo qalabyada kala duwan ee daabacaada. Waa in ogolaansho laga helo mulkiilaha ama fasax qoraal oo ku ogolaanayo inaad isticmashid daabacaadaha lagu mamnuucay xeerarka Jamhuuriyafa Dimuqraadiga Fedaraalka Itoobiya eek u cad Federal Negarit Gazeta,bayaanka tirsigiisu yahay 410/2004 ee xuquuqda daabacaada(Copy Right and Neighbouring rights protection proclamations, 10th year, No, 55, Addis Ababa, 19 July 2004.

# Hordhac

Waxbarashada iyo horumarku waa laba shay oo aad iskugu dhaw islamarkana aan kala maarmayn. Taasi waa sababta ugu muhiimsan ee aan u leenahay waxbarashadu waa furaha horumarka ee Itoobiya.

Dunida casriga ah ee aan ku noolahay qof kasta wuxuu u baahan yahay inuu yeesho a qoon cusub, xirfad iyo aragti wanaagsan. Waana u jeedada manhajkan, kaas oo ka turjumaya nidaamka waxbarasho ee dalka, oo ay tahay inuu jawaab ka bixiyo isbadalka xaaladahan.

Mudo shan iyo toban sano ah ayaa laga joogaa markii ay Itoobiya hirgalisay siyaasada waxbarashada iyo tababarada. Tan iyo xiligaas, dalkeenu wuxuu kasoo hoyay guulo wax ku ool leh dhinacyada fidinta waxbarashada, isku dhelitirnaanta iyo jaan go'naanta mabaadiida waxbarasho. Waxaa kale oo dadaal dheeri ah loo galay loona gali doona kor u qaadida tayada waxbarashada.

Si loo joogteeyo horumarkan, waxay wasaarda waxbarashadu dajisay jihooyin lagu horumarinayo manaahijta. Qorshahu wuxuu taabanayaa dhamaanba maadooyinka iyo fasalada ka hor waxbarashada dugsiyada hoose, dugsiyada hoose, dugsiyada dhexe, waxbarashada guud ee dugsiyada sare iyo tan heerka u diyaargarowga tacliinta sare. Ujeedadeeduna waa in la hirgaliyo qodobadii iyo mabaadiida ku cad siyaasada waxbarashada iyo tobarada, waxayne gogol xaadh u tahay diyaarnta dhamaanba qabbyana manaahijta la xidhiidha uuna ka mid yahay buuganta tilmaanu Bare liyo kan ardayda ee ku lammaaan.

Daabacaada iyo dib usoo saarida jihooyin u dajisan manhajka iyo buugaag cusub ama tilmaame bare ma ehe xal ka kali ah ee lagu xaqiijin karo tayada waxbarashada ee dal walba. Kor u qaadis joogta ah waxay u baahantahay ka qaybgalka dhamaanba qaybaha doorka ku leh. Kaalinta barayaasha waa in ay nqote mid aad u firficoon u isugu jirta heer bare ilaa mid hawlwadeen ah ama hormuud. Si gacan loogasiiyo arintan, barayaashu waxay heleen, ayna sii wadandoonaan tobobaru iyo kor uqaadida xirfadoodo.

Wasaarada waxbarashada

# Tusmada Buuga


| | | |
|---|---|---|
| Cutubka 1: | Nidaamka Dimuqraadiyada | 1 |
| Cutubka 2: | Sarreynta Sharciga | 15 |
| Cutubka 3: | Sinaanta | 28 |
| Cutubka 4: | Cadaalada | 44 |
| Cutubka 5: | Wadanniyada | 56 |
| Cutubka 6: | Masuuliyadda | 68 |
| Cutubka 7: | Hawl-karnimada Shaqo | 78 |
| Cutubka 8: | Isku Filaanshaha | 90 |
| Cutubka 9: | Kaydsashada | 98 |
| Cutubka 10: | Ka qayb-galka Fir-fircoon Ee Bulshada | 103 |
| Cutubka 11: | Aqoon Raadsi | 113 |

CUTUBKA 1

# Nidaamka Dimuqraadiyada

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-

- Fahmaan macnaha dhismaha nidaamka Dimuqraadiyada wuxuu yahay.
- Fahmaan xuquuqda bini'aadamka iyo kuwa dimuqraadiyadeed ee muwaadiniinta.
- Fahmaan xarrumaha dimuqraadiyadu muhiimada ay leeyihiin.
- Ka heshiiyaan khilaafka u dhexeeya isla markaana fahmaan muhiimada iyo faa'iidada ay leedahay in si nabad galyo ah u wada noolaadaan.
- identify the similarity and difference between federal and regional states.

## 1.1. Dhismaha Hanaanka Dimuqraadiyada

### 1.1.1. Macnaha Dhismaha Nidaamka Dimuqraadiyada




Jaantuska 1.1.1. Xubnaha naadiga milgaha qaranka oo ka qaybqaadanaya tababar loo qabtay.members on training

- sawirkan kor ku xusan idinka oo ka duulaya, qeexa macnaha dhismaha nidaamka dimuqraadiyada.

Marka la leeyahay dhismaha nidaamka dimuqraadiyada, waxaa jira tilmaamo ficileed oo gacan ka geysan kara hirgelinta iyo hanashada dimuqraadiyada. Dhismaha nidaamka dimuqraadiyada waxa inta badan xooga lagu saaraa sidii loo qaban lahaa ficilada waxqabad ee sida rabaynta muwaadin dimuqraadiyadeed, iyo waliba sidii loo hanan lahaa hab-dhaqanka dimuqraadiyada. Marka laga hadlayo rabaynta muwaadinka dimuqraadiyadeed, waa inuu noqdaa mid ku sifoobay astaamahan soo socda:

b) garashada, xurmeynta iyo difaacida xuquuqaha dimuqraadiyadeed iyo kuwa aadamaha ee mwaadiniinta islamarkaana sicad u garanaya una guta sida ugu haboon.

t) aminsan islamarkaana aqbalay/qaatay/ inay kala duwanaantu tahay mid waxtar u lehdhismaha hanaanka dimuqraadiyada

j) si cad u ogsoon ujeedooyinka aas'aassiga ah iyo waxtarka dimuqraadiyadu uleedahay isirka,diinta,luqada,aragtida, iwm iyada oo ay kaladuwanaanta shucuub halkeeda tahay, haddana waxaa loo baahanyahay in lagu wada noolaado dulqaad, nabad iyo isjacayl ku dhisan ujeedooyinka guud ahaaneed.

x) Aaminsan sareynta sharciga

Kh) ku dheehantahay wadaniyad iyo hindisayaal shaqo.

1. kala duwanaanshaha dadka ee dhinacyada aragtida ama rabitaanka oo loo baahanyahay in la xurmeeyo ama la aqbalo iyadoo dulqaad loomujinayo fikradaha iyo aragtiyada dadka kale.
2. Ismaan dhaafyada oo hab-nabadgelyo, wadaxaajood iyo is aaminaaad lagu xaliyo.
3. Is ku dhacyada lagu xalin kariwaayo wadahadalka oo loo gudbisto cid gar qaad ka noqoto, islamarkaana lagu qanco go'aan kasta oo ay ka soo saaraan.

## Layliska 1

Su'aalahan soosocda ka jawaaba


1. Idinka oo soo qaadanaya Afar tusaale, sheega macnaha dhismaha hanaanka dimuqraadiyada.
2. Sidee loo abuuri karaa muwaadin ku rabaysan dimuqraadiyada? Kawaada hadla
3. Sidee loo hannan karaa nidaamka dimuqraadiyada? Kawada xaajooda.

Nidaamka dimuqraadiyadu waa hannaan lagu xurmeeyo xuquuqaha dimuqraadiyadeed iyo kuwa Aadamaha ee muwaadiniinta, iyo xuquuqda sinaansho ee quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta. Waana mid cida shacabku doortay talada loogu dhiibo, marka ay ka biya-diidaana cida hogaaminaysa sida ay wax uwado, talada lagaga qaado, islamarkaana cidii badali lahayd lagu soo doorto hab-nabadgelyo. Sidaas awgeed, nidaamka dimuqraadiyadu waa hab lagu xaqiijiyo inuu shacabku yahay kan awooda ugu sareysa leh.

## Shaqo kooxeed

Idinka oo ka duulaya dhismaha nidaamka dimuqraadiyada, warbixin-qoraal ah kasoo diyaariya ficilada waxqabad ee dalkeena laga wado wakhti xaadirka.

### 1.1.2. Qodobada Aasaasiga ah ee dhismaha hanaanka Dimuqraadiyada




Jaantuska 1.2. Qodobada Aasaaska u ah dhismaha nidaamka Dimuqraadiyada

- Sawirkaaskore maxaad ka fahanteen?
- Qodabeeya qodabada aas aaska u ah dhismaha nidamaka dimuqradiyada

Waxaa jira qodobo ama xaalado lagama maarmaan u ah in la abuuro hanaan (nidaam) dimuqraadiyadeed oo ka hanaqaada dalka. Haddaba, qodobada/arrimaha aasaasiga ah ee dhismaha nidaamka dimuqraadiyadu waa kuwan hoos ku xusan:-

**B. U hogaansanaanta sareynta sharciga**

Sareynta sharcigu waa mid aad muhiim u ah marka laga hadlayo nidaamka dimuqraadiyada. Sharciga ayaa ah kan ugu sareeya,islamarkaana lagu socodsiinayo hawl kasto laqabanayo.

**T. Ilaalinta rabitaanka dadweynaha iyo xuquuqda Muwaadiniinta.**

Saldhiga koobaad ee nidaamka dimuqraadiyadu waa madax-banaanida shacabka. Sidaas awgeed, muwaadiniintu iyagoo xor ah waxay awood u leeyihiin in ay kalsoonida kala noqdaan wakiilkii ama xukuumadii ay horey u soo doorteen hadii ay xilkii iyo shaqadii loo wakiishay ka soo bixi waydo.

**J. Dhawrista (Xurmaynta) Xuquuqda Sinaanta.**

Dhammaan qaramada, qawmiyaadka iyo shucuubta kala duwan ee ku dhaqan dalka, sharciga hortiisa way u siman yihiin iyada oo aan loo eegayn (fiirinayn) midabkiisa, qowmiyadiisa, diintiisa, luqadiisa, jinsiyadiisa (Lab/dhadig) iyo aragtidiisa siyaasadeedba. Sidoo kale, waxay leeyihiin xuquuqo isku mid ah sida tan dhaqan-dhaqaale, bulsho, siyaasadeed IWM.

**X. Xuquuqda Codaynta doorasho iyo tan tartanka doorasho.**

Ruux kasta ama muwaadin kasta oo gaadhay da'da loocayimay doorashooyinka dalka wuxuu xaq u leeyahay in u dhiiban karo codkiisa gaar ahaaneed isla markaana waxaa kaloo u xaq u leeyahay in u isutaagi karo tartan doorasho xor ah iyada oo aan wax handadaad ama usan jirin wax cabsi galin ah. Matalan sharciga doorashooyinka qaranka Itoobiya waxa u dhigayaa in muwaadin kasta oo gaadhay da'da 18 Jir leeyahay xuquuq u wax ku dooran karo isla markaana la dooran karo isaga laftiisa.

- Ensures the right of all eligible citizens to elect and to be elected regardless of sex, ethnicity, language, religion etc.
- Ensures the right of people to be governed by their representatives.
- Ensures the right to participate in a political system directly or indirectly.

**Kh. Dhawrista (Xurmaynta) Xuquuqda Adeegsiga Luqada Afkaaga-hooyo.**

Qaran ama qowmiyad kasta waxay xaq u leedahay inay adeegsan karto luqada Afkeeda-hooyo haday tahay kuhadlisteeda iyo wax ku barashadaba. Tusaale, Deegaanka Soomaalidu wuxuu hada isticmaalaa luqada Af-soomaaliga oo ah luqada Afka-hooyo. Dugsiyada hoose-dhexe (1 – 8aad) waxaa wax lagu bartaa luqada Af-Soomaaliga. Sidoo kale waxaa Xafiisyada Dawlada Deegaanka Soomaalida lagaga shaqeeyaa Af-Soomaali, Sidaas awgeed, Afka rasmiga ah ee Deegaanka Soomaalidu waa Af-Soomaali.

**Layliska 2**

- Waa maxay faa'iidada ay leedahay Adeegsiga luqada Afka-hooyo? Ardaydu ha ka wada hadlaan!

**D. Ka qayb galka firfircoon ee muwaadiniinta**

Nidaamka dimuqraadigu maaha mid ay dhisi karaan koox ama dad tiro yar, balse waamid ubaahan inay bulshadu sifir-fircoon uga qayb qaadato.


**R. Dhawrista Xuquuqda Xoriyatul qawlka, shirarka iyo qoraal sameyntaba.**

Muwaadiniintu waxay xor u yihiin in ay afkaarta ama aragtida ay qabaan ku gudbin karaan hadal (odhaah) ama qoraal ahaanba. Sidoo kale, waxay xor u yihiin in ay samayn karaan shirar (isutag urur) oo ah mid nabadgelyo ku dhisan. Haddaba, xuquuqdani waa mid ka reebaysa muwaadiniinta in baqdingalin iyo cagajuglayn loo geysto.

**Layliska 3**

1. Ardeydu hakawada xaajoodaan siyaabaha hadal ama qoraal ahaan loogu cabiri karo ra'yiga ama aragtida
2. Fadlan, Baruhu ha u fududeeyo ardayda fasalka in ay wajahaan habka baris-barashada, iyagoo u fadhiisanaya koox-koox yar kadibna fasalka ha u soo bandhigaan.

## 1.2. Ahmiyada ay leeyihiin Hay'adaha Daryeelista Xuquuqda Aadamaha iyo tan Dimuqraadiyada




Jaantuska 1.3. Hay'adaha daryeelista Xuquuqda aadanaha ururada u taagan

Idinka oo ka shidaal qaadanaya hay'adaha dimuqradi, ee daryeela xuquuqaha Aadamaha iyo kuwa dimuqradiyada sheega waxtarkooda

- Ujeedada loogu baahday ilaalinta xuquuqaha aadamha iyo kuwa dimuqraadiyadu, way badantahay. Kuwa ugu muhiimsana waa kuwan soosocda;

b) xuquuqaha dastuuriga ah si aan loo leexin fasiraadooda, islamarkaana sida ugu haboon loogu fuliyo.

t) meelkasta hanoqotee, waa inaysan fulin dhaqanada bulsho ee ka hor imaanaya dastuurka islamarkaana ku xadgudbaya xuquuqaha.

Hadaba, si loo gaadho ujeedooyinka laga leeyahay aslaaxinta (sugida) xuquuqaha aadamaha iyo kuwa dimuqraadiyada, waa in la helo hay'ado dimuqraadi oo ka shaqeeya ilaalinta arintan. Hay'adaha daryeelisata xuquuqaha aadamaha & kuwa dimuqraadiyada waxaa loo kala saari karaa kuwa dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahayn. Kuwa dawliga ah waaa ka mida ah sida? Maxkamadaha, saldhigyada booliska, hay'ada qaabilsan cabashooyinka, koomishinka xuquuqda aadamaha, koomishinka Anshaxa iyo ka hortaga musuq-maasuqa,hay'adaha warbaahinta gacanta ugu Jira dawlada. Hay'aadaha dimuqraadi ee aan dawliga ahayn ee dalka dhaxdiisa ka shaqeeya ururada bulshada rayidka ee caalamiga ah, ururada bulshada rayidka ah ee wadaniga ah iyo hay'adaha warbaahinta gaarka loo leeyahay.

Guud ahaan hay'adaha dimuqraadi ee kartida badan waxay gacan ka geystaan dhawrista xuquuqaha aadamaha iyo kuwa dimuqraadiyadeed ee shacabka iyago u sahlaya bulshada sidii ay uga faaidaysan lahaayeen xuquuqahooda.

Maxkamadaha: maxkamaduhu sida hay'adaha kaleba, iyagna waa hay'ad hormood ka ah sugida sareynta sharciga. Maxkamaduhu iyagoo ka shidaal qaadanaya sharciga ayay garsooraan dacwadaha (muranada) soo kala dhexgala bulshada iyagoo ka madaxbanaan wax kasta oo la xidhiidha eexda iyo nacaybshaha dhinacyada is haya. Aas'aasida

maxkamaduhuna waa mid salka ku haysa dastuurka sidookale Aas'aaska garsoorkuna waa mid salka ku haysa erayga ah dhamaan dadku sharciga way u simanyihiin. Nidaamka shaqo ee maxkamuduna waa mid ka madaxbanaan In lagu shaqeeyo arimaha laxidhiidha kala jeclaysiga sida midabka, jinsiga, luqada, diinta, siyaasada iyo arimaha kale ee kala duwanaansho.

**Booliska:** boolisku waa hay'ad utaagan sugida/ilaalinta xuquuqaha aadamaha iyo kuwa dimuqraadiyada ee lagu xusay dastuurka, islamarkaana xaqiijiya nabadgelyada iyo amniga shacabka

**Koomishinka xuquuqda aadamaha:** ka sokow difaacida xuquuqda aadamaha, waa hay'ad u taagan qaabilaada cabashooyin ka dadka leh xuquuqdaydii baa lagu xadgudbay, islamarkaana furta baadhitaanka ku haboon kiisaska cabashooyinka la soo gaadhsiyo, ugu dhambeyntiina ka qaadata go'aan la xidhidha cabashada. Koomishinka xuquuqda aadamuhu wuxuu xaqiijiyaa oo kale inaysan sharciyada, bayaanada iyo qawaaninta ka soo baxa dawladu ka hor imaanin xuquuqaha aadamiga ee muwaadiniinta. Marka laga reebo arimaha maxkamaduhu gacanta ku hayaan, dhamaan cabashooyinka la xidhiidha xadgudubyada loo geysto xuquuqaha aadamiga koomishinkani wuu soo dhaweeyaa iyadoonan cidna la weydiinayn wax kharash ah inay bixiyaan

Hay'ada qaabibaan cabashooyinka:- waa hay'ad utaagan ilaalinta xuquuqaha muwaadiniinta islamarkaana eegta kiisaska cabashooyinka dadka leh hay'adaha dawlada ayaa xadgudubyo noo geystay iyadoo markaana furaysa baadhitaano ku aaddan cabashooyinka la soo gaadhsiiyo, kadibna go'aan ka soo saarta arrimaha cabashooyinka laxidhiidha.

Hay'adan waa mid dabagasha masuuliyiinta iyo shaqaalaha dawladu inay u shaqeeyaan si waafaqsan sharciga iyo inay ka gudbeen heerka awoodohooda loogu talagalay. Sidoo kale, hay'adani waa mid u taagan xaqiijinta in ay hay'adaha fulintu sharicga u fuliyeen sida uu dhigayo sharcigu, islamarkaana maamulka dawlada looga dhigi laha mid hufan oo tayo iyo waxqabad hufan leh.

**Koomishinka Anshaxa iyo ka hortaga musuq-maasuqa:** Waa hay'ad loo aas'aasay sidii loo abuuri lahaa bulsho ka dhisan xaga anshaxa, islamarkaana la halganta falalka musuq-maasuqa. Hayadu waa mid ka hawlgasha dhinacyada fidinta waxbarashada anshaxa iyo la dagaalanka musuq-maasuqa, la dagaalanka dambiyada falalka musuq-maasuqa, fashilinta, baadhitaano ku samaynta iyo dacwad ku oogista cida lagusoo cedeeyo ama lagu tuhmo musuq-maasuqa

**Ururada bulshada rayidka:** ururada bulshada rayidka ahi waa hay'adaha ka baxsan qaab-dhismeedka dawliga ah oo ay aas'aasaan muwaaninintu dalku. ururada bulshada rayidkuna waa kuwo gacan ka geysta xalinta mushkildaha ka dhex aloosma bulshada dhexdeeda. Sidoo kale, waxay saamayn ku yeeshaan nidaamka shaqo ee hay'adaha dawliga ee u adeegaya bulshada

Warbaahinta; Hay'adaha warbaahinta waxaa ka mid sida Raadiyaha iyo Tilifishinka, Jaraaidka, Majaladaha, iwm. Hay'adaha warbaahintu, waxay u taaganyihiin gaadhsiinta bulshada xogta dhabta ah oo dhex-dhexaad ah, islamarkaana bulshada ka dhisa xaga agoonta la xidhiidha xaaladaha iyo arimaha dalka gudihiisa iyo dibadiisaba.

### Layliska 4

Kajawaaba su'aalahan soo socda

1. Maxaa loo daryeeelaa xuquuqaha aadamaha iyo kuwa dimuqraadiyada kawada hadla
2. Hadii ay jiraan hay'ado ka shaqeeyaa degmooyinkiina ilaalinta xuquuqaha aadamaha iyo kuwa dimuqraadiyada falanqeeya, islamarkaana sheegaa hawlaha waxqabad ee ay ka qabteen dhinaca daryeelista xuquuqaha.

### Shaqo kooxeed

Hay'adaha dimuqraadi ee kor lagu soo sheegay idinka oo kaduulaya isku qaybiya kooxo,islamarkaana waraaqo intaad kuqortaan magacdooda bakhtiyaa nasiib uqaata. Kadibna koox kasta iyadoo tagaysa xafiisyada hay'adahaas hakasoo diyaariso warbixin.Hadii ayna xafiisyo goobihiina kulahayn,adeegsada ilo-kaladuwan,qiimayna ku sameeya,warbixin kasoo diyaariya.

## 1.3. Hab-Nabadgelyo ku xalinta Farqiga iyo isfahan la'aanta



Jaantuska 1.4. Wada tashi Saaxiibtinimo

1. Idinka oo fiirinaya sawirkaas kore, sheega waxay ardaydu qabanayaan,

### Sadexda saaxiibo

Ayaan, Rooda iyo Hodan waa ardey dhigta Fasalka 8aad 'T'. Waa saxiibo aad iskugu dhaw, ka sokow tan fasalka. Waxayna ku wada nool yihiin haltuulo (hal xaafad). Waxay ku heshiiyeen inay sameystaan/ saartaan jadwal-qorshe oo ay Sabti iyo Axada ku akhristaan duruusta casharadadooda. Kadib, waxay bilaabeen dejinta jadwalkaas qorshe iyagoo kawada hadlaya sidii ay iskula meel dhigi lahaayeen. Hasa yeeshee, waxaa ku adkaatay inay diyaarsadaan jadwaalka midaysan, maadaama oo uu sadexdaba rabitaan koodu kala duwanaa. Ugu horeyn maxaynu akhrina? Su'aasha ah Si la iskula meel dhigo ayay Ayaan soo jeedisay in laga dhigo **xisaab, Roodana Ingiriis** ayay tidhi halka ay **Hodan** dhinaceeda ka tidhi waa in laga dhigaa Sayniska. Hadaba, diyaarinta qorshaha jadwal ee Sabtida iyo Axada iska daaye, waxay qarka u saaranyihiin inay ku coloobaan gabdhahaas saaxiibada ah.

### Layliska 5

Idinka oo ka duulaya sheekada kor ku xusan ka shaqeeya su'aalaha

1. Hadii aad ahaan lahaydeen sadexdaas saaxiibo, sidee baad u xalin lahaydeen kala duwanaanshaha u dhexeeyay gabdhahaas?
2. Sidee ayaad u diyaarin lahaydeen jadawal u cuntama sadexdaba?

### Arimaha aas'aasiga ah ee xalinta khiilaafaadka/mishkiladaha

Ardayeey Bulsho kasta oo ku nool goob, deegaan ama wadan waxay leedahay hab-dhaqameedyo iyo sharciyo ay ku maareysato ama ku xalisato farqiyada iyo iskudhacyada ka aloosma iyada gudaheeda.

Sidaas awgeed, bulshadeena Soomaalidu waxay leedahay siyaabo lagu maareeyo (Xaliyo) farqiga iyo isfahan la'aanta soo kala dhax-gasha laba dhinac, laba kooxood ama laba shaqsiba. Markaas, hababka/siyaabaha lagu xalin karo khilaafaadka waxaa ka mid ah:-

- Wada xaajoodka
- Isdhagaysashada
- Iskudul qaadashada.

**B. Wadaxaajoodka.**

- Wadaxaajoodku ama Wadahadalku waa mid ka mid ah wadooyinka si nabadgelyo ah oo loogu xaliyo/maareeyo khilaafaadka iyo iskudhacyada.
- Habka wadaxaajoodku waa mid laba-geesood ah oo ay ku kulmaan dhinacyada iskhilaafsani ama isku dhacsani
- Wadahadalku waa hab ay si toos ah ugu kulmaan dhinacyada ismaandhaafsani si ay go'aan uga gaadhaan khilaafaadkooda
- Dhinacyada ku lugta leh wadaxaajoodka waa inay noqdaan kuwo aaminsan xalinta maareynta ismaandhaafka ka dhexeeya.
- Habkan wadaxaajoodku waa mid u baahan karti dhaqan-dulqaad iyo is ixtiraam
- Dhinacyada iskhilaafsani waa inay ka taxadaraan marka ay gartooda sheeganayaan ay aflagaado u gaystaan dhinaca kale.
- Habka wada hadalku, waa mid ay dhinacyada ku lugta lihi ay ku gaadhaan heshiis u cuntama labada dhinacba.

**T. Isdhagaysiga/Ismaqalka.**

Isdhagaysigu waa mid ka mid ah hababka xalinta khilaafaadka iyo iskudhacyada.

Isdhagaysigu waa (xaalad) mid la xidhiidha lahaanshaha rabitaan aynu ku dhagaysan karo afkaarta, aragtida iyo doodaha dhinacyada kale. Dhinaca kale, isdhagaysigu waa hanaan aynu ku dhiiban karo afkaarteena, aragtideena iyo dareenkeena aan maanka ku hayno, si taxadar ku jiro.

Ismaqalku waa xaalad gacan ka geysan karta abuurista jawi wanaagsan oo ay dhinacyada iskhilaafsani kuwada hadli karaan isla markaana isfahan u ku dhaxmari karo. Marnaba, wax isfahan/heshiis ahi madhici karo haddii aan is-maqal iyo isdhagaysi jirin. Haddaba, in lahelo isfahan ama heshiis ay dhinacyo iskhilaafsani gaadhaan, waxaa lagama maarmaan ah in ay horta dhinacyada ismaandhaafsani la yimaadaan ismaqal ama ishagaysi la xidhiidha aragtida, afkaarta iyo doodaha ay kala aaminsan yihiin si ay ku dheehan tahay anshax-wanaag, is-ixtiraan iyo isqadarin ay isu hayaan.

**J. Dul-qaadka.**

Dulqaadku waa hab ku dhisan lahaanshaha karti iyo rabitaan la jaanqaadi kara dabeecadaha, fikradaha, caadooyinka, caqiidooyinka, aragtiyada, IWM, ee ay leeyihiin dadyaw kala duwani.

Dulqaadku waa ficil ay ku dheehan tahay isfahan iyo wada noolaansho ka dhexeeya bulsho/dadyaw kale aaminsan ama haysta dhaqano iyo fikrado kala jaad ah, haday tahay marka aynu joogno guriga, iskuulka, goobaha-dadweynaha, dalka iyo Dunidaba guud ahaan.

Dulqaadku waa tubta/tabta ugu wanaagsan ee ay dhinacyo/bulsho kala jaad-jaad ahi, kuwada socon karaan, isla markaana ay nolol kuwada socon karaan, islamarkaana ay nolol kuwada qaybsan karaan, iyaga oo dhinac iska dhigaya farqiga kala duwanaanshahooda. Haddaba, sida kaliya ee aan dulqaad ku muujin karo, waa inaga oo marka hore u aragna kala duwanaanshaha (laftigiisa) mid wanaagsan, ama waa inaga oo hortaba kala duwanaanshaha ka eegna dhinac fiican. Ugu dambayn, dulqaadku waa hab/tab ay dhinacyada kala aragtida, fikradaha iyo kala luqadahaba ahi, isugu muujiyaan dareen kudhisan garawshiyo, ammaan iyo dulqaad midba kan kae u hayo.

### Layliska 6

Kajawaba su'aalha soo socda

1. Sheega mushkiladaha iskudhac/khilaaf ee ka dhaca meelaha kaladuwan sida hab-nabadgalyo logu xalin karo
2. Tusaale ka bixiya kaalinta wadaxaajoodka, dulqaad iyo ismaqalka ku leeyihiin xalinta khilaafaadka

## 1.4 Dawladaha federaalka iyo kuwa deegaanada

### 1.4.1. Midnimada iyo kala duwanaanta

- sheega arimaha muujinaya midnimada dawaldaha federaalka iyo kuwaa deegaanada.

**Midnimada:** qaab-dhismeedka jamhuuriyada dimuqraadiga federaalka Itoobiya ee ka kooban dawlada federaalka iyo kuwa deegaandu, waa astaanta ugu muhiimsan ee tilmaamaysa. Midnimada dawlada federaalka iyo kuwa deegaanada. Waxaa kale oo ay ka midaysanyihiin qaab-dhismeedka gole-awoodeed ee dawlada federaalka iyo kuwa deegaanada oo labadooduba ka koobanyihiin sadexda-gole ee kala ah: golaha sharci-dejinta, goaha-sharci fulinta, iyo golaha garsoorka (sharci tarjumaada).

Tani kale ee ay ka midaysanyihiin dawlada federaalka iyo kuwa deegaanadu, waa ilaalinta iyo xurmaynta dastuurka federaalka oo uu labadaba xil-ka saaranyahay.

**Kala duwanaanshaha:** si la mida waxyaabaha ay ka midaysanyihiin oo kale, ayaa waxaa jira dhinaca kale kala-duwanaansho u dhexeeya dawlada federaalka iyo kuwa Deegaanada.

Kala duwanaanshaha ugu horeeya ee u dhexeeya waa tan golaha federeeshinka oo ka jira dawlada federaalka, balse aynan deegaanadu lahayn. Golahaas, oo ka kooban xubnaha qaramada qowmiyada, iyo shucuubta kala duwan ee dalka. Kaladuwanaanshaha kale ee aasaasiga ah waa tan dawlada federaalka oo u xilsaaran fulinta arimaha qaran sida: lacagaha, xooga difaac iyo arimaha dibada. Halka ay deegaanaduna u xilsaaranyiin arimaha maamuladooda.

### Layliska 7

Kawada-xaajooda su'aalaha soo socda:

1. Maxay yihiin cadeymaha (tilmaamaha) muujinaya midnimada dawlada federaalka iyo dawladaha deegaanada?
2. Maxay yihiin cadaymaha muujinaya kala duwaanaanta dawalada federalka & kuwa deeganada

### 1.4.2. Awooda Wadajirka ah ee dawlada federaalka iyo xukuumadaha Deegaanada

Waxaa jira Awoodo ay wada jir u leeyihiin xukuumada federaalka iyo kuwa Deegaanadu. Sida ku cad qodobka 98aad ee dastuurka jamhuuriyada dimuqraadiga federaalka Itoobiya, awood-wadaaga ay leeyihiin waxaa ka mid ah:-

b) Xukuumada federaalka iyo Deegaanadu waxay si wada jir ah u soo rogaan, islana ururiyaan macaashal-macaashka ganacsiga, kan shaqada iyo canshuurta iibka ee shirkadaha hay'adaha horumarka ee ay sida wada jirka ah u aas'aasaan.

t) Waxay si wada jir ah u soo rogaan islana ururiyaan macaashal-macaashka ganacsiga ee shirkadaha kan faa'iidada xubnaha shirkadaha iyo waliba canshuurta iibka.

j) Waxay si wada jir ah u soo rogaan, una wada ururiyaan macaashal-macaashka dakhliga shaqooyinka waaweyn ee macdanta, dhammaan batroolka iyo gaaska dabiiciga ah iyo waliba kuwa laga bixiyo canshuurta loo yaqaan “royalty”.

### Layliska 8

1. Dawlada Itoobiya imisa gole ayay ka kooban tahay? Maxayse tahay ujeeddadu? Tafaasiil ka bixiya?
2. Awood qaybsiga golayaashu muxuu ku saleysan yahay?

### 1.4.3. Hawlaha shaqo ee Maamulada Magaalooyinka

- Waa kuwee labada ismaamul-magaalo ee Dawlada Federaalka u tirsan?

Ka sokow sagaalka dawlad-deegaan ee soo dhisay dawlada Federaalka, waxaa kale oo jira laba ismaamul-magaalooyin oo kala ah Addis Ababa iyo Diri-Dhaba. Hadaba, hawlaha shaqo ee maamulada magaalooyinka waxaa lagu sheegay bayaaanada kala ah: bayaankii Addis Ababa-87/1999, iyo bayaankii Diri-Dhabe-4/4/1996. Hawlahaas oo ah:-

b) Soo roggista iyo so ururinta cashuuraha dakhli ee hoos yimaada maamuladooda

t) Qorshaynta iyo fulinta barnaamijyada horumarinta dhaqaale iyo bulshaba

j) Ansixinta iyo maamulista miisaaniyada iyo waliba ka soo daynsashada ilaha kale ee dakhliyada dalka.

x) Maamulista dhulka iyo khayraadka dabiici ee laga helo maamulada magaalooyinkooda.

Kh) Aas'aasida xoog boolis oo ka shaqeeya sugida amniga iyo xasiloonida shacabka ku dhaqan ismaamulka magaalada.

d) Aas'aasida xafiisyada dawliga ah iyo waliba hay'adaha horumarineed ee ismaamulka magaalada, islamarkaana go'aaminta Awoodaha iyo waajibaadyadooda waxqabad.

r) Go'aaminta xaaladaha maamulka shaqaale ee ismaamulka magaalada.

s) Awaamiir iyo shuruuc ka soo saarista arimaha hoos yimaada ismaamulka magaalada

sh) Heshiis lagalida magaalooyinka dhigooda ah, islamarkaana lagula mataaneynayo kuwa dibada dhinacyada farsamada, dhaqaale iyo kuwa dhaqanba

dh) Heshiis toos ah oo lala galo qaybaha iyo xafiisyada dawlada Federaalka, iyo waliba dawlad-deegaanada dalka oo xidhiidh iyo heshiisyo toos ah lala sameeyo.


### Layliska 9

Su'aalaha soo socda ka jawaaba

1. Sheega 5 kamida hawlaha wax qabad ee ismaamulada magaalooyinka
2. ismaamulada magaalooyinka aad soo sheegteen kawada hadla hawlaha wax qabad ee ay qabtaan, idinka oo qodobaynaya.

## 1.5. Xidhiidhka arimaha dibada ee Itoobiya

### 1.5.1 Cilaaqaadka ay Itoobiya la leedahay dalalka caalamka



Jaantuska 1.5. Xidhiidhka Caalamiga ee Itoobiya

- Sheega arimaha ay itoobiya cilaaqaadka kala leedahay wadamada caalamka sida ka muuqata sawirka

Xidhiidgka ay Itoobiya la leedahay wadamada caalamka waa mid soo jireen ah.Sida taariikhda miilaadiga 1945 Itoobiya waxay ka mid ahayd aas'aasayaashii Qaramada Midoobay(Q.M.). Wakhtigan xaadirka ahna waxay cilaaqaad la leedahay tusaale wadamada kuyaala Bariga dhexe,Aasiya,Yurub iyo Ameerika. Xidhiidhkaasnna waamid taabanaya dhinacya badan sida dhaqaalaha,siyaasada,ganacsiga iyo, dhaqanka.

### Layliska 10

Ka jawaaba su'aalaha soo socda:

1. Waa kuwee dalalka ay itoobiya xidhiidhka wanaagsan la leedahay?
2. Heerkuu taaganyahay dalalkaas xidhiidhkoodu?

### 1.5.2 Faa'iidada (danaha) ay Itoobiya ka hesho Wadamada xidhiidhka ay la leedahay

- Xidhiidhka ay Itoobiya laleedahay wadamada caalamka waa mid ka tarjumaya danta qaranka iyo tan shacabka dalka.

Xidhiidhka siyaasada arrimaha dibada ee Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya waa mid ku dhisan ilaalinta iyo xurmaynta danaha dhaqan-dhaqaale, bulsho siyaasad iyo tan dhaqanba ee shucuubta dalkan Itoobiya.

### Layliska 11

Kawada hadla su'aalahan soo socda.

1. Kawada hadla faaidooyinka ay Itoobiya ka hesho wadamada caalamiga ee ay xidhiidhka la leedahay
2. Idinka oo kooxo kala duwan u fadhiisanaya islamarkaana soo qaadanaya dalal kaladuwan, sheega faaidooyinka ay Itoobiya ka heshay dalalkaas ay xidhiidhka la leedahay

## Gunaanadka Cutubka 1aad

Nidaamka dimuqraadiyadu waa hanaan dhawraya ama xurmaynaya xuquuqaha aadamaha iyo tan dimuqraadiyadaba, sidoo kale waa mid ilaalinaya xuquuqda sinaansho ee qaramada, qowmiyadaha & shucuubta kala duduwan ee dalka kuwada nool. Dhismaha, hanaqaadka iyo ku dhaqanka nidaam dimuqraadiyadeed, waa hawl adag oo u baahan dadaalo fir-fircoon oo lala yimaado. Haddaba, isku doo wada duuboo, dhismaha nidaam dimuqraadiyadeed, waa mid lagu doonayo in la abuuro muwaadiniin dimuqraadiyadeed iyo waliba dhaqaajinta dhaqan dimuqraadiyadeed oo laga hirgasho dalka oo wax katara arrimaha maamulka suuban, sareynta sharciga, sinaanta, cadaalada, dhawrista xuquuqaha Aadamaha, iyo tan dimuqraadiyada Afkaartaada oo aad six or ah u dhiibato xuquuqda cod-dhiibasho iyo tan tartanka doorasho ama musharaxnimo. Qodobadaasina, waa kuwo aas'aas u ah dhismaha hanaanka dimuqraadiyadeed.

Aslixinta xuquuqaha Aadamaha iyo tan dimuqraadiyada waa xaalado u baahan jiritaanka hay'ado dawli ah iyo kuwo aan dawli ahaynba. Hay'adaha dimuqraadiga ah ee dawliga ah waxaa ka mid ah; sida: Maxkamadaha, Booliska (Bilayska), hay'ada cabasho dhagaysiga, koomishinka xuquuqda Aadamiga, koomishinka ka hortaga musuqa, iyo hay'adaha warbaahinta ee ay dawladu gacanta ku hayso.

Kuwa aan dawliga ahayna waa hay'ado dimuqraadi oo iskugu jira kuwo caalami ah iyo kuwo wadani ah, iyo waliba hay'adaha warbaahinta ee aan dawliga ahayn.

Wada-xaajoodka isdhagaysiga iyo dulqaadka;

Waa arrimo aas'aas u ah xalinta farqiga ama Isfahan la'aanta soo kala dhaxgali karta laba shaqsi, laba dhinac ama laba-dalba. Astaanta midnimo ee ka dhaxeysa xukuumada Federaalka iyo kuwa deegaanada, kow labaduba waxay ka tirsan yihiin qaab dhismeedka dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya (J.D.F.I). Sidoo kale, labaduba waxay leeyihiin saddexda gole awoodeed ee dawliga ah sida golaha sharci dajinta, golaha hawlfulinta iyo golaha garsoorka & maxkamadaha. Masuuliyada koobaad ee xukuumada dhexe iyo kuwa deegaanaduba, waa difaacida & ilaalinta Dastuurka.

## Nidaamka Dimuqraadiyada

Farqigooduna ama kala duwanaantooduna, xukuumada dhexe (federaalka) oo masuuliyad gaar ah u leh arrimaha caalamiga ah sida (lacagta, difaaca) xidhiidhka dibada) iyo Deegaanada oo masuuliyad khaas ah u leh arrimaha la xidhiidha ismaamulkooda.

Awooda wada jirka ah ee ka dhexaysa xukuumada dhexe iyo kuwa Deegaanada waxaa weeyi waa iyaka oo si wadajir ah oo soo roga Canshuuraha Macaashul Macaashka ee la saaro hay'adaha horumarinta ee ay sida wadajirka ah u wada aas'aasaan, cabshuur saarista shaqooyinka culus ee macdan qodista, Batroolka iyo gaaska dabiiciga ah, canshuurta ku soo rogida macaashul-macaashka faa'iidada ganacsiga, shaqada, tan iibka, dakhliga canshuur ee loo yaqaano 'royalty' ururinteeda.

Xilka iyo waajibaadka maamulada magaalooyinka waxaa ka mid ah canshuur saarista ilaha dakhli iyo ururinteeda, maamulista dhulka iyo khayraadka dabiiciga ah ee ka jira goobaha hoos yimaada Maamulkooda, suggida Amniga iyo nabadgelyada oo loo dhiso xog boolis u ku filan aslixinteeda, goobaha hoos yimaada maamulkooda oo ay ka soo saaraan shuruuc awaamiir, islamarkaana dhaqangeliyaan heshiisyo iyo mucaahadooyin ay la galaan magaalooyinka dalalka dibada sida arrimaha farsamada, dhaqaalaha iyo kuwo dhaqanba.

Itoobiya waxay hada ku hawlan tahay xoojinta xidhiidhka dalal kala duwan oo caalamka ka tirsan. Xidhiidhkaasna waa mid lagu doonayo in hawlaha horumar lagaga dhigo kuwo taabagal ah, islamatkaana loo abuuro fursad suuq balaadhan oo xoojin kara dhaq-dhaqaaqyada horumar, xoojinta & dhismaha hanaan dimuqraadiyadeed, abuurista maamulo iyo hay'ado dimuqraadiyadeed oo wax ka tari doona gargaarka & amaahda (daymaha) iyo waliba taageerada farsamo kasbashadeeda. Guud ahaan, xidhiidhka caalamiga ee itoobiya waa mid ku dhisan xoojinta hawlaha horumar, dimuqraadi iyo ka soo hoynta natiijo wax ku ool ah.

### Ereyada furaha u ah cutubka 1[aad]

| | |
|---|---|
| Heshiiska Borotokoolka: | Waa heshiis dhex mara dalalka ee ku saabsan iskaashiga dhinacyada waxbarashada, dhaqanka iyo dhaqaalaha |
| Xisbi siyaasadeed: | Waa urur siyaasadeed oo ka kooban qayba kala duwan oo bulshada ka tirsan kaas oo u taagan ilaalinta madax banaanida iyo danaha bulsho iyo dhaqaale; islamarkaana loo aas'aasay in talada dawlada uu ku qabsado tartan doorasho madax banaan |
| Cashuurta Royaltiga: | Waa cashuurta uu bixiyo abwaanku marka uu iibiyo buugaagta ama uu soo bandhigo fanka/suuganta iyo farshaxanka. Sido kale hadi uu markale iibiyo ama soo banhigo waa cashuur uu bixinayo inta goor ba. |

## Laylisyada Guud ee Cutubka 1aad

Ardayeey layliskan ku roga buugaantiina,kadibna ka shaqeeya

### I. Erayadan ama weedhahan soo socda ku qor 'Run' ama 'Been' hadba ta ku haboon.

1. Dhismaha hanaanka dimuwraadiyadu waa abuurista muwaadiniin iyo dhaqan dimuqraadiyadeed.
2. Qodobada saldhiga u ah dhismaha nidaamka dimuqraadiyadeed waxa weeyi xurmaynta rabitaanka iyo xuquuqaha Aadamiga & tan dimuqraadiyada.
3. koomishinka xuquuqda aadamahu waa hay'ad sida kuwa kale ee daryeela xuquuqaha hormood ka ah sugida sareynta sharciga.
4. Xidhiidhka dibada ee Itoobiya wuxuu u soo hooyay faa'iido ah inay hesho taageerada ay ugu baahan tahay horumarka & dhismaha hanaanka dimuqraadiyadeed.
5. Canshuur saarista Macaadinta Batrool & tan gaaska dabiiciga ah waxaa iska leh xukuumada dhexe oo kaliya.

### II. Isku aaddi erayadan ku kala hoos qoran xarfaha 'B' iyo 'T' midba ta ku haboon.

| 'B' | 'T' |
|---|---|
| 1. Waa hay'ad ka shaqeysa ilaalinta xuquuqaha Aadamiga iyo tan dimuqraadiyada | b) Qalabka warbaahinta |
| 2. Waa hay'ad hubisa shuruucda, qaynuunka iyo Awaamiirta kaleba inaysan ahayn kuwa ka hor imaanaya Aadamaha | t) Hay'ada dhagaysiga cabashooyinka |
| 3. Waa hay'ad dabagal ku sameysa inay Qaybaha fulintu dhawreen iyo in kale Dhaqangelinta xuquuqaha & danaha Shaqsi ee lagu xusay sharciga. | j) Ururada bulshada rayidka ah |
| 4. Wa hay'ad ka shaqeysa xoojinta ka qayb-galka Dadweynaha si ay cadcadaan iyo la xisaabtan shaqo Ku dheehantahay. | x) Komishinka xuquuqaha aadamaha |
| 5. Waa hay'ad xogta dhabta ah wakhtiga ugu haboon u soo gudbisa dadweynaha | kh) koomishinka anshaxa |

III. Kadib markaad Akhridaan weedhahan iyo meelaha banaan ku buuxiya erayada ku haboon.

1. __________ waa hay'ad ama urur ka madax banaan qaab-dhismeedka dawliga ah, islamarkaana ah mid iskii isku xil qaaday masuuliyad ahaan.
2. _________ waa hay'ad dawli ah oo dadka qaba cabashooyinka leh waa nalagu xadgudbay ay u gudbisan karaan cabashadooda, kadibna, furta baadhitaan dib u eegid, ugu dambeyna go'aan ka soo saarata ama xukun rida kama dambeyn ah.
3. Si loo furdaamiyo farqiga ama isfahan la'aanta, Waxaa habboon in lagu xaliyo waa _____, ______iyo ___.

IV. soo socda, Jawaabta saxda ah ka dooro. Su'aalahan

1. Maxay tahay sobobta loo leeyahay sareynta sharcigu waa aas'aaska dhismaha hanaan dimuqraadiyadeed?
   - b) Maadaama oo u qodobkani siinayo damaanad ah in talada hab dimuqraadi ah uun lagu qabsan karayo
   - t) Maadaama oo u qodobkani damaanad siinayo xuquuqaha Aadamiga & tan dimuqraadiyadeed ee muwaadiniinta.
   - j) Maadaama oo u qodobkani siinayo damaanad dhammaan shucuubaha dalka xuquuqo-sinaansho.
   - x) Dhammaan.
2. Kuwan soo socda teebaan ahayn dabeecada muwaadinka dimuqraadiga ah?
   - b) Wuxuu garanayaa xuquuqaha aadamiga & tan dimuqraadiga ee dadka si taxadar ku jiro.
   - t) Wuxuu aaminsan yahay in farqigu yahay arimaha saldhiga u ah dimuqraadiyada.
   - j) Wuxuu qirayaa, islamarkaana sugayaa xuquuqaha Aadamiga & tan dimuqraadiga ee muwaadiniinta.
   - x) Midnaba
3. Waa goorma marka la leeyahaywuu qaatay dhaqanka dimuqraadiyadeed?
   - b) Marka u farqiga & fikradaha kale u xurmeeyo ama dulqaad u yeesho
   - t) Marka u isfalan la'aanta hab nabad-gelyo iyo is'aaminaad ku xaliyo
   - j) Marka lagu guul daraysto in la xaliyo farqiga & isfahan la'aanta oo ruux dhinac dhax dhaxaad ah loola tago islamarkaana loo hogaansamo go'aanka la rido.
   - x) Dhammaan.

V. Jawaabo koo-kooban ka bixiya su'aalahan soo socda;

1. Ugu yaraan sheeg saddex ka mid ah qodobada aas'aasiga u ah dhismaha hanaanka dimuqraadiyada
2. Sharaxa farqiga iyo ka midaysnaanta xukumada Federaalka & kuwa Deegaanada
3. Sheega laba hay'adood oo ka shaqeeya hawlaha daryeelka xuquuqaha Aadamiga iyo tan dimuqraadiyadeedba.

CUTUBKA 2

# Sarreynta Sharciga

Ujeeddooyinka guud ee cutubka.

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:-

- Gartaan waxyaabaha ay isaga midka yihiin iyo waxyaabaha ay ku kala duwan yihiin Dastuurka dawlada Federaalka iyo dastuurka Dawlad deegaanada;
- Gartaan Anshaxa wanaagsan ee laga filayo in ay la yimaadaan.
- Fahmaan dhibaatooyinka musuq-maasuqu keeni karo.



Jaantuska2.1.Dastuurada

## 2.1. Dastuurka

### 2.1.1. Midaysnaanta iyo farqiga u dhexeeya Dastuurka dawalada J.D.F.I. iyo dastuurada dawlad-Deegaanada

Hordhaca dastuurka jamhuuriyada dimuqraadiga federaalka Itoobiya Anagoo ah Quruumaha,Qowmiyadaha iyo Shucuubta Itoobiya; Si aan dalkayaga Itoobiya nabadgelyo waarta iyo dimuqraadiyad damaanad-qaad leh uga hirgalino una dedejino horumarkayaga dhaqaale iyo bulsheedba, waxaanu anagoo adeegsanayna xuquuqahayaga aayo katashiga, doonistayada xorta ah ugu guntanay in aanu si wadajir ah u dhisno hal-bulsho- siyaasadeed oo ku dhisan sareynta sharciga iyo rabitaankayaga.

Iyadoo aanu si adag u aaminsanahay in ka mida dhalinta ujeedooyinkan ay lagama maarmaan utahay xuquuqaha, iyo xoriyaadka aas'aasiga ee shakhsiga iyo shucuubtaba lana xaqiijiyo sinaanta jinsiga, diimaha iyo dhaqamada iyadoo aan la kala soocin si wadajir ahna uwada noolaadaan;

Iyadoo dalkayaga Itoobiya ay cidwaliba leedahay dhaqan ay ku faanto, iyadoo aanu kala lahaanjiray, hadana kala leenahay deeegaano, waxaanu haddii aanu nahay Quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta ku soo wada nalayn, haddana kuwada noolahay dalkan, islamarkaana leh xidhiidhyo dhinacya badan taabanaya

Sidaas awgeed, waxaanu qaadanay in mustaqbalkaga wadajir uu ku dhisnaan karo anagoo sixitaan ku sameynayna xidhiidhkayagii taariikheed ee cadaalad-darada ahaa, islamarkaana kobcinayna danahayaga guud.

Sidookale waxaanu in ay lagama maarmaan tahay in aan si wadajir ah u dhisanno hal-bulsho-Dhaqaale iyo iskaashi aanu ku kobcino danahayaga guud, xuquuqahayaga iyo madaxbanaanidayadaba.

In aan xaqiijino, islamarkaana joogteyno dimuqraadiyada iyo nabadgelyada ku timiday halgankayaga aanu u hurnay nafta

Hadaba, dastuurkani si u inoogu noqdo aalad aan ku xaqiijinayno ujeedooyinka iyo mabaadii'da kor ku xusan, ayay wakiiladayadii aan u soo dirsanay Golaha Dastuurka ayay maanta oo ah 29ka Hidhaar 1987 ay ansixiyeen.

Anagoo ah shacabka Soomaaliyeed maadaama oo aanu si adag u aaminsanahay horumar dhaqaale oo deg deg ah, nabadgelyo waarta iyo dimuqraadiyad adag in lagu gaadhi karo lahaanshaha daastuur gaar ahaaneed oo dhamaanba hirgelinaya xuquuqaha dhamaystiran ee Dastuuriga ah kuna saleysan Dastuurka jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya

Iyadoo aanu ka duulayno nidaamka dimuqraadiyadeed ee aan ku soodooranay wakiilada golaha Xildhibaanada oo Dastuur ka Deegaanka ee lagu shaqeeynayay ilaa hadda, ansixiyey Hamle 10/1987kii,ayaa Dastuurkan lagu muujiyay habeyn isku dubaridan oo dawli ah oo lagu sameeyay dib u habeyn qotodheer. Gaar ahaan arimaha ku saabsan sidii kor loogu qaadi lahaa nolasha xoolo-dhaqatada, cadcadaanta shaqada dawlada, masuuliyad u raacashada, dadku u raacanayaan wakiiladooda iyo qaab-dhismeed ka haboon ee dawlada.

Gabagabadii iyadoo oo ay maanta taariikhdu tahay Miyaasiya 1994kii, Golaha Xildhiibaanada deegaanku kalfadhigoodii koobaad ee caadiga ahaa oo ka dhacay Magaalada Jig-jiga, Gudigii loo xilsaaray dib u habaynta Dastuurka markii ay nasoo hordhigeen ee aanu siqoto-dheer uga doodnay ayaanu cod buuxa ku ansixinay Dastuurkan.

## Layliska 1

Kajawaaba su'aalahan soo socda;

1. labada dastuur ee la soo bandhigay faahfaahin ka bixiya meelaha ay hordhac ahaan kamidaysanyihiin.
2. Idinka oo tusmaynaya,islamarkaana isbar-bar dhigaya sida uu dastuurka deegaanku uga dhiganayo dastuurka Federaalka bar-bilow iyo sida uunan ukhilaafayn tilmaama.
3. Idinka oo koox koox isku qaybinaya,islamarkaana isbar-bar dhigaya dastuurka Federaalka iyo kan Deegaanka Soomalida tilmaama meelaha ay kamidaysanyihiin iyo meelaha ay ku kala duwanyihiin.

Dastuurkan 1995 (1987 T.I) ee Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya waa mid dimuqraadi ah. Taasna waxaa loo cuskanayaa waa iyada oo u ka koobnaa mabaadi'yo iyo xuquuqo si cad loogu qeexay, sidaasna ay ku ansixiyeen wakiilo-badan oo u dadweynuhu soo doortay. Sidoo kale, taas waxaa dheer, waa dastuurka oo eray-eray u xusaya/qeexaya sinaanta muwaadiniinta iyo shucuubtaba. Tusaale, qodobka 25aad ee dastuurka Jamhuuriyada dimuqraadiga Federaalka Itoobiya, wuxuu leeyahay "Dhammaan dadku sharciga hortiisa way u siman yihiin. Sharciguna ilaalo (damaanad) isku mid ah ayuu siinayaa dhammaantood iyaga oo aanan lakala-soocin. Sidaas awgeed, dhammaan dadku iyaga oo aanan loo eegayn ama loo fiirinayn kala-duwanaanshahooda isireed, qoomiyadeed, midabeed, jinsiyeed (lab ama dhadig), luqadeed, diineed, siyaasadeed, hab-dhaqameedkooda-bulsho, hantiyeed, dhalasho ama aragtiyadooda kalaba, waxay xuquuq siman u leeyihiin inay helaan damaanad-qaad-sharciyeed oo la taaban karo".

**Xidhiidhka iyo Farqiga u dhexeeya Dastuurka Federaalka & kuwa Deegaanada.**

Dastuurku wuxuu u kala saarayaa awoodaha xukuumadeed ee heerarka Deegaan iyo tan dhexe (Federaalka) siyaabahan soo socda. Xukuumada Federaalka iyo kuwa Deegaanaduba waxay leeyihiin sadexdan waaxood/Awoodeed ee soo socda.

B) Golaha sharci fulinta

T) Golaha garsoorka

J) Golaha garsoorka

## Layliska 2

1. Ayaa ansixiyay dastuurada Federaalka iyo kuwa deegaanada?
2. Sheega sida ay ku noqdeen sharciyada ugu sareeya dastuurka Federaalka iyo kuwa deegaanadu?
3. qodobeeya waxyaabaha ay ka midaysanyihiin iyo meelaha ay ku kala duwanyihiin dastuurka fedaraalka iyo kuwa degaanadu?

## 2.2. Anshaxa

### 2.2.1. Ka Qaran ahaan, anshaxa laga filayo ardayda

Mabaadii'da anshaxeed ee ka jirta xafiisyada dawlada:

Cadaalinimo, daacadnimo, dhamaystirnimo ilaalinta sirta, ujawaabida baahida bulshada, la xisaabtan, ka reebanaan eex, Awooda-sharicyeed oo sida ugu haboon loo adeegsado, xurmaynta sharci iyo noqoshada tusaale lagu dayan karo

Shaqaaluhu inay bartaan mabaadiidan, maxaad isleedihiin waxbay kusoo kordhin karaan?

- Waa Inaan dhasho

"Hooyaday waxay sugaysaa uun wakhtigeeda iyada oo aniga isida"

"maxaa ku keenay cisbitaalka?" ayaan si lama filaan ah u waydiiyay.

"waa ayo adigu?" ayay igu tidhi.

"waa ilmahaagi ayaan ugu jawaabay, ayaad imooday?" ayaan ku idhii. Si ay igu rumaysato, laba jeer ayaan uurkeeda isku dhex rog rogay.

"waxaan xaq u leehay inaan ogaado sababta aad utimiday halkan".ayaan ku idhi.

"Halkan, waxaan u imiday inaan adiga iska kaa soo tuuro/saaro", ayay tidhi

"Ma si aanan u dhalan?"

"Haa"

Waa inaan dhashaa, ayaan ugu jawaabay anigoo ku dhawaaqaya, ialamarkaana u sheegaya iyada inaan leehay aragti dheer oo ku wajahan dalkayga iyo dadkayga ba. Anigu uma malaynayo inuu dhamaan dadku wada xunyahay. Waxaa jira kuwa xun iyo kuwaa fiican, kuwo beenaalayaal iyo kuwo runsheeg ah, kuwo khaa imiin ah iyo kuwo daacad ah, Kuwo qaswadayaal ah iyo kuwo dhawrsoon, kuwo iskudira diraale ah iyo kuwo nabadoona ah. Sidaas awgeed, markaas anigu waxaan xiisanayaa inaan arko dad wanaagsan. Gaar ahaan waxaan ku rajaweynahay inaan arko saaxiib, saaxiibtinimadiisu aynan ku dhisnayn xasad iyo munaafaqad, balse noqda mid garab iyo gaashaan ba kuu noqda marka ay dhibaato kula soo darista, islamarkaana ficil ku muujiya waxyaabihii u balanqaaday. Waxaan rabaa inaan arko dad ku farxa islamarkaana u hambalyeeya wax qabadka saaxiibadiisa. Waxaa kale oo aan rabaa inaan arko wadaniyiin wanaagsan oo daacad ah, hufnaan leh, ka reeban wax isdabamarin islamarkaana u heelan horumarinta, barwaaqaynta iyo ka shaqeynta nabad-galyada dadkiisa. waxaan doonayaa inaan arko, dad ka shaqeeya nabadaynta iyo daminta colaadaha , dad ka madax banaan aragtida khaldan, kana go'an tahay horumarinta qadiyadooda

Waxaan doonaya inaan tuso dadka xun wanaagu waxa uu yahay, si ay isku saxaan ama loo saxo. Hadaba, anigu waan ka soo horjeedaa uurka la iska soo ridayo (tuurayo), sababta oo ah, si aynaan uwaayin halyay yiin wanaagsan

Inkasta oo aan taageer sanahay qorshaha qoyska, haddana waxaan kazoo horjeedaa uurka la iska soo ridayo.Waxaan rabaa inaan arko hogaamiye wanaagsan oo uu dalku yeesho, islamarkaana ka difaaca dadka iyo dalkaba gar darda dibada uga timaada. Sidaas awged, waa inaan dhashaa.

## Layliska 3

Su'aalaha soosocda ka jawaaba

1. Dabecadaha lagu xusay sheekada dhexdeeda kuwee ayaa looga baahanayahay ardeyda? Sababeeya
2. Dabeecadaha lagu xusay sheekada dhexdeeda, kuwee ayaa looga baahanyahay inay ardaydu iska saxaan?

Sida lawada ogsoonyahay ardaygu waa xubin ka tirsan bulsha-weynta dalka. Sidoo kale, ardaygu waa da'yarta mustaqbalka dalka iyo dadkaba, hormood ka noqon doona. Waana hogaamiyaha, Macalinka, Dhakhtarka, Injineerka, Askariga, Garsooraha mustaqbalka ee qaranka.

Ardaygu wuxuu dalka ku leeyahay xuquuq ah in u bad-baado nololeed helo, in u helo adeeg waxbarasho iyo caafimaadba, iyo waliba in u shaqo ka helo dalka mustaqbalka. Sidoo kale, waxaa ardayga ku waajibtay in u

- Xurmeeyo dastuurka iyo sharciyada kale dalka
- In u ka fogaado/reebanaado falal-kasta oo sharci dara ah.

Sidaas awgeed, ardayga waxaa laga rabaa in u noqdo mid ku sifooba:-

- Akhlaaq wanaag
- Shaqo wanaag
- Run sheegnimo
- Wadan jacayl
- Cad-caddaan
- Is-xilqaan
- Kalsooni
- Dulqaad
- kalsooni
- Bulshaawinimo.

## Layliska 4

1. Sheeg dabeecadaha iyo Anshaxa ardayga wanaagsan?
2. Idinka oo xusaya anshaxa laga rabo ardayda ka qaran ahaan,qaar kamida sheega.

## 2.3. Xadeynta-Awoodaha

### 2.3.1. Dhibaatooyinka ka dhalan kara la'aanta awood-xadeynta

- Maxaa dhici kara, hadii uu masuul xafiis sameeyo awood ku tagrifal?

#### Ceeb

Mudane Geelle ayaa rabay inuu meherad tukaan ka sameysto, meel banaan oo ku dhegan gurigiisa, isaga oo kala tashanaya sharci ilaaliye-boolis. Booliskuna, wuxuu ku yihdi dhib malaha, anigaa kuu jooga ee iska dhiso. Kadibna, Geelle hawshii buu galay oo tukaan ayuu ka dhistay meeshi banaanayd. Hasa yeeshee, isaga oo nan ku jirin muda gaadhaysa sadex-bilood ayaa loo sheegay inuu tukaanka dumiyo, maadaama oo ay bartan wado ku dhacday. Balse, isagu wuxuu u sheegay inuu Boolis kala tashaday dhismaha booska tukaan, islamarkaana uunan dumin doonin meheradiisa. Sidookale wuxuu laalushay masuul ay aqoon isku lahaayeen, islamarkaana xasbiga u taxaabay booliskii sharci-dhawarihii.

**Shaqo-kooxeed**

Kawada xaajooda, kana soo diyaariya warbixin qoraal ah, idinka oo tilmaamaya cida dambiilaha ahayd, kan awood ku tagrifalka sameeyay, ama dhibaatada nidaamka shaqo ee la maray.

Haddii aysan jirin masuuliyad lala xisaabtami karo ama shuruuc lagu kala socdo oo ka dhexaysa dalka iyo dadka, xukumada iyo shacabka ama masuulka iyo muwaadinkaba waxaa meeshaas ka dhalanaysa dhibaatooyin aan la qiyaasi karin oo dhan kastaba taabanaya haday tahay arrimaha bulshada, dhaqaalaha, siyaasada, dhaqanka IWM.

Haddaba, dheeli tirnaan la'aanta awooduna waxay dalka u horseedaa xaaladahan soo socda:-

- ***Nidaam daro:***

Waa xaaladaha marka u ruuxu/qofku ku dhaqmi waayo nidaamka shaqo. Waxaa meesha ka baxaya anshaxa iyo sharciga, sidaas laajigeed wuxu qof ku kici fal kasta oo u isagu rabo ama iyadu rabto waayo majiro wax la xisaabtan iyo baqdin (dabagal) oo ruuxa ka hor istaagaya rabitaankiisa shaqsiyadeed. Waxaana xoogaysta dareenka qayra-masuulnimo ee cadaalad darada ku dhisan.

- ***Awood sheegasho:***

Waa mid ku dhisan awood ku tagrifal. Masuuliyadii shacabka loogu adeegayay oo la ma'jara-habaabiyay iyadoo looga faa'iidaysanayo dano shaqsiyadeed. Waana mid lagu cabudhiyo ama lagu muquuniyo xuquuqda iyo rabitaanka dadweynaha. Xaaladani waa mid uu ruuxa masuulka ahi ugu xoog/awood sheegto qofka ka hooseeya ama dadka rayidka ahaba. Haddaba, xaaladan awood sheegashadu waa mid halis ku ah dalka iyo dadkaba, waayo waxaa ka dhalanaya falal-xun oo keenaya tacadiyo xuquuqeed iyo gafaf loo geysto qaar ka mid ah muwaadiniinta dalka. Waana mid horseedaysa kalsooni daro loo qaado xukuumada iyo sumcad beel.

- ***Cad-caddaan iyo Xil-kasnimo la'aan:-***

Waxaa meesha ka baxaya dareenkii Masuuliyadeed ee ku dhisnaa isxilqaanka iyo hufnaanta shaqo ee loogu adeegayay bulshada dalka. Waxaana abuurma shaki iyo mubdi la xidhiidha wax qabadka shaqo ee ruuxa ama masuul Xafiis. Haddii aysan jirin cad-cadaan iyo xil-kasnimo markaas waxaa la lumiyay kalsoonidii loo hayay dawlada. Is-xilqaan la'aantana waxaa ka dhasha dhibaatooyin musuq-maasuq, danaysi kooxeed/gaar ahaaneedba, xad-gudubyo ka dhan ah xuquuqda Aadama iyo tan dimuqraadiyadaba, cadaalad daro horumar la'aan iyo bur-bur dhaqaale, bulsho, siyaasadeed iyo mid dhaqanba oo la soo darsa bulshada guud ahaan.

**Layliska 5**

1. Awood-xadayn la'aantu sidee bay caqabad ugu noqon karaysaa,dabaalista sareynta-sharciga?
2. Sheeg qaar ka mid ah dhibaatooyinka ka dhalan kara dheeli-tirnaan la'aanta awoodeed.
3. Maxaa loogu baahday in xakamayn lagu sameeyo awoodaha qaarkood?
4. Sheeg siyaabaha loo dheeli tiri karo awoodaha xukuumada qaarkood

## 2.4. Sirta

### 2.4.1. Taxadarka loo baahanyahay in la muujiyo si sirta loo dhawro

- Sheega hadii ay jiraan odhaahyo laga isticmaalo deegaamadiina, islamarkaana la xidhiidha sida loogu baahanay in sirta loo dhawro.
- Maxay yihiin taxadarka loo baahanyahay in lagu dhaqmo si loo dhawro sirta?

### Kaliil

Mudane Kaliil, waa shaqaale xafiis. Waxaana ushaqeeya laba shaqaale oo kala ah xog-hayn iyo nadiifiso. Hadaba, waxaa dhacda intabadan xiliga biririfta ee uu shah tagayo inuu nan xidhin xafiiska. Sidoo kalena, waraaqaha rafka ah ee wax lagu diyaarsadana majeexi jirin marka la isticmaalo, waxaana lagu arki jiray waraaqahaas oo dhexyaala haamaha qashin-qubka ee xafiiska. Xog-hayntiisuna, waxaa caada u ahayd inaysan damin kombiyuutarka marka ay dibada uga baxayso sidoo kale, kombiyuutarka waxaa isticmaala, asxaabteeda kale oo xafiiska dibadiisa ka timaada. Hadaba iyada oo ay sidaas yihiin arimuhu, ayaa maalin maalamaha ka mida la faray Kaliil inuu imtixaan u diyaariyo shaqaalaha cusub ee la doonayo in loo xusho xafiiska. Hasayeeshee, waxaa dhacday in qof aan laga filayn uu gebi ahamba wadahelay natiijadii imtixaanka, taasina waxay dhalisay in la isla dhexmaro, tuhun ah imtixaanka horaa loo sii helay/bixiyay.

### Laylsika 6

Idinka oo ka duulaya sheekada, ka jawaaba su'aalahan soo socda

1. Imtixaanka sidee loo sii helay?
2. Warbixin qoraal ka diyaariya, hadii ay jirtay xaalad imtixaanka lagu saari karayay,taxadar noocee ayaa loo baahnaa in la muujiyo

Dal kasta oo ka tirsan Wadamada Caalamka wuxuu leeyahay sir qaran oo qiimo weyn ugu fadhida amnigiisa iyo kobaciisa-dhaqaaleba, markaasna ay tahay in fiiro-gaara ama foojignaan dheeri ah la siiyo ilaalinta sirta qaranka.

***Taxadarka loo baahan yahay si loo ilaaliyo sirta:-***

1. Ruux kasta oo gacanta ku dhiga sir qaran siday doontaba ha ku soo gasho gacantiisee waxaa la gudboon in uusan u gudbin gacan-shisheeye, sidoo kalana uusan sirta ku baahin goob kasta oon munaasab ahayn.
2. Xaaladaha kugu sigi (riixi) kara baahinta sirta oo laga foojignaado. Matalan waxyaabaha leh cadeymo-sireed oo aanan laga qaadin goobta ku haboon. Duwaanada sirta oo iyaguna lala aadin (tagin) goobaha tamashlaynta.

Guud ahaan, ha ahaato shaqsi ama jamac, sobobta ugu weyn ee loogu baahday ilaalinta ama dhawrista sir kasta oo u dalku leeyahay, waa ka hortagista halis kasta oo dhici karta, amase, kusoo foodle dalka.

## Layliska 7

Kajawaaba su'aalaha soo socda.

1. qawaaniinta anshaxeed ee lagu xusay sirta sida loo ilaaliyo,siday waxtar ugu yeelan karaan?
2. dhismaha anshaxa wanaagsani siduu ilaalinta sirta wax ugu tari karaa?
3. sidee loo cidhib-tiri karaa dabeecadaha xun ee sirta lagu sii daayo?

## Shaqo kooxeed

Su'aalahan soo socda warbixin kasoo diyaariya,idinka oo koox koox ah.

1. arimaha dugsigiina sirta ka ah waa kuwee?sirtase si loo ilaaliyo taxadar noocee ah ayaa loo baahanyahay?
2. idinka oo booqanaya xafiis ku yaala goobihiina,islamarkaana waydiinaya arimaha sirta ah ee uu leeyahay iyo waliba sida loo xafidi karo warbixin kasoo diyaariya.

### 2.4.2. Dhibaatooyinka ka dhalan kara dhawris la'aanta sirta

- Waa maxay dhibaatada ay dalka ku keeni karto sirta aan la dhawrin?

Dhibaatooyin halis leh ayaa ka dhalan kara xafidaad la'aanta sired ama sirta oo gacanta u gasha cid aysan khusaynin. Kuwaasna waxaa ka mid ah

1. Xogta difaaca iyo nabad-sugida qaranka oo ka baxda gacanta cidda ku shaqada leh, waxay dalka iyo dadkaba u horseedi kartaa masiibooyin fool xun.
2. Siraha muhiimka ah ee la xidhiidha arrimaha dhaqaale iyo kuwa bulshaba haddii aan la dhawrin waxay cawaaqib xun ku yeelanaysaa laga bilaabo shaqsiga ilaa mujtamaca, sidoo kale waxay raad xun ku yeelan ganacsata (baayac mushtariga) ilaa dawlada.
3. Sirta natiijada daraasaadka xarumaha C/ baadhista sayniska iyo teknoolojiyada oo si khaldan loogu gudbiyo cid kale oo kadibna ka faa'iidaysata. Markaasna waxaa ku khasaaraya xarumahaas daraasaadka sameynayay.

Haddaba, xaaladahaas aynu kor ku soo sheegnay iyo kuwo kaleba ee soboba faafinta ama baahinta sirta wadan, shacab, qoys ama shaqsiba, waxay horseedi karaan masiibo aan la filanayn ama lama filaan ah.

Sidaas awgeed, dawlada iyo shaqsigaba wuxuu xil ka saran yahay ilaalinta ama dhawrista siraha muhiimka ah ee dalku leeyahay. Dhinaca kale, taas macnaheedu ma aha xog kastaba waa sir, laakiinse arrimo/xogo-gaar ah ayaa la dhahaa/ yidhaahdaa Sir.

## Layliska 8

1. Maxaa ka dhalan kara xafidaad la'aanta sirta?
2. Waxaa jiray nin ajaanib ah oo soo booqday dalkeena,markaas aniga oo ninkii u waramaya ayuu saaxiibkay i arkay,wuxuuna igu yidhi maxaad ajinabiga sirta dalka ugu sheegaysaa.dhib malaha,kani maadaama oo uu dibada kayimiday dhib makeenayso. runtii maxay dhib leedahay?idinkuna maxaad dhahaysaan?

**Shaqo kooxeed**

1. idinka oo soo xulanaya mid kamida waxyeelada ka iman karta xafidaad la'aanta sirta,koox koox uga soo diyaariya warbixin dhibaatada ay dalka uhorseedi karto xafidaad la'aanta sirtu

## 2.5. Siyaabaha looga hortagi karo Musuq-maasuqa

### 2.5.1. Muhiimada ay leeyihiin hay'adaha dimuqraadi ee la Dagaalanka Musuq-maasuqa

Musuq-maasuqu waa fal kasta oo ku dhisan damiir la'aan ama qayra- ama masuulnimo shaqsiyadeed. Waana fal isku day oo u qofku ku rabo inuu helo faa'iido dan gaar ahaaneed oo uusan kasban ama tabcan ruuxaasi. Musuqu maaha oo kaliya laaluush bixin ama laaluush qaadasho, balse waa fal kasta oo ku saabsan wax isdabamarin sharci daro ah. Tusaale, waxaa falalkaas ka mid ah ruuxa masuulka oo ku kaca tagrifal-awoodeed iyo kala jeclaysi aad ku sameyso bulshada dhaxdeeda sida shaqaalaysiin, dalacsiin, mushaar-kordhin ama shaqo ka caydhin, mushaar dhimis sharci dara ah oo lagula kaco muwaadiniinta.

Guud ahaa, musuq-maasuqu waa fal lidi ku ah horumarka, dimuqraadiyada, nabad-gelyada, cadaalada iyo sinaantaba. Sidaas awgeed, dawlada iyo shacabkaba waxaa la gudboon inay kaalin muhiim ah ka qaataan sidii loola dagaalami lahaa musuq-maasuqa.




Jaantuska 2.2. Xafiiska ka hortaga Musuqa & Anshax xumida

- Qabatada iyo Bashadu maxay ka turjumayaan?
- Kadib markaad sheegtaan waxa uu sawirku ka turjumayo, sharaxa muuqaalka tusaale ee musuq,maasuqa lagaga hortagayo.

Waxaa jira hay'ado dimuqraadi ah oo door wayn ka ciyaara la dagaalanka musuq-maasuqa. Hay'adahaasna waxay iskugu jiraan kuwo dawli ah iyo kuwo aan dawli ahayn. Matalan kuwa dawliga ah waxaa ka mid ah koomishinka ka hortaga musuq-maasuqa iyo Anshaxa ee Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya. Ujeeddada loo aasaasayna koomishinkaas waa sidii looga hortagi lahaa falalka musuq-maasuq iyo waliba sidii sharciga loo horgeyn lahaa shaqsiyaadka lagu tuhmo inay ku kaceen falal musuq-maasuq. Sidoo kale Koomishinka ka hortaga musuq-maasuqa iyo Anshaxa, waxaa kale oo u door muhiim ah ka ciyaaraa sidii bulshada dalka loogu baraarujin lahaa ama loogu wacyigalin lahaa khatarta u leeyahay musuqu iyo siyaabaha looga hortagi karo.

Waxaa kale oo jira hay'ado aan dawli ahayn oo door muhiim ah ka qaata hawlaha ka hortaga iyo ladagaalanka musuq-maasuqa. Hay'adahaasi waxay u kuur galaan hawlaha shaqo ee Xafiisyada dawlada iyo kuwa aan dawliga ahayn kadibna waxay shaaciyaan falalka musuq-maasuq ee ka dhaca Xafiisyada iyo goobaha kaleba. Hay'adaha aan dawliga ahayn ee ku hawlan la dagaalanka musuq-maasuqa waxaa ka mid ah ururada bulshada rayidka iyo kuwa kaleba oo wadani iyo caalamiba ah.

Guud ahaan, Hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahaynba waxay leeyihiin faa'iidooyin aan halkan lagu soo koobi Karin. Waxay kaalin


weyn ku leeyihiin ka hortaga, la dagaalanka iyo shaacinta musuq-maasuqa. Sidoo kale waxay sharciga horkeenaan shaqsiyaadka Xafiisyada ama Shirkadaha ku kacay falka musuq.

### Layliska 9

Su'aalaha soo socda kawada xaajooda idinka oo akhrinaya.

1. sidee buu musuq-maasuqu lid ugu yahay maamulka suuban?
2. side buu musuq-maasuqu caqabad ugu yahay horumarka?
3. maxaa loogu baahday in halgan adag lala galo musuq-maasuqa?
4. maxay qabtaan hay'adaha laga aas'aasay dalkeena si ay musuq-maasuqa ula dagaalamaan?

### 2.5.2. Xubnaha Caddaaladu doorka (kaalinta) ay ku leeyihiin la Dagaalanka musuq-maasuqa




Jaantuska 2.3. si loo tirtiro musuq-maasuqa Cadaalada aynu ilaalino

- Sharax fariinta uu sawirkani gudbinayo
- Sharax doorka qaybaha cadaaladu ku leeyihiin ladagaalanka musuq-maasuqa adigoo raacaya tusaalaha sawirku bixinayo.

Si looga hortago musuq-maasuqa, waxaa loo baahan yahay in la helo ama la dhiso nidaam cadaaladeed oo wax ku ool ah oo kaalin la taaban karo ka qaadan kara hawlaha ka hortaga iyo la dagaalanka musuq-maasuqa. Hay'adaha ama xubnaha cadaaladu door wanaagsan ayay ka ciyaari karaan arrimaha la xidhiidha la dagaalanka musuq-maasuqa.

Sidaas awgeed, hay'adaha cadaalada ku shaqada leh waxaa laga rabaa inay sharciyo ka soo saaraan sidii looga hortagi lahaa musuq-maasuqa. Sidoo kale, waxaa xubnaha cadaalada sida booliska, xeer-ilaalinta, maxkamadaha iyo kuwa kaleba, looga fadhiyaa in ay kawada shaqeeyaan islamarkaana iska kaashadaan sidii loola tacaali (loola dagaalami) lahaa musuqa.

Waxaa kale oo muhiim ah in hay'adaha ama Xafiisyada cadaaladu ka shaqeeyaan sidii sharciga loo horkeeni lahaa shaqsi ama koox kasta oo lagu tuhmo ama lagu helo fal musuq-maasuq ugu dambayn xubnaha cadaalada waxaa laga rabaa inay shacabka la kaashadaan islamarkaana wacyigalin ka siiyaan dhibaatada u leeyahay musuqu iyo siyaabaha looga hortagi karo musuq-maasuqa.

### Layliska 10

Su'aalaha soo socda kajawaaba;

1. qaybaha cadaaladu waa kuwo noocee ah?
2. siyaabo noocee ah ayay qaybaha cadaaladu ula dagaalamaan musuq-maasuqa?

### 2.5.3. Kaalinta Shacabka kaga aaddan la dagaalanka Musuq-Maasuqa

Halgan aan laga qayb-gelin bulshada.miyaa musuqa lagaga hotagi karaa?
Halganka lagula jiro musuqa sidee bulshada looga qaybgelin karaa?






Jaantuska 2..4. Dhammaan muwaadiniinta waxay mas'uuliyad ka saran tahay la dagaalanka musuqa

Idinka oo kaduulaya sawirka kor ku xusan ka jawaaba su'aalaha soo socda;

- Maxay idinla tahay fariinta ay sawirada sare gudbinayaan?
- Maxaad u malaynaysaan lambarka 988?waxtarkiisuse?
- Idinka oo ka duulaya sawirka maxay idinla tahay inay bulshadu kaga hortagto musuq-maasuqa?

Shacabku kaalin muhiim ah ayuu ka qaadan karaa hawlaha la dagaalanka musuq-maasuqa. Waayo, shacabku waa kan ay dhibtu ka soo gaadhayso falalka musuq-maasuq. Maadaama uu musuqu yahay cadawga horumarka, waxaa qaybaha kala duwan ee bulshada looga baahan yahay in ay u guntadaan sidii loo xakamayn lahaa falalka hanti-kutagrifalka ah ee ay ku kacaan shaqsiyaadka tirada yar ee qawlaysatada ah.

Sidaas awgeed, waxaa shaqsi kasta oo ka tirsan bulshada sida Dhalinyarada, Aabayaasha, Hooyooyinka, Cuqaasha, Culumaa'udiinka iyo Wax-garadkaba looga baahan yahay inay fir-fircooni ka muujiyaan sidii looga hortagi lahaa khiyaanada iyo wax isdaba-marinta musuq-maasuq ee ay geystaan Masuuliyiinta Xafiisyada kala duwan ee loogu talagalay inay bulshada u adeegaan.

Haddaba, ruux kasta oo ka tirsan bulshada waxaa la gudboon inuu muujiyo dabeecadahan soo socda, si looga badbaado musuq-maasuqa.

- Waa inuu ruux kasta xil iska saaraa la dagaalanka musuq-maasuqa
- Waa inuu ruux kasta muujiyo ka go'naansho u uqabo sidii uu musuqa ula dagaalami lahaa
- Waa inuu ruux kasta muujiyaa daacadnimo iyo run sheegnimo
- Waa inuu ruux kastaba xushmeeyaa sharciga iyo qawaaniinta kalee dalka.
- Waa inuu ruuxu sifo kasta oo sharci ah kula dagaalamaa musuqa.

## Layliska 11

Waa maxay kaalinta bulshada kaga aadan hawlaha la dagaalanka musuq-maasuqa?

musuq-maasuq ma la tir-tiri karaa ?mise waa la yareyn karaa?

## Gunaanadka Cutubka 2aad

Dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya, iyo kuwa Deegaanada, waa qodobo ay ansixiyeen dad/wakiilo ay dadku soo xusheen/doorteen. Dastuurka Federaalka waxaa ansixiyay wakiilo ay soo xusheen dhammaan qowmiyadaha dalku. Kan Deegaanadana, waxaa ansixiyay wakiilo ay soo xusheen dhammaan qowmiyadaha ama qabaa'ilada deegaanka kuwada nool.

Xaqiijinta sareynta sharciga waxaa fure u ah anshaxa suuban, sidaas awgeed, qaran ahaan ardayga waxaa laga rabaa asluub wanaagsan sida dhagaysiga qofka hadlaya, dulqaadka, farqiga oo hab nabad gelyo lagu xaliyo, dal jacayl IWM.

Awood-xadayntuna waxay waxtar u leedahay xaqiijinta sareynta sharciga.

Awood-xakamayn la'aantuna waxay khatar ku tahay jiritaanka sareynta sharciga. Marka aysan jirin sareynta sharciga waxaa meesha soo gala mubdi ah cad-cadaan la'aan iyo la xisaabtan la'aan la iska caadeysto, kadibna, halkaas waxaa lagu xadgudbayaa xuquuqihii dadweynaha.

Xafidaad la'aanta sirtuna dalka maadaama ay u daran tahay, waxaa haboon in si taxadar ku jirto loo xafido sirta musuquna waa fal dambiyeed loo baahan yahay in lala tacaalo. Wuxuuna u baahan yahay in la iska kaashado ka hortaga musuqa, haday tahay dawlad & shacaba, waxaana loo baahan yahay hay'ado la dagaalama sida qaybaha cadaalada iyo kuwa kaleba ( sida booliska, koomishinka ka hortaga musuqa & anshaxa, xeer ilaalinta, garsoorka IWM. Sidoo kale waxaa loo baahan yahay kaalinta shacabka eek u aadan la dagaalanka musuqa.

## Laylika Guud ee Cutubka 2[aad]

### I. Su'aalaha soo socda ku qor 'Run@ ama 'Been@ hadba ta ku haboon.

1. Booliska kaliya wuu ku filaan karaa la dagaalanka musuqa.
2. Sirta qaranka waxaa xafidi karaya oo kaliya masuuliyiinta sar- sare.
3. Haddii aynan jirin sareyn-sharci, waxaa lumaysa cadcadaan & a xisaabtan .
4. Heer dugsi mooyee, ardayga ma jirto heer qaran asluub looga baahan yahay
5. Dastuurada xukuumada Federaalka iyo kuwa Deegaanadu malaha farqi kala duwanaansho ha noqoto xaga qaabka & xajmigaba.

### II. Isku aaddi erayada ku kala hoos qoran xarfaha 'B' iyo 'T'

| | B | T |
|---|---|---|
| 1. | Balaadhinta waxbarashada | b) Xeer ilaalinta |
| 2. | Qabashada dambiilaha | t) Koomishinada anshaxa & ka hortaga musuqa |
| 3. | Sharciga oo lagu ganaaxo dambiilaha | j) Maxkamada |
| 4. | Samaynta daraasad nidaamka shaqo, oo dabagal lagu sameeyo fulinteeda. | x) Booliska |
| 5. | Dambiilaha oo maxkamada la horkeeno | |

### III. Weedhahan soo socda ku buuxiya meelaha banaan midba ta ku habboon.

- Hay'adaha ka hortaga musuq maasuqa
- Koomishinka ka hortaga musuqa & Anshaxa ee Federaalka
- Koomishinka ka hortaga musuqa & Anshaxa ee Deegaanada
- Dastuurka Deegaanada
- Dastuurka Federaalka
- Sareynta sharciga
- Musuq-maasuqa
- Maxkamadaha

1. Waa mid ay ansixiyaan golaha wakiilada deegaanka oo ah dastuur ___________
2. ____________waa xubno ka tirsan qaybaha cadaalada oo la dagaalama musuqa
3. ___________ waa hay'ad qaran oo wareegto lagu aas'aasay si loola dagaalamo musuqa.
4. Waa hay'ad ka tirsan qaybaha cadaalada oo dadka toosisa, islamarkaana ganaaxda ___________ ogolaysiisana inay aqbalaan.
5. ___________ waa dambi.

## IV. Ka bixi Jawaabo koo-kooban su'aalahan soo socda.

1. Maxay tahay marka la leeyahay haddii aynan jirin awood-xadayn, waxaa lumaya cadcadaanta & la xisaabtanka?
2. Sheeg saddex ka mid ah xaaladaha horseedi kara musuqa?
3. Marka la leeyahay sirta in laxafido waxay ubaahantahay horta in la ogaado waxyaabaha sirta ah, maxaa loola jeedaa?

## V. Ka dooro Jawaabta saxda ah;

1. Marka la eego dastuuriyan, waa tee ta saxda ah?
   b) Dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Itoobiya
   t) Dastuurka Federaalka Itoobiya
   j) Dastuurka Jamhuuriyada Federaalka Dimuqraadiga Itoobiya
   x) Dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya.
2. Waa tee fikrada saxda ah?
   b) dastuurada dawlad-deeganadu waa sharciyada dalka ugu sareeya.
   t) dastuurada dawlad-deeganadu waa sharciga deegaanada ugu sareeya
   j) dastuurada dawlad-deegaanad waxaa ansixiyay golaha wakiilada shacabka ee qaranka.
   x) dastuurada dawlad-deegaanadu maraka qaarkood waxay ka horyimaadaan dastuurka Federaalka.
3. Waa tee ta tilmaamaysa faa'iidada ay awood-xadayntu leedahay?
   b) Xaqiijinta sareynta sharciga
   t) Aslixinta nidaamka cadcadaan iyo la xisaabtan
   j) Inaysan dhicin kala dambeyn la'aan nidaam
   x) dhammaan.
4. Waa tee ta aan ahayn wadooyinka musuqa lagula dagaalami karo?
   b) Barista
   t) Hagaajinta meelaha musuqu ka abuurmi karo
   j) Musuqiinta oo sharciga la horkeeno
   x) Dhammaan.

CUTUBKA 3

# Sinaanta

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Gartaan xuquuqda qoomiyadaha iyo bulshooyinka ee dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiyada Federaalka iyoItoobiya lagu qeexay.
- Gartaan waxyeelada ka dhalan karta xuquuqda qoomiyadaha iyo bulshooyinka ee sinnaanta iyo si siman uga faa'iidaysiga haddii aan la ilaalinin.
- Gartaan xaalad kasta wiilasha iyo gabdhuhu in ay siman yihiin.
- Dareemaan in ay waajib tahay in xuquuqda dadka laxaadka aan lahayn.

## 3.1 Xuquuqda ismaamul ee quruumaha, qowmiydaha iyo shucuubta

### 3.1.1 Muhiimada ay leedahay inay quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta horumariyaan deeganadooda, islamarkaana si siman uga faaidaystaan xuquuqahooda

- Maxay tahay faaidada ay leedahay xurmaynta xuquuqda ismaamul ee shucuubta dalku?

Macnaha ama nuxurka guud ee sinaantu waxa weeyi waa la'aanta xaalado ay ku dheehan tahay kala sareyn xuquuqeed, fursadeed iyo mid dabaqadeedba. Ama haddii aynu si kale u dhigno, sinaantu waa xaalad siinaysa muwaadin kasta xuquuq sharaf iyo damaanad-qaad sharci oo isku mid ah, islamarkaana waa mid ka reebaysa in lagula kaco dadka/muwaadiniinta kala jeclaysi, kala soocid/kala qoqobid, IWM.

Waana xaalad xaqiijinaysa sinaanshaha fursadahooga ka qaybgal ee arrimaha bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeed iyo waliba fursadaha shaqo ee ay ka shaqaysan karaan.

Dhinaca kale, sinaanta heerar kala duduwan ayaanu u qaybin karaa. Waxaanan fahmi karaa sinaantu inay tahay mid lagu sameeyo isbarbardhig ama tar-tarsiin laba xaaladood, labashay, ama laba ruuxba iyo wax-kabadanba. Sidaas awgeed, marka aynu ka duulo xaaladaha dhabta ah ee ka jira dalkeena, waxaa jira noocyadan sinaansho ee soo socda:-

1. Sinaanta qaramada, qowmiyaadka iyo shucuubta adalka
2. Sinaanta Muwaadiniinta
3. Sinaanta jinsiga (lab/dhadig)
4. Sinaanta luuqadaha, diimaha iyo dhaqamada.

Haddaba, haddii aan ficil lagu muujin sinaanshaha, lana odhan karo "Maxamed iyo Xaliimo ama Maryan iyo Cabdi" way siman yihiin. Balse, haddii aynu dhahno way siman yihiin, wax macna ah oo ay samayn karto ma jirto. Waxaase dhici karta in su'aal laga keeno, sinaantu maxay ku saleysan tahay? Waxaa lagu saleynayaa sinaanshaha adeegsiga xuquuqeed iyo waajibaadka. Tusaale, xuquuqda hadal ee la siiyay Cali, waa in Caasha iyo Cumar na aan loo diidin. Sidoo kale, waajibaadka Caasha iyo Cumar la saaray, waa in Calina lagu waajibiyaa. Markaas tanina waa xaalad la xidhiidha sinaanshaha ka dhexeeya Muwaadiniinta ama shaqsiyaadka kala duwan ee hal deegaan, ama wadan kuwada nool. Waxaana jirta in Dastuurka Jamhuuriyadda, Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya lagu xusay xuquuqda sinaanshaha muwaadiniinta. Tusaale, waxaa lagu qeexay xuquuqda Aadamiga iyo tan dimuqraadiyada oo faah-faahsan. Waxaana si qoto dheer u sii faah-faahinaya qodobka 25aad, xuquuqaha sinaanshaha.

Ardayeey waxaa laga yaabaa inaad maanka ku haysaan su'aashan ah

Waa maxay faa'iidada ay leedahay Sinaantu?

- Ardaydu haka wada xaajoodaan su'aasha, kadibna, jawaabta fasalka ha u soo bandhigaan.

Marka la dhawro sinaanshaha bulsho, dhaqaale, iyo tan siyaasadeedba, ee ka dhexeeya muwaadiniinta, qowmiyaadka, diimaha, Luqadaha iyo caadooyinka (dhaqamada) kala duduwan, waxaa suurtagal ah in la gaadho dimuqraadiyad, cadaalad, nabadgelyo iyo horumar waara oo ka hanaqaada dalka guud ahaan. Sidaas awgeed, sinaantu waxay door muhiim ah ka qaadataa xaaladahan kala ah xoojinta hanaanka dimuqraadiyada, xaqiijinta sinaanta shucuubta, horumarka iyo khayraadka oo si siman Deegaanadu uga wada faa'iidaystaan, iyo aslixinta (xasilinta) nabadgelyada.

### Xoojinta hanaanka Dimuqraadiyada





Jantuska 3.1. Hay'adaha Horumarka ee u dhaxeeya D/weynaha

### Baaqa ka soo yeedhaya bulshada Tuulada ee la xidhiidha Horumarka

Tuulada uu degenyahay Qorane waxaa ka jira dhibaatooyin la xidhiidha gabaabsi xaga adeegyada bulshada sida biyaha nadiifta ah, quwada korontada, iyo adeegyada telefoonada. Intayar ee Jirtana. Waxaa lagu bixiyaa garasho

iyo cad-cadaan la'aan. Dadweynaha tuuladuna, waxay qabaan wal-wal la xidhiidha mushkiladan. Masuuliyiinta Tuuladuna xilkoodi uma gudan sidii looga baahnaa ee dastuuriga ahayd. Balse, bulshada ayaa rabta inay iyadu si firfircoon ugu qayb qaadato hawlaha horumarka si loo xaliyo dhibaatooyinkooda. Hadaba, wakiilada shacabku marar badan ayay maamulka Tuulada u gudbiyeen dhibaatada bulshada ee ah in si siman loo isticmaalo adeega bulsho. Hase ahaatee, bulshadu ma helin jawaabtoodii. Maamulka Tuulahduna wuxuu ugu jawaabay, waa inaad aqbashaan sidaan anagu idiin ku talino, maadaama aynu idin matalo, islamarkaana Fulisaan waxaan idinku amarno:

### Layliska 1

Kawada xaajooda su'aalaha soo socda

1. Jawaabta ka soo yeedhay maamulka tuulada Qorane iyo ma mid ku haboon bulshada baaqee diibaa?
2. Maxaa bulshada la gudboon si ay mustaqbalka xal uhelaan.
3. Goobihiina makajiraan arimahan oo kale? Haday haa tahay, side mustaqbalka loo sixi karaa? Kawada hadla.

Dimuqraadiyadu waxay xoogaysan kartaa oo kaliya marka la helo xaalad leh sinaansho xuquuqeed oo dhinac kastaba taabanaysa sida sinaanta qowmiyaadka, sinaanta diimaha, sinaanta luqadaha, sinaanta jinsiga (lab/dhadig) IWM.

Sidoo kale, sinaantu kaalin weyn ayay ka qaadataa adkeynta/xoojinta hanaanka dimuqraadiyadeed, waayo marka la xaqiijiyo sinaan dhab ah oo ay muwaadiniintu ama shucuubtu u siman yihiin fursadaha dhaqaale, bulsho ama kuwa siyaasadeedba, ayaa la dhihi/odhan karaa hanaan dimuqraadiyadeed ayaa ka jira dalka.

Matalan, wakhtigan xaadirka dalkan Itoobiya waxaa ka jira hanaan dimuqraadiyadeed oo suurta galiyay in qoomiyaadka, diimaha, luqadaha, jinsiyada (Lab/dhadig), iyo dhaqamada kala duwani helaan sinaan dastuuri ah oo ay dhammaan kuwada noolaan karaan iyga oo aan la kala soocin ama lakala faquuqin sababo la xidhiidha isirkooda, midabkooda luqadooda ama diintooda awgeed.

Dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya waxaa lagu xaqiijiyay in Muwaadiniintu/qowmiyaadka dalku ay leeyihiin xuquuqo iyo damaanad qaad ama dhawrsanaan sharci oo isku mid ah, sidoo kalena waxaa shardi lagaga dhigay waajibaadyo siman oo ay tahay inuu ruux/muwaadin waliba fulinteeda iyadoon loo kala hadhin.

Haddaba, gunti iyo gabagabadii hanaan dimuqraadiyadeed oo xoogan/adag waxaa la gaadhi karaa oo kaliya, marka la helo sinaan cadaalad ah oo dhan kastaba leh haday tahay sinaansho dhaqan-dhaqaale, bulsho iyo mid siyaasadeedba oo ka dhaxeysa muwaadiniinta/qowmiyaadka, dhaqamada, diimaha, luqadaha, jinsiga IWM.

Si kastaba ha ahaatee, sinaantu waxay dalka iyo dadkaba u horseedaa midnimo iyo isku duubni lagu gaadhi karo dimuqraadiyad, nabadgelyo, cadaalad iyo horumar taam ah oo ka hanaqaada dalka isla markaana noqda mid ay si siman uga wada faa'iidaystaan qaramada, qoomiyaadka iyo shucuubta kala duwan ee kuwada nool dalka.

### 3.1.2 Si Deegaanada si siman looga faaideeyo horumarka, waa in la sugo nabadgelyada islamarkaana la dedejiyo horumarka

Haddii aan la dhawrin sinaanshaha muwaadiniinta ama tan shucuubeed ee qowmiyaadka dalka kuwada nool (Dhaqan), waxaa haddaba, meesha ka baxaya isku dheeli tirnaanta miisaan ee bulshada ka dhaxeysay.

Xuquuqda dadweynaha guudna waxaa ku tuman dad tira yar (shaqsiyaad tira yar).

Sidoo kalena, shaqsiyaad yar oo fara-ku tiris ah ayaa lunsan kara danta-guud. Waxaana abuurma quudhsi iyo wasakhayn loo geysto luqadaha iyo dhaqamada dadyowga kale, islamarkaana waxaa meesha soo gali kara, islawayni dhaqan iyo luqadeed oo la isa siiyo ama la sheegto oo xaqiiqada ka fog.

Ficiladan oo kalena, waa kuwo ku abuuri kara ruuxa nacaybsho. Waana kuwo dadka kala fogeeya.

Haddaba, Xaaladahan oo kale waa kuwo abuuri kara dareen ah in dadka tirada yar ee talada dalka haya ay isu arkaan inay ka sareeyaan dadka kale oo ay iyaga uun talo ka go'do. Dhinaca kalena, dadweynaha tirada badan, waxaa la soo gudboonaada dareen ah gumaysi iyo sharaf-dhac (niyad-jab) ka yimaada nafsadooda, wayna ka xumaadaan. Sidaa darteed, waxay ku qasban yihiin inay xog isticmaalaan siday xuquuqdooda u soo ridan lahaayeen.

Markaasna waxay fooda isdarayaan shaqsiyaadka tirada yar ee danihiisa xukun ilaashanaya. Halkaasna,waxaa ku luma nabadgelyada iyo xasiloonida. Haddaba, sinaan la'aan dimuqraadiyad, dimuqraadiyad la'aan nabadgelyo, nabadgelyo la'aan shaqo, shaqo la'aan horumar, horumar la'aan qaninimo lama helayo/lama gaadhayo.

Haddaba, sinaanshaha shaqsiyaad ama kan shucuubeed ee qowmiyaadka kala duwan ee dalka kuwada nool, waxaa la sugi karaa oo kaliya marka la siiyo xuquuqo iyo fursado siman oo isku mid ah ha ahaato mid bulsho, dhaqaale iyo mid siyaasadeedba, iyaga oo aan loo eegayn qowmiyadooda, luqadoodam diintooda dhaqankooda, jinsigooga (Lab/dhadig), midabkooda, aragtidooda gaar ahaaneed IWM.

Wakhtigan xaadirka ah waxaa dalkan, Itoobiya ka jira nidaam dimuqraadiyadeed oo ku dhisan rabitaanka qaramada, qowmiyaadka iyo shucuuba kala gadisan ee kuwada nool dalka guud ahaan. Sida ku cad, qodobka 25aad ee Dastuurka Jamhuuriyada, Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya (JDFI), waxaa lagu xusay dhawrsanaanta la siiyay sinaanshah xuquuqeed ee qaramada, qowmiyaadka iyo shucuubta kala haysta/aaminsan dhaqamada, diimaha, luqadaha iyo aragtiyada kala duwan.

Waxaa qaran iyo qowmiyad kasta la siiyay xuquuq ay aaya katashi ku samaystaan ilaa heer goosasho, islamarkaana ismaamul gaar ah u yeeshaan, si ay dhaqankooda iyo luqadoodaba u horumarinyaan. Waxaa kaloo la siiyay xuquuq ah inay iskumaamulaan afkooda (luqadooda) hooyo, waxna ku bartaan qoraal iyo hadalba ha ahaatee. Waxaa kale oo loo sugay ka faa'iidaysiga horumarka Deegaanadooda iyo manaafacaadsiga hantida iyo khayraadka dabiiciga ah ee dhulkooda.

## Sinaanta

Sinaantu waxay kaalin muhiim ah ka qaadataa sidii ay muwaadiniintu ama qowmuyaadka kala duwan ee deegaanada dalka ku dhaqani si siman uga wada faa'iidaysan lahaayeen dhaq-dhaqaaqyada horumarka dhaqaale, bulsho, siyaasadeed ama kan dhaqanba ee laga wado dalka guud ahaan. Sidaas awgeed, xukuumada wuxuu xil ka saran yahay:-

- U jihaynta dhammaan muwaadiniinta dalku sidii ay uga faa'iidaysan lahaayeen waayo-aragnimada aqooneed iyo khayraadka ku kaydsan dalkan.
- Kor u qaadista xaaladda dhaqaale ee muwaadiniinta, inay u sinnaadaan fursadaha iyo inay u diyaariso sidii ay khayraadka dalka si caadil ah ugu qaybsadaan.
- Ka hortaga masiibooyinka dabiiciga iyo kuwa insaanigaba, haddii ay dhacdo masiibo waa in si deg-deg ah taakulo loo gaadhsiiyo dadka ku waxyeelooba.
- Taakulaynta Deegaanada ama Quruumaha, qowmiyadaha & Shucuubta dhinaca horumarka dib uga dhacsan.
- Waa inay dhulka iyo khayraadka dalka uga faa'iidayso danaha iyo horumarka dadweynaha
- Ka qaybgelinta qaybaha bulshada hawlaha la xidhiidha dejinta siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarineed ee dalka iyo waliba taageerista dhaq-dhaqaaqyada horumarineed ee u shacabku wado.
- Diyaarinta qaab ay haweenku si sinaan ah raga ugala qayb-galaan dhaq-dhaqaaqa horumarka dhaqaale iyo bulsho ee dalka.
- Ilaalinta caafimaadka, nabadgelyada iyo kor u qaadista heerka nololeed ee shacbiga.
- Fidinta adeegyada waxbarashada, caafimaadka, biyaha nadiifta ah, hoyga, cuntada iyo damaanada hawl-gabnimada, si isku dheeli tiran.
- Xurmaynta hawiyada, Qaramada, qowmiyadaha & Schuubta, iyo waliba xoojinta sinaanta, midnimada iyo walaaltinimada ka dhaxeysa.
- U fududeynta sidii u shacabku iskii isku maamuli lahaa, iyadoo laga duulayo mabaadi'da dimuqraadiga ah.
- Gacan ku siinta koritaanka iyo horumarka dhaqamada iyo caadooyinka aan ka hor imaanayn xuquuqda aas'aasiga ah, sharafta aadamaha, dimuqraadiyadda iyo Dastuurka, si isku dheelitirnaan ay ku dheehan tahay.
- Fidinta culuunta sayniska iyo teknoolojiyada, hadba intii karaankeeda ah.
- Waxaa kale oo xukuumadda iyo muwaadiniinta xil ka saran yahay daryeelista deegaanka.

Sinaantu waxay kaalin fir-fircoon kaga jirtaa xasilinta nabadgelyada iyo dhiiri-galinta hawlaha horumarka dalka.

Marka la helo sinaan xuquuqeed oo cadaali ah oo ka dhxeeya muwaadiniinta, ama qaramada, qowmiyaadka iyo shucuubta kala isirka ah, kala midabka ah, kala luqadaha ah, kala dhaqanka ah, kala diimaha ah IWM, ee Deegaanada dalka ku nool.

Sidaas awgeed, sinaan marka la helo ayaa waxaa la gaadhi karaa nidaam dimuqraadiyadeed, marka la helo dimuqraadiyad ayaa nabadgelyana la gaadhi karaa.

Kadibna, marka nabadgelyo la helo ayaa horumar iyo barwaaqaba la tiigsan karaa.

Haddaba, sugida nabadgelyadu qayb libaax ayay ka qaadataa hawlaha dedejinta horumarka iyo ka midha-dhalintiisaba.

## Layliska 2

1. Waa maxay sinaanta horumarka marka aynu leenahay?
2. Deegaanada dalku ma siman yihiin horumar ahaan? Haday haa ama maya tahay Jawaabta tafaasiil dheeri ah ka bixi.
3. Sinaan la'aan horumar hadduu jiro wax saamayn ah ma ku yeelan kartaa, ammaanka goobtaas?
4. Ayaase lagula xisaabtami haday sinaan la'aan joogta ahi ka jirto deegaanada, dhinaca horumarka?
5. Sinaantu sidey dimuqraadiyada u xoogayn kartaa? Nabadgelyadase?

## 3.2 Dhibaatooyinka ka dhalan kara sinaan la'aanta ka faa'iidaysiga

- Haddii aan la sugin xuquuqda sinaanta ka wada faa'iidaysiga?

Haddii aysan jirin sinaansho xuquuq iyo fursadeed oo cadanli ah oo ka dhaxayn karta bulsho goob/deegaan, ama wadan wada degan, dhibaatadeeda ayay leedahay. Matalan, bulshadu haddii aynan helin sinaansho xuquuqeed & fursadeed oo la taaban karo sida:-

Sinaansho-siyaasadeed, sinaansho dhaqaaleed, sinaansho-bulsheed, sinaansho dhaqameed, sinaansho sharciyeed, sinaansho luqadeed, sinaansho diimeed, sinaansho jinsiyeed (Lab/dhadig) IWM.

Markaas halkaas, waxaa ka dhalan kara masiibo ama halis aan la saadaalin Karin oo la soo gudboonaata bulshadaas sinaan la'aanta & cadaalad daradu ka jirto dhaxdooda. Tusaale, dalkan Itoobiya waa dal quruumo & qowmiyado farabadani ku noolyihiin, islamarkaana leh dhaqamo & luuqado kala jaad-jaad ah;

haddii quruumahaas & qowmiyadahaasi aynan helin xuquuqo & fursado siman oo dhammaan ay ku wada qanacsan yihiin, waxaa markaas halkaas ka abuurmaya Farqi & Kala duwanaansho dhaqan-dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeedba.

Haddaba, farqigaas & kala duwanaanshahaas la soo gudboonaaday qaybaha bulshada ee la xidhiidha sinaan la'aanta, wuxuu u horseedaa dalka & ummadaba, tafaraaruq, shaki, qas, iyo deganaansho la'aan siyaasadeed, dhaqaale & mid bulshaba. Dhibaatooyinkaasna waxaa ka mid noqon kara sida arrimahani;

- Deganaansho la'aan siyaasadeed oo dalka ka abuuranta sida loolan awoodeed oo dhaxmara kooxaha, muwaadiniinta, ama qowmiyadaha kala duduwan ee dalka kuwada nool sababtoo ah sinaansho la'aanta sharciyeed ee ka jirta awgeed. Markaas, xaaladahani waa kuwo sii murgiya xiisadaha siyaasadeed ee qaybaha bulshada ka dhexeeya.

Markaas, haddii aan la helin awood-qaybsi siyaasadeed oo ay bulshada oo dhan ka dhax-muuqan karto, waxaa hubaal ah in ay soo shaac-baxdo xaalado awood-sheegasho, awood ku tagrifal, musuq-maasuq, kooxaysi iyo amar-kutaaglayn ay ku kacaan kooxo tiro yar, islamarkaana dadweynuhu intiisa badani ay la soo gudboonaato gumaysi, cadaadis iyo dulmi ay kala kulmaan sinaan & cadaalad la'aantaas la xidhiidha siyaasada.

Waxaa kaloo meesha soo galaysa sinaan la'aan bulsheed. Sida haddii aan bulshada dhammaan si siman loo gaadhsiinin adeegyada aas'aasiga ah ee sida waxbarashada, Caafimaadka, Biyaha, Isgaadhsiinta, Wadooyinka/Jidadka), horumarka, dhismayaasha xarumaha dadweynaha IWM.

Sidaas awgeed, sinaan la'aantaas bulsheedna waxay hormood ka noqdaan xasilooni daro ku timaada bulshada iyo khilaaf soo kala dhax-gala muwaadiniinta ama qowmiyadaha kala duwan ee dalka, islamarkaana waxaa abuurmi kara isku dhacyo, sobobi kara dagaalo sokeeye oo dalka ka holca.

Dhinaca kale, haddii u jiro farqi dhaqan-dhaqaale oo qaybaha bulshada ka dhax jira, iyadna dhibaatadeeda gaar ahaaneed ayay leedahay. Matalan, haddii aan fursadaha dhaqan-dhaqaale si siman oo cadaalad ah loo maarayn ama loo maamulin, waxaa hubaal ah in la fisho khilaaf ama isfahan la'aan ku timaada muwaadiniinta/ qowmiyadaha dalka ama Deegaanada wada degan.

Mida kale, haddii iyadna u jiro farqi dhinaca jinsiga ee lab iyo dhadiga ah, waa xaalad keeni karta sinaan la'aan xaga qoyska, oo markaana horseedi karta kalatag iyo bur-bur ku yimaada wada jirka qoyskaas.

Haddaba, guud ahaan noocyadaas sinaan la'aanta ee ka jirta muwaadiniinta, ama qowmiyadaha dalka kuwada nool dhaxdooda, waxay u horseedaa bulshada iyo dalkaba, masiibooyin daran oo cawaaqib xun ku reeba dalka, sida mija-xaabinta nabadgelyada & xasiloonida bulshada guud ahaan. Iyo waliba xagal-daacinta ama ragaadinta horumarka ka socda dalka. Sidaas awgeed, haddii aan la helin sinaansho xuquuqeed oo muwaadiniinta dalka ka dhaxaysa, lama gaadhayo dimuqraadiyad, cadaalad horumar iyo qaninimo ka hanaqaada dalka. Sidoo kalena lama helayo nabadgelyo la isku halayn karo oo waarta.

## Layliska 3

1. Ardayeey, goobihiina ma ka jiraan dhibaatooyin ka dhashay sinaan la'aan xuquuqeed/fursadeed? Faah-faahi Jawaabta haday haa tahay.
2. "Dhibaatooyin bulsho" ayaa ka dhalan kara sinaan la'aanta, ma'sjeegi kartaan macnaha ama kuwa ay yihiin dhibaatooyinka bulsho?
3. Ayaase, ka masuul noqonaya dhibaatooyinka sinaan la'aanta?

## 3.3 Sinaanta Quruumaha, Qowmiyadaha & Shucuubta

### 3.3.1 Xurmaynta luqadaha, dhaqamada iyo astaamaha kalee quruumaha, qowmiyadaha, iyo shucuubta Itoobiya, faa'iidada ay u leedahay dhismaha hanaanka dimuqraadiyadeed iyo aas'aasida midnimo adag



Jaantuska 3.2. Itoobiya waa dal leh Qowmiyado kala duwan

- Waxaad ka fahanteen sawirka kor ku xusan saxiibadiin la wadaaga?

Sinaantu waa qodob ka mid ah qiimaha & qaayaha dimuqraadiyadu leedahay. Erayga sinaan macnihiisu maaha isku ekaansho, balse waa lahaanshaha xuquuqo & fursado siman oo muwaadiniinta ka dhexeeya.

Haddaba, iyada oo ay meesheeda tahay kala duwanaanshaha xaga isirka, midabka, dhaqamada, diimaha, luqadaha, jinsiga IWM, ayaa hadana la siiyay xuquuqo siman qaramada, qowmiyadaha & shucuubta kala duwan ee Dalkan Jamhuuriyada Dimuqraadiga ee Federaalka Itoobiya. Sidoo kale dhammaantood sharciga hortiisa way u siman yihiin.

Waxaana sinaanshaha xuquuqaha kala duwan ee la siiyay quruumaha, qowmiyadaha iyo shucuubta dalka, lagu xusay cutubka 3aad ee Dastuurka Federaalka qaranka Itoobiya.

Waxayna kala yihiin noocyadan sinaansho ee hoos ku xusan:-

1. Sinaanta siyaasadeed
2. Sinaanta dhaqaale
3. Sinaanta sharci
4. Sinaanta jinsi
5. Sinaanta luqadeed
6. Sinaanta diimeed etc.

Haddii aynu wax yar ka sheekayno faa'iidada xurmayntu ay u leedahay nidaamka dimuqraadiga ah & midnimada bulsha-weynta dalka Itoobiya, waxaa tusaale inagaga filan, waa iyada oo la is bar-bardhigo Itoobiyada cusub ee Maanta & Itoobiyadii hore ee Shalay.

Haddii aynu wax yar dib u jaleecno wakhtiyadii xukuumadihii hore ee Itoobiya, waxaa marag madoon ah inaysan kuwaasi xurmayn ama wax qadarin ah siinin dhaqamada, luqadaha & astaamaha kale ee qaramada & qowmiyaadka iyo shucuubta.

Xukuumadahaasi waxay ahaayeen kuwo kutuntay xuquuqda & karaamadii dad-weynaha Itoobiya, waxayna badeen silic iyo saxariir. Waxayna lumiyeen kalsoonidii shacabkooda. Waxayna

xaqireen ama dafireen jiritaanka shucuubta qaarkood, gaar ahaana, ummada Soomaaliyeed ee Deegaankan balaadhan ku nool, iyagoo nagu sheegay inaanan Itoobiyaan ahayn, balse aan ahayn shisheeye. Taasna, waxay ku tusaysaa, Inkiraada xaqa & xurmada ruuxa bani aadanka ahi ku leeyahay dalkiisa.

Kadib markii halgan adag loo galay sidii loo soo ridan lahaa sharafta, karaamada & xuquuqda shucuubta dalka guud ahaan, ayaa waxaa lagu guuleystay in meesha laga saaro ugu dambayn taliskii kaligii taliyihii Mengistu, iyo xukuumadiisa dhiig-miiratada ahayd.

Haddaba, markii wadanka laga dhaliyay nidaamkan dimuqraadiyadeed, ayaa waxaa la qoray dastuur qaran oo ay dhammaan qowmiyadaha kala duwan ee dalku ka qayb-qaateen. 1995, ayaana dastuurka la ansixiyay. Sidaas awgeed, quruumihii, qowmiyadihii & shucuubtii dulmanaa ayaa aqoonsi sharci la siiyay, waxaana lagu xusay Dastuurka sinaantu inay lafdhabar u tahay dalkan Itoobiya.

Sidaas awgeed, dhaqamadii & luqadihii dulmanaa ayaa xurmayn lagu siiyay dastuurka.

Taasina waxay dalka u horseeday in la dhiso hanaaan dimuqraadiyadeed oo ay dhammaan dadweynuhu kuwada noolaadaan. Sidoo kale waxaa ummad walba fursad loo siiyay inay ismaamul iskeed ah dhisato oo aayahooga ka tashato haday tahay siyaasad, dhaqaale, bulsho & dhaqanba.

Waxaana xurmayn la siiyay dhammaan dhaqamada, luqadaha, diimaha iyo astaamaha kale ee shucuubta Itoobiya ku nool, taasina waxay dalka u horseeday in la dhiso midnimo adag oo waarta. Dhinacna iska dhigta kala duwanaanshaha dhaxdooda islamarkaana kawada shaqeeya danta guud ee dalka horumarkiisa.

### Layliska 4

1. Waa maxay sinaanta ka dhaxeyn karta qowmiyadaha Itoobiya kuwada nool?
2. “Sinaansho-shucuub”, maxay ka dhigantahay?
3. Sidee loo dhisi karaa hanaan dimuqraadiyadeed, iyo midnimo adag oo dalka ka dhalata?

## 3.4 Sinaanshaha Jinsiga

### 3.4.1 Faa’iidooyinka ay leedahay sinaanta jinsigu

- What is the significance of promoting gender equality?

Sinaanshaha jinsigu waa sinaanta xuquuqeed iyo tan fursadeed ee ka dhaxaysa lab & dhidiga ama ragga & haweenka. Taariikhiyan, haweenka lamasiin jirin tixgalin amase, lalama simi jirin ragga dhinacyada fursadaha & xuquuqahaba. Haweenka lalama simayn ragga hadaytahay fursadaha dhaqaale, bulsho, siyaasadeed, ama dhaqanba.

Arrimahaas takoorka haweenka lagu sameyn jirayna waxay badeen dumarka inay ka hoos maraan ragga qayrkooda ah.

## Sinaanta

Haddaba, manta waxaa jirta in xuquuq-sinaansho oo sharci ah la siiyay ragga iyo haweenka, hadaytahay fursadaha shaqo dhinacyada arimaha bulsho, dhaqaale, siyaasad iyo wixii la xidhiidha.

Sidaas awgeed, xukuumada & dadweynahaba wuxuu xil ka saran yahay xuquuqdii dastuur ee haweenka la siiyay in la dhawro islamarkaana, la dhaqangaliyo oofinteeda. Sidoo kale, haweenku inay u guntadaan sidii ay u ilaashan lahaayeen xuquuqdaas dastuuriga ah ee ay manta heleen.

Sinaantaas xuquuqeed ee la siiyay waxay gacan ka geysan kartaa kaalinta haweenku ku leeyihiin ka shaqeynta hawlaha horumarka iyo waliba inay haweenku hal-bawle u noqon karaan horumarka laftigiisa.

### Layliska 5

1. Ardayeey goobihiina degmooyinkiina ma jiraan sinaan jinsiyeed?
2. Waa maxay kala duwanaanshaha ragga & haweenku? Dhinacyada shaqo?
3. Haweenku ma ka karti & maskax yar yihiin ragga? Faalo ka baxsha.

## 3.5 Naafanimada

### 3.5.1 Faa'iidada ay leedahay xurmaynta Xuquuqda dadka naafada ah



Jaantuska 3.3. Curyaamiin samaynaysa Isboorti.

- Saaxibadiin kala sheekaysta waxa aad ka fahanteen sawirkan?
- Ma u maleynay saan inu qofka naafada ahi qaban karo hawlkasta?

### Sheeko dhax martay Arday Axmed iyo Mudane Cigaal

Arday Axmed: waxaan kaaga mahad celinaya sida aad iiga ogdaalatay wareysigan inaan kulayeesho.

Mudane cigaal: waad mahadsantahay sida aad fursadan wareysi iigu fidisay.

Arday Axmed: halkeebaad ku dhalatay? Kuna barbaartay?

Mudane Cigaal: waxaan ku dhashay tuulo katirsan Gobolka Jig-jiga. Waxaanan ku soo barbaaray isla tuulada qoyskayaga dhexdiisa, kaas oo ka koobnaa hooyo iyo Aabe iyo 5 ubada oo kala ah saddex wiil iyo laba gabdhood.

Arday Axmed: hadda meeshan aad joogto sidee baad ku timid?

Mudane Cigaal: waxaan immiday muddo kadib, markii aan ku caga beelay qarax miino dhulka lagu aasay wakhti hore anigoo xoola jir ah. Marka hore, waxaan halkan u immiday inaan daaweeyn ka raadsado. Sababta kale e igu sii kaliftay inaan halkan u soo wareego, waxay ahayd dhibaatooyin dhanka aragtida la xidhiidhay oo ay bulshadii tuuladayadu ka qabeen dadka curyaanka ama naafada ah. Matalan, qoyskayaga

ayaa igu dhihi jiray ha bixin, guriga iska fadhi, waayo, dadku ayayna ku arkin, islamarkaana isku kaa soo tilmaamin curyaan nimdaada.

Arday Axmed: halkan markaad timid kadib bulshada magaaladan sidee bay tahay aragtidooda ku wajahan naafanimada?

Mudane Cigaal: runtii, markii aan soo gadhay halkan lama kulmin aragti ka duwan tii aan ka soo tegay; mana jirin sidoo kale cid isoo dhaweysata. Waxaan ku noolaa masaajida iyo darbiyada dhismyaasha hoostooda oo i ahaa hoy. Sidaas iyada oo ay tahay, haddana waxaa jiray qaar badan oo bulshada goobtan ah oo naxariis ii muujin jiray, haday tahay xag dhaqaale iyo tala ahaanba.

Arday Axmed: hadda maxaad ka shaqeysaa?

Mudane Cigaal: hadda hawlgab ayaan ahay. Balse ka hor, waxaan mudo dhan 30 sano ka soo shaqeeyay Geerash ku yaala magaaldan, islamarkaana aan ka ahaa farsama yaqaan ku wanaagsan dhanka daayactirka gawaadhida guud ahaan. Hawlihii waxqbad ee aan ka soo qabtay geerashkaas, waxay ahaayeen kuwa loo bogay, islamarkaana raad-reeb fiican ku reebay maskaxdayda iyo qanacsanaan xagga nabsada ah. Illaahay mahadi, hadda waxaan ahay Aabe qoys baladhan leh islamarkaana degan guri hanti ah oo aan anigu dhistay iyo hanti kaleba oo aan qoyskayga baahidiisa ku daboolo hadda iyo mustaqbalka ba. Hadaba, hadii aan xiligaas shaqeysan, oo aan noqon lahaa dawarsade, ma noqdeen maanta sida aan ahay.

ARday Axmed: adiga oo naafa ah, haddana naafanimadaadisi kaama hor istaagin inaad xataa shaqo culus aad ka shaqeyso, markaas maxaad maanta u soo jeedin lahayd oo tala ah dadka kale ee naafada ah sidaada oo kale?

Mudance Cigaal: Anigu makraan shaqada galayay waxaan ku bilaaby mushaar yar, balse anigu mayaraysan shaqada, waxaanan isku qanciyay inuu mushaarkan yari iiga khayr badanyahay mashaqeystanimada iyo dawarsiga cid kale. Markaas, waxaa loo baahanyahay in la ogaado naafanimadu inaysan ahayn micnaeedu mashaqeystanimo iyo quus raja goys ah. Hadaba, hadii la yeesho kalsooni, la saxo aragtida khaldan, islamarkaana la helo gacan qabad, waxay qabsan karaan waxqabad wax u tari doona jiilasha mustaqbalka sidaas awgeed; cid kasta oo naafa ah waa inay la timaadaa

ka go'naan shaqo, iyada oo nan lakala xulanayn shaqooyinka, islamarkaana loo baahanyahay in lala yimaado dadaal dheeri oo wax lagu qabsanayo.

Arday Axmed: mahadsanid!

Mudane Cigaal: Adiguna sidoo kale, mahadsanid!

## Layliska 6

Su'aalaha soo socda ka jawaaba idinka oo ka duulaya wareysiga kor ku xusan.

1. Nolosha Cigaal maxaa dhaxalgal ah oo aad ka koradh sateen? U soo bandhig saaxibadaa,
2. Muxuu mudane Cigaal ulajeeday marka uu lahaa naafanimadu maaha dawarsade iyo wax dhintay?
3. Maxaa mudane Cigaal ku keenay naafanimada/ curyaanimada? Shilalka noocan oo kale si loo yareeyo, maxaa loo bahanyahay in la sameeyo?

Su'aashan ardaydu ha ka wada xaajoodaan iyagoo koox-koox isku qaybinaya, kadibna koox kastaba, ha u soo bandhigto fasalka, jawaabtooda.

Xurmaynta/dhawrista xuquuqda dadka dhibanayaasha xaga xubnaha jidhkooda haday tahay curyaan, indhoole, dhagoole, laangadhe, IWM, waa waajib saran dhammaan shacab & xukuumadba xanaaneynta/daryeelista dadkan aynu kor ku soo sheegnay. Waayo waa qayb ka mid ah bulsho-weynta dalka markaas dalkana xuquuq bay ku leeyihiin in loo fidiyo adeegyada aas'aasiga ee sida caafimaadka, waxbarashada, biyaha nadiifta, isgaadhsiinta.

Gaar ahaan dadkan dhibanayaasha ahi waxay leeyihiin baahi gaar ah tan bulshada kale ka duwan. Sidaa awgeed, waxaa waajib muqadas dhaqamiyan & diiniyan in taakulo-gaar ah loo fidiyo si ay u dareemaan jacaylaha, taageerada, walaaltinimada iyo soo dhawaynta loo hayo iyaka. Sidoo kale, xubnahan bulshada ka tirsani, waa in la tusaa inaysan ka garaad & karti hoosayn bulshada inteeda kale, markaasna ay tartan la sameyn karaan arimaha dhaqaale, bulsho iyo kuwa siyaasadeedba.

Marka si wanaagsan oo ay walaaltinimo ku dheehan tahay marka loola dhaqmo, ama loola macaamilo dadkan, waxay qaadanayaan aragti ah in ay la siman yihiin bulshada inteeda kale, waxayna qaadanayaan aragti ah in ay la siman yihiin bulshada caadiga ah, islamarkaana waxay yeelanayaan dareen ah dad & dal jacayl ay u qabaan.

Faa'iidada xurmaynta xuquuqda dadka naafada ahi leedahay, waxaa kale oo ka mid noqol kara, iyaga oo meesha ka saara dareenkii ahaa dhawrista & baahida gargaar ay dad ka sugaan had iyo jeer.

Waxaa kale oo xurmaynta xuquuqda dadka naafadu gacan ka geysataa abuurista jawi habboon oo ay dadkan dhibanayaasha ahi kaga qayb-gali karaan hawlaha horumarka la xidhiidha iyo kaalinta ay ku leeyihiin iyagu.

## Layliska 7

1. Dadka naafada ah caawimaad noocee ah ayay u baahan yihiin?
2. Dadka dhibanayaasha ah sidey uga qayb-qaadan karaan hawlaha horumarka dalka?

3. Bulshadeena Soomaalidu siday ula dhaqantaa dakan naafada ah?

## 3.6. Dhibaatooyinka ka dhalan kara dhawris la'aanta xuquuqda sinaanshaha diimaha

### b) Heer shaqsi ahaan

Waxaa loo baahanayahay inuu qofkasta ogaado sida ay diintiisu qiimo ugu leedahay isaga/iyada, inay dadka kalena diintoodu qiimo lamid ah iyagna ugu leedahy. Muwaadin kastana waxaa la gudboon inuunan xajiimayn diimaha kale, islamarkaana indha.midaatay ku dhawro dhamaan diimahaa kaladuwan. Sidoo kale, waxaa loo baahanyahay inaanan cidna lagu cadaadin caqiido uu san rabin ama aaminsanayn.

Sidaa daraadeed, hadii uu muwaadin kasta fahmo arintan, waxaa abuurmaya jawi haboon oo si nabadgelyo ah lagu wada noolaado, islamarkaana lagaga hortago wax kasta oo qalalaase iyo colaad u horseedi kara dadka iyo dalkaba.

### t) heer qaran ahaan

sida lawada ogsoonyahay dalkeena Itoobiya waxaa mudo aad u dheer ka jirtay diin-dawladeed taas oo cabudhin iyo cadaadis baday diimaha kale, islamarkaana meesha ka saartay fursad kasta oo sinaansho-diimeed lagu abuuri karayay.

In kasta oo xiligii dawladii Dergiga, dawlada iyo diinta lakala soocay, haddana waxaa si aan muran kujirin loogu kala soocay diinta iyo dawlada markii la ansixay dastuurka Federaalka ee wakhti xaadirka, waxaana la meel mariyay in diinta iyo dawlada midba ay ku eekaato xilka iyo waajibaadkeeda, gaar ahaaneed. Sida ku cad qodobka 11aad ee dastuurka. Kaas oo qeexaya:

1. Kala soocanaanta diinta iyo dawlada
2. Diin dawladeed inayna jirin
3. Dawladu arimaha diinta ma faragelin karto. Sidoo kale diintuna arimaha dawlada ma faragalin karto

Markaas, hadii ayjirto in diin laga koryeelo diimaha kale ama diin laga hoos mariyo kuwa kale, waxaa adkaanaysa in si buuxda loo hirgeliyo sugida xuquuqaha muwaadiniinta. Hadaba, ilaa inta ay jiraan xaalado la xidhiidha xadgudubyo iyo cabudhin loo geysto qaybo ka mida bulshada, lama filan karo in la helo degenaansho waara oo lagu naaloodo, waayo cida tabaneysa dhib, waxay ku kici kartaa wax kasta oo ay xuquuqdooda ku soo ridan karaan. Sidaasna, waxaa hubaal ah in lagalo dagalo sokeeye oo horseedi kara qalalaase iyo dagaalo daba-dheeraada oo dalka

ka hor istaaga sidii looga saari lahaa dib u dhacnimada iyo faqriga sidaas awgeed, waxaa loo baahanyahay in la dhawro xuquuqaha sinaansho ee diimaha kala duwan si ay iyaguna uga qayb qaataan hawalaha lagu xoojinayo dhismaha hanaanka dimuqraadiyadeed ee dalka laga wado.

## Layliska 8

Kawada hadla su'aalaha soosocda.

1. Dhawris la'aanta xuquuqda sinaanshaha diimaha, maxay dhibaato u keeni kartaa shaqsiyan iyo qaran ahaan ba?
2. Maxay tahay faa'idada laga helayo, diinta iyo dawladu inay midba tan kale faragelinin?

## Gunaanadka Cutubka 3aad

Aqoonsiga iyo xurmaynta xuquuqda sinaansho waa arin fure u ah xoojinta nidaamka dimuqraadihadeed. Xushmeynta xuquuqaha qowmiyaadka & shucuubta dalku, waxay sahlaysaa xaqiijinta xuquuqahooda sinaansho. Sidoo kale, sugida xuquuqda sinaan waxay u sahlaysaa inay si siman oo midaysan ugu wada dhaqmaan odhaahdooda axdi ee dastuurka. Haddii ay dhibaato la soo gudboonaatana hab nabadgelyo ayay ku xalinayaan. Waxayna abuuraan jawi haboon oo fir-fircoon oo lagu horumarinayo deegaanadooda.

Wakhtiyadii xukuumadihii hore maysan jirin sinaan astaamo qowmiyadeed, luqadeed, diineed iyo dhaqameed oo ka dhaxeeyay umadaha dalka.

Hase yeeshee, wakhtigan xaadirka ah ummadaha Itoobiya waxay heleen aqoonsi dastuuri ah. Waxaana hadda ka jira dalka nidaam dimuqraadiyadeed oo suura geliyay inuu ruux kasta/muwaadin kasta, leeyahay xuquuqda ah isticmaalka luqadiisa hooyo, iyo qaadashada diinta u rabo. Tanina waa mid bildhaaminaysa rajada wanaagsan ee mustaqbalka dalka iyo ummadaba.

Dhinaca kale, xiliyadii nidaamyadii hore ma jirin sinaansho ka dhexeeyay raga & haweenka dhinacyada fursadaha shaqo iyo dhaqaaleba. Balse, wakhtigan xaadirka ah raga & haweenka waxaa la siiyay xuquuqo iyo fursado siman oo dastuuri ah.

Dadka naafada ahi waxay leeyihiin xuquuq iyo xornimo kastoo la mid ah tan dadka kale leeyahay. Sidoo kale, dadka naafada ah waa dad karti shaqo, maskax iyo muruq leh sida dadka caadiga ah. Haddaba, dadkaas waa in lagu garab galo taageero iyo dhiiri galin gaar ah si loo dhiso dareenkooda & damiirkooda gaar ahaaneed.

### Ereyada furaha u ah cutubka 3aad

| | |
|---|---|
| maamul: | xubnaha maamulka ama wakiitada shacab ee goob ka jira |
| faaidada: | waxatar, gacan ka geysasho |
| door: | sficil, hadaf |

## Layliyada guud ee Cutubka 3[aad]

### I. Erayadan soo socda ku qor 'Run'ama 'Been'

1. Xurmaynta xuquuqda ismaamulitaan ee qaramada, qowmiyadaha & shucuubta, waa astaanta nidaamka dimuqraadiyada dhabta ah.
2. shucuubtu hadii ayna xataa si siman uga wada faa'idaysan horumarka, rabitaankoodu wuxuu yahay inay sii wada noolaadaan.
3. haweenka jamhuuriyada dimoqraadiga Federaalka Itoobiya waxay xuquuq uleeyihiin inay yeelan karaan hanti,gudbin karaan,islamarkaana dhaxli karaan.
4. Haddii aan la dhawrin xuquuqda sinaanta haweenka, waxay waxyeelo u leedahay dumarka oo kaliya.
5. hadii si buuxda loo dhawra xuquuqda naafada,waxaa meesha ka baxaysa sinaanta iyo wadaniyada.

### II. Isku aaddi erayada ku kala hoos xusan xarfaha 'B' iyo 'T' midba ta ku haboon.

| | B | T |
|---|---|---|
| 1. | Qaybsiga faa'iido iyo waajibaad | b) Ismaamul |
| 2. | Nacaybsho iyo kala fogaansho abuuranta. | t) la'aanta ka faaidaysi siman |
| 3. | Hogaanka ama Maamulka dad deegaan ku dhaqan. | j) Aas'aaska midnimada |

### III. Meelaha ban banaan ee soo oscda ku buuxiya eray ama weedh.

1. Nidaamkan Federaaliga ahi wuxuu ka kooban yahay __________ dawlad deegaan.
2. Faraqa & Midnimada bulsho ee qaramada, qowmiyadaha & shucuubta dalku waa ______________.

### IV. Su'aalaha soo socda ka dooro Jawaabta saxda.

1. Midka mid ah weedhahan soo socda, tee baan ahayn faa'iidooyinka laga helo, iskaa isku maamulitaankaa qowmiyadaha (aaya ka tashiga) ismaamul ee qowmiyadaha dalku
   b) xuquuqda aaya ka tashiga iyo dhisitaan xukuumad gaar ah.
   t) kala sareynta iyo hooseynta gumaysi iyo nacaybsho
   j) Go'aaminta wax kasta iyo si kasta oo waafaqsan rabitaankooda.

2. Mid ka mid ah dhibaatooyinka ka dhasha la'aanta xuquuqda sinaansho ee kawada faa'iidaysi
   - b) Saboolnimo & dib u hadhnimo
   - t) qalalaase & dagaalo
   - j) ragaadin horumar
   - x) Dhammaan.
3. Weedhahan soo socda teebaan sax ahayn?
   - b) dulqaadka & isfahanku faa'iido weyn ayay u leedahay sinaanta wada noolaansho ee shucuubta
   - t) dalka aysan ka jirin sinaan, wuu lahaan karaa nabadgelyo & horumar
   - j) haddii la rabo in la helo midnimo waarta, waxaa qasab ah in la dhawro xuquuqda sinaansho
   - x) waa inaysan jirin diin sareysa ama mid hooseysa.
4. Marka la eego xuquuqda dumarka, tee baa ah fikradaha khaldan?
   - b) Haweenayda xaaska leh iyo tan aan lahayn xaaska waxay leeyihiin xuquuq siman.
   - t) Haweenka dalku, waa qayb ka mid ah bulshada tira ahaan kala badh.
   - j) Sugida xuquuqda haweenka, ragu shaqo kuma laha.
   - x) Sugida xuquuqda haweenku, waa sugida xuquuqda bulshada.
5. Faa'iidooyinka ay leedahay dhawrista xuquuqda dadka naafada ah
   - b) Waxay sahashaa reebitaanka takoorka lagu sameeyo dadka naafada ah
   - t) Waxay sahashaa reebista dareenka dulsaarnimo iyo daryeelis
   - j) Sinaanta & dareenka dul jacaylnimo, waxay dadajiyaan hawlaha horumar.
   - x) Dhammaan.

## V. Su'aalaha soo socda Jawaabo koo-kooban ka bixiya.

1. Faah-faahiya xuquuqaha qaramada, qowmiyadaha iyo shucuubta ee lagu xusay Dastuurka J.D.F.I.
2. Sinaanshaha Jinsigu (lab/dhidig) maxay ka kooban tahay?
3. Maxaa adiga shaqsi ahaan kula gudboon sidii loo ilaalin lahaa xuquuqda dadka naafada ah, bulshada iyo xukuumadase?

CUTUBKA 4

# Cadaalada

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Dareemaan in ay waajib ku tahay arrimaha ama falalka caddaalad-darrada ah in ay la dagaalamaan
- Gartaan caddaalad-darrada dhibaatooyinka ka dhasha.
- Fahmaan farsamooyinka ama nidaamka waaxyaha caddaaladu u shaqeeyaan.

## 4.1 Takoor/Faquuqida

### 4.1.1 Siyaabaha loo tir-tiri karayo falalka takoorka/faquuqa

Sidee baa looga hortagi karaa nidaamyada shaqo ee ku dhisan eexda?

Beryahan dambe bulshada doox Barawaaqo waxaa la soo gudboonatay dhibaato ah dhul daaqsimeed aad u balaadhan ayaa nin maal qabeen ah la siiyay inuu mal gashado. Hadaba, buslhada doox-barwaaqo oo ah dhamaan xoolo-dhaqato waxay xoola hooda u soof geyn jireen dooxan, balse hada dhul-daaqsimeedka doox barwaaqo xayndaab/dayr balaadhan ayaa lagu soo wareejiyay, xoolana inay soo galaan lama ogola, markaas dooxan oo buslahda u ahaa isha-nololeed ee ay inta badan nolol ahaan ugu tirsanyihiin, isagoo dooxan ahaa mid 'gu' iyo ' jilaal' barwaaqaysan. Inkasta oo dhawr jeer oo hore cabasho gadhsiiyeen qaybaha cadaalada, hadana ilaa hadda wax ka dhegeysta maynan helin sidoo kale, waxay bulshadu ka walaacsantahay dayr kan sida sharci darada ah loo ootay

Ninkan maalqabeenka ah oo leh waxaan lacagtayda gelinayo waa dalkayga iyo dadkayga, sidaas awgeed, majirto cid ila hadli karta. Waxaana la sheegaa inuu ninkan maalqabeennka ah xidhiidh dhaw oo danna gaar ah kala dhexeeyo xubno cadaalada katirsan.

Mudane Abaadir: dhibaatadeena si kasta oon ugu gudbinay hay'adaha sharci/cadaaladeed ee goobtan, hadana maa naan helin wax xal ah;

Hadaan xataa waaxaha ka sareeya ee cadaaladeed, ugudbinana, uma malaynayo inaan wax xal ah kala kulmayno, wa daal iyo dhib uun waxaan la kulanaaba.

Mudane Geedi, sidaas maaha,waxaa haboon inag oo lacag is ka soo ururina, islamarkaana lacagtaas ku laalushna qaybaha sharciyaeed/cadaaldeed ee sare. Qof/ruux arintaas inoo fududeeyana waa inaynu soo raadsanaa.Hadii ay dhici waydo tannina waa inaynu iska fadhinaa aayar. Islamarkaana dhawrnaa uun waxa ka soo baxa,

## Cadaalada

Marwo Dhool: in kasta oo ay hadda inoo hirgalin, balse dhibaatooyinkeena aynu qabno, sidii aynu ugu gudbin lahayn hay adaha cadaaladeed ee sare ayaan hadda ku guda jiraa. Immika iyo haatana waa inaynu sii wadnaa inaan dacwadeena u gudbino hay'adaha cadaalada ee ka sii sareeya inago oonan ka daalin. Lacagta, wakhtiga iyo muruqa aynu dacwadan u hurayno, waa inaynu ka qooma mayn. Hadii aynu sidaa sameynana, tan iyo tu ka daran ayaa barri ka maalin inagu dhici doonta

Mudane Rooble: dhibaatada ina haysata ninkan maalqabeen ka ah aynu laftigiisa u soo bandhigno, kana dhaadhicino, wadahadalna la galo, laga yaabaa inuu fahmo walaaca aynu ka qabno arintan, ilayn damiir uun buu lee yahaye. Markaas kadib ayaynu talaabada xigta ee shaqsi ahaan ama koox ahaan qaadan doonaa

### Layliska 1

Idinka oo ka duulaya xalalka kala duwan ee ay bulshadu ka soo jeediyeen sidii loo xalin lahaa mushkilada dhuleed ka jawaaba su'aalaha halkan la soo taxay.

1. Waa tee tan aad isleedihiin waa sax? Sababtana sheega
2. Kuwa aan ahayn xalalka sax dase? Faahfaahin ka bixiya sababta ay sax unoqon waayeen
3. Waa xalalkee kuwa waxtarka u leh nabada, cadaalada, barwaaqada? Sabab?

Cadaaladu waa dheelitirnaan, haddii aynu si kooban u qeexno. Cadaaladu, kaalin muhiim ah ayay kaga jirtaa nidaamka dimuqraadiga ah markaynu fiirino, waayo waxay xaqiijisaa in loo dhaqmay si caadilnimo iyo inkale; Dalkeenuna, wuxuu leeyahay shuruuc/qawaaniin lagu hubiyo/ xaqiijiyo dhaqangalinta ama oofinta cadaalada. Ahdaafta sharciyadanina waa gacan ka geysashada in ay dawladu si xor/dheelitirnaan ah ula dhaqanto dadweynaha, marka ay timaado tuhun, dambiyo & falal lagu qaadayo dadka looga shikiyo arrimahaas si loo difaaco/ilaaliyo xuquuqaha muwaadiniinta.

Macnaha takoor/faquuqid waa kala soocida/kala saarida qaybaha bulshada sababo la xidhiidha xaga jinsiga, dhaqanka isirka, midabka, luqada, diinta IWM.

Dunidan aynu manta ku noolahay waa duni ay la dageen falalka foosha xun ee takoorku ama faquuqa qaar ka tirsan bulshada lagula kaco, sababo la xidhiidha aragtida uu aaminsan yahay, isirkiisa, midabkiisa, dhaqankiisa, ama luqadiisaba. Haddaba, falalkan cadaalad darada ah ee ka dhan ah xuquuqaha bani aadamka iyo tan dimuqraadigaba ah, waa in laga hortago islamarkaana la tirtiro ficiladan foosha-xun.

Sidaas awgeed, si loo tir-tiro ficiladan waa in lagu dhaqmaa qodobadan hoos ku qoran:

- Sharciga oo lagu shaqeeyo kaliya markaas, haddii sharciga uun laga duulo, waxaa meesha ka baxaya mad-madawgii (mubdi) hadhayn lahaa cadaalada. Sidaa daraadeed, haddii sharciga laga dhigto aas'aas, waxaa markaas laga bad-baadayaa cadaalad daradii iyo sharci daba markii la samayn

jiray. Waxaana la qabsanayaa dhabada toosan ee sharcigu ogol-yahay. Halkaasna, waxaa ku soo afjarmaya takoorkii/faquuqii loo geysan lahaa qayb ka tirsan bulshada.

Markaas haddii lagu dhaqmo qodobadaas, aynu kor ku soo sheegnay faah-faahintooda ee kala ahaa:

- Sharciga oo lagu –shaqeeyo kaliya
- Kalsooni iyo daacadnimo oo lagu shaqeeyo iyo
- Indha-mid ahaatay oo lagu fiiriyo/eego bulshada/dadweynaha.

Waxaa markaas la gaad hayaa in si cadaalad ah oo sharci lagu shaqeeyo, islamarkaana lagaga fogaado cadaalad darada iyo falalka ku tacaluqa.

### Layliska 2

1. Goobihiina ma ka jiraan falalka faquuqa/takoorku?
2. Bulshadeenu, Soomaalidu hab-dhaqan sidaynu uga hortegi karaa takoorka ama quudhsiga?

## 4.2 Cadaalad-Darada

### 4.2.1. Saamaynta xun ee ay cadaalad-darada ku leedahay dhismaha nidaamka dimuqraadi iyo horumarkaba

#### Qodabeeya dhibaatooyinka ay cadaalad-daradu dalka u horseedi karto;

Ficilada cadaalad-daro ee kajira Doox barwaaqo oo horseeday dhibatooyin bulsho iyo kuwo siyaasadeeba. Waxaana kamida sida: baadka (cawska) xoolaha, iyo baleyada biyaha ee ay xooluhu ka cabijireen. Arintaasina, waxay kaliftay xoolihi deegaanka loo ke xeeyay deegaano kale oo ay ka heli karaan baad iyo biyo. Sidaas awgeed, bulshada doox-barwaaqo, waxaa lasoo darsay mushkilad la xidhiidha wax soo saarkii xoolaha sida caanaha, subaga, hilibka iyo hargaha/ maqaarka/ xoolaha laga saaro oo gabaabsi ka noqday deegaanka doox baarwaaqo. Tanina, waxay sabbtay in qiimaha ascaartaas cirka isku shareerto. Dhibaatadanina waxay noqotay mid dhamaan taabatay bulshada Doox barwaaqo. Bulshaduna waxay ka walaacsan tahay nidaamka shaqo ee qaybaha cadaalada sida aynan cadaalad ugu shaqeynayn. Dadweynaha goobta ku noolina waxay yihiin kuwo ay ka sii yaraanayso aaminaadi ay kuqabeen hay'adaha dawliga ah ee goobta. Sida nidaamyadii dawladihi hore, ayay shacabku ku dhaw yihiin inay ka baaqsadaan qaadashada ama dhegeysiga fariimaha looga soo jeediyo dhinaca dawlada xurmaynta iyo u hogaansanaanta sharciga oo sii liciifaysa. Nabada iyo amniga goobtuna wuxuu noqday mid faraha kasii baxaya. Dadka qaar baa xataa ku dhiiranaya inay yidhaahdaan "sharci maadaama uunan jirin, waxaan u baahdo xoog ayaan ku soo dhacsanaynaa,

### Layliska 3

Ka jawaaba su'aalaha soo socda, idinka oo ka duulaya sheekadii la soo dhaafay.

1. Nidaamka cadaald-daro ee ka jiray tuulada doox-barwaaqo sheega dhibaatooyinka dhaqaale, buslaho iyo kuwa siyaasadeed ee uu horeedi karo.
2. Maxaa ay tahay inay sameeyaan dadweeynaha ku nool goobtu, hadii ay mushkiladooda xal u waayaan iyaka oo u gudbinaya hay'adaha sare ee sharci ilaalinta cabashadooda?

## Cadaalada

Cadaalad daradu waa marka la waayo xaq-saar/garsoor sharci oo caadil ah oo bulshada u dhexeeya. ama haddii aynu si kale u dhigno, cadaalad daradu waa marka bulshada ama muwaadiniinta dalka/deegaanka, lagula kaco faquuqid, kala-saarid ama kala soocid xuquuqeed & fursadeedba, iyadoo loo eegayo/fiirinayo dhinacyada midabka, qowmiyada, luqada, diinta, dhaqanka, jinsiga iyo aragtida u ruuxu aaminsan yahay. Sidoo kale, cadaalad daradu, waa xaalad la xidhiidha sharciyada oo laga talaabsado ku dhaqankooda. Islamarkaana, waxaa meesha ka baxda xuquuqdii ay dadku u lahaayeen inay helaan xukun-caadil ah ama damaanad-qaad sharci oo la isku halayn karo.

Sida lawada ogsoonyahay, cadaalad-daradu waxay fara-kulul ku haysaa wadamada soo koraya ee Dunida-sadexaad loo yaqaano. Inta badan, cadaalad-darada waxaa sabab u ah horumar la'aanta, Maamul-xumada iyo Aqoon-la'aanta, baahsan ee ka jirta dalalkaas soo koraya.

### Dhibaatooyinka ay horseedi karto cadaalad-daradu

Sida lawada garan karo, cadaaladu waa furaha dhismaha nidaamka-dimuqraadiyadeed iyo horumarka dalka. Haddii aanan la helin sinaansho xuquuqeed, maamul-suuban, sareyn-sharci, dimuqraadiyad iyo garsoor caadil ah, waxaa markaas ka dhalan kara arrimahaas cawaaqibyo aan la saadaalin Karin ayaa soo food-saara dalka & dadkaba guud ahaan.

Sidaa daraadeed, cadaalad xumadu waxay saamayn ba'an ku yeelataa hawlaha dhismaha nidaam dimuqraadiyadeed & horumarka laga wado/fulinayo dalka & deegaanada haddii aan la helin garsoor ama xaqsoor sharci oo cadaalad ku dhisan, marnaba laguma fikiri karo abuurista/dhisida hanaan dimuqraadi oo dalka/deegaanka ka curta. Waayo, cadaalad daradu waxay lid-ku tahay mabaadi'da aas'aasiga ah ee ay dimuqraadiyadu leedahay sida awooda & siyaasadda shacabka, sareynta sharciga, sinaanta, xuquuqaha Aadamaha & tan dimuqraadiyada, garsoorka-maxkamadaha IWM.

Si kastaba, ahaatee, cadaalad xumadu waxay caqabad ku tahay abuurista Maamulka suuban iyo hanaan dimuqraadiyadeed oo dalka laga hirgaliyo.

Sidoo kale, cadaalad xumadu waxay raad xun ku yeelan kartaa horumarka laga wado dalka guud ahaan. Waxay ummada ka hor istaagtaa gaadhsiinta adeegyada horumarineed ee bulshada sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha nadiifta ah, jidadka, isgaadhsiinta IWM.

Cadaalad-daradu waxay bulshada ka dhax abuurtaa farqi ama kala duwanaansho la xidhiidha dhinacyada dhaqaalaha, bulshada iyo siyaasadaba. Waxayna hormood ku noqotaa sinaan la'aanta xuquuqeed ee muwaadiniinta ka hor istaagtaa sidii ay waajibaadkooda shaqo u gudan lahaayeen. Waxayna ku abuurtaa muwaadinka dareen sinaansho la'aan oo isbadal xun ku keeni kara nabsada ruuxaas.

Guud ahaan cadaalad daradu waxay leedahay saamayn xun oo dalka u horseedi karta kala qaybsanaan bulsho, dhaqaale iyo mid siyaasadeed oo islamarkaana abuuri karta deganaansho la'aan siyaasadeed oo bur-burin kara amniga iyo kala dambaynta. Sidoo kale waxay dalka ka dhigtaa mid

sumcad xun ku yeesha indhaha caalamka. Waxaa kale oo ay cadaalad xumadu badanaa bulshada qaarkood kalsooni daro ay u qabaan xukumada dalka. Waxayna mija xaabisaa rajada & himilada bulshada ee ku aadan hawlaha horumarka & dimuqraadiyada dhismaheeda.

**Layliska 4**

1. Waa wakhtima marka la leeyahay cadaalad-daro ayaa jirta?
2. Ardayeey, Majiraan wax cadaalad-daro aad ku sheegi kartaan oo goobihiina ka jira, haday tahay xaafadaha (guryaha), ama iskuulada (dugsiyada)?
3. Cadaalad-darada maxaa ka mid noqon kara?

## 4.3 Xubnaha Cadaalada

### 4.3.1 Nidaamka shaqo ee xubnaha cadaalada



Jaantuska 4.1. Dhinaca Faafinta cadaalada waxaa door muhiim ah Maxkamadaha

- Muxuu noqonayaa nidaamka shaqo ee xubnaha cadaaladu?
- Nidaamka shaqo ee garsoorku waa inuu noqdo mid madax-banaan

Xubnaha ama hay'adaha cadaalada marka aynu leenahay, waxaa la sheegayaa qaybahan kala ah, garsoorka, xeer-ilaalinta, Afokaayada (lawyers), iyo Booliska sharci-ilaalinta ah. Kuwaasina waa kuwo ka shaqeeya sharci-ilaalinta bulshada.

Marka ruux/muwaadin loo geysto dulmi ama gafaf, ka dhan ah xuquuqdiisa shakhsiyadeed, waxaa la gudboon inuu cabashadiisa u gudbiyo hay'adaha/xubnaha cadaaladeed oo goobtiisa ka jira. Maxkamadu, waa mid ka mid ah qaybaha ugu muhiimsan ee xubnaha cadaaladu leeyihiin. Sidaas awgeed, ruuxa la dulmiyo marka u ashkatadiisa u gudbisto maxkamada, waxa u raadsanayo waa sidii dambiilaha sharciga loo hor keeni lahaa, isla markaana ganaaxa ku habboon loogu qaadi lahaa. Marka cadaalad la raadsanayo waa in la tagaa maxkamadaha. Faa'iidada cadaaladu leedahayna waxa ka mid ah dambiilaha ama dulmi wadaha oo sharciga hortiisa lagu ganaaxo, islamarkaana kan lagu xadgudbayna mugdhaw-sharci u helo.

Haddaba, hay'adahan cadaaladu maadaama oo ay bulshada u adeegayaan, islamarkaana ilaalinayaa shuruucda dalka, waxaa loo baahan yahay inay noqdaan kuwa ka madax-banaan faragelin kaga timaada qaybo kale ama hay'ado dawliya iyo kuwo aan dawli ahaynba. Waayo, haddii aysan noqon kuwo xor ah oo u madax-banaan waajibaadkooda shaqo ee la xidhiidha hawl-maalmeedkooda, waxay noqonayaan kuwo la duufsaday.

Halkaasna, waxaa meesha ka baxaysa rajadii laga qabay in la helo cadaalad waarta oo laga dhaqan-galiyo dalka guud ahaan. Xubnaha cadaaladuna waxay noqonayaan kuwo u adeega danaha ama shaqsiyaad gaara, oo aanan u adeegin bulsho-weynta.

### Geedi socodka shaqo ee garsoorku waa inuu ka reebanaado Eex

Waxaa kale oo xubnaha cadaalada looga baahan yahay inuu adeeg bixintooda shaqo noqon mid loogu adeego dad gaar ah. Balse u noqdo, mid adeeg bixintiisu ahaato mid caadil ah oo iskudheeli tiran, oonan lagu kala qoqobin, lagu kala soocin dadweynaha sababo la xidhiidha haybsi qabiil, diin, luqad, dhaqan, IWM. Waxaa kaliya oo hay'adahani ku shaqeyn karaan sharciga.

Sidaa awgeed, xubnaha hay'adaha cadaaladu waa inay noqdaan kuwo ka reeban/ka madax banana aragtiyaasha dhaqan, bulsho iyo tan siyaasadeed ee qaybaha/kooxaha kala duwan.

### 4.3.2 Xuquuqda in la helo garsoor-xaq ah

- Sidee loo helayaa xukun caadil ah?

Muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo xaqsoor (garsoor) maxkamadeed oo caadil ah sida ku cad Dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya, qodobkii 37aad.

Sidaas awgeed, muwaadin kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu helo garsoor iyo xukun caadil ah oo ku fadhiya damaanad-qaad sharciyeed.

Sidaa daraadeed, waxaa muwaadinka ama bulshada laga rabaa in loo guntado ama loo halgamo sidii loo heli lahaa garsoor-xukun oo caadil ah ama sax ah.

Bulsho ahaan wuxuu xil ka saran yahay siday u sugan lahayd xuquuqaheeda dastuuriga ah islamarkaana si looga hortago xaq-daro ama cadaalad-daro lagula kaco.

Sidoo kale, waxaa waajib inagu ah in aan xuquuqdeena si sifo sharci ah ugula soo noqono, marka lagu xadgudbo, ama la jabiyo sharciyada garsoor ama kuwa cadaaladeedba. Haddaba, marka loo wada halgamo sidii garsoor ama xukun-caadil ah loo heli lahaa, islamarkaana sharciga lagu difaacdo xuquuqda-dastuuriga ah, waxaa la gaadhi karayaa bislaansho ay bulshadu yeelato, oo ay daneheeda ku sugato.

### Layliska 5

1. Maxay tahay madax banaanida garsoorka marka la leeyahay?
2. Ardayeey, si koox-koox ah uga wada hadla, faragelinta hawlaha maxkamada kaga imaan karta dibada iyo dhaliilaha ay yeelan karto?
3. Cadaalad-darada waxyaabaha sobobi kara maxaa ka mid ah?

## 4.4 Adeegyada-Bulshada

### 4.4.1 Muhiimada Adeegyada Bulshada

- Adeegyada-bulsho adeeg nooce ah ayay bixiyaan?

Adeegyada bulshadu waa arrimo/waxyaabo lagama maar-maan u ah nolosha-ruuxa bani aadamka ah. Ama haddii aynu si kale u dhigno, jiritaanka-nololeed ee bani aadamku waa mid ku xidhan adeega aas'aasiga ah ee arrimaha bulshada. Adeegyada bulshada, waxaa ka mid ah waxbarashada, caafimaadka, biyaha nadiifta ah, isgaadhsiinta, jidadka iyo kaabayaasha kale dhaqaale.

Sida laga yaabo inaad horay u soo barateen, adeegyada bulshadu faa'iido weyn ayay u leeyihiin

guud ahaan nolosha iyo jiritaanka bani aadamka. Waayo, haddii aysan jirin adeegyo caafimaad, waxbarasho & biyo la cabo, laguma dhiiran karo in la yidhaahdo la'aantood waa la noolaan karaa. Adeegyada bulshadu waa arimaha saldhiga u ah jiritaanka & nolosha ruuxa bani aadamka ah.

Sidaa daraadeed, faa'iido balaadhan oo aan la qiyaasi Karin ayay bulshada u leeyihiin waayo nolosha dadka ayaaba ku xidhan arrimahaas, iyaga ah.

### 4.4.2 Faa'iidada ay leedahay adeeg bixinta aan kala sooca lahayn (takoorka)

- Adeegyada bulsho ee laga helo agagaarkiinu may ka madax banana yihiin Eexda?

Adeegyada bulsho oo dhammaan dadka ama bulshada si siman oo aan kala soocid lahayn loo gaadhsiiyo faa'iido weyn ayay u leedahay dalka & dadkiisaba. Marka si isku-dheeli tiran adeegyada horumarineed ee aas'aasiga ah la gaadhsiiyo dhammaan muwaadiniinta deegaanada kala duwan ee dalka ku nool, waxaa la gaadhayaa sinaan, cadaalad, dimuqraadiyad iyo deganaansho nabadeed oo la isku halayn karo oo dalka ka dhalata.

Waxaa kalae oo abuurmaya dareen wadaninimo, isjacayl, wada noolaansho, iyo iskaashi ka dhexeeya bulshada qaybeheeda kala duwan. Arrintana, waxay gacan weyn ka geysataa abuurista jawi midnimo & dhismaha dimuqraadiyad adag oo dhidibada loo taago kadibna noqota mid waarta.

### 4.4.3 Kaalinta dawlada iyo shacabka kaga aaddan gaadhsiinta (bixinta) Adeegyada-Bulshada

- Muxuu yahay doorka kaga aadan dawlada iyo shacabka hawlaha adeeg bixinta bulsho?

Dawlada & dadweynahaba waajibaad muqadas ah ayaa ka saran sidii ay bulshada u gaadhsiin lahaayeen adeegyada bulsho ee aas'aasiga ah.

Dawlada (xukuumada) gaar ahaan waxaa saran waajibaad sharci oo ay tahay inay oofiso ama fuliso. Waayo, xukuumadu iyada ayaa maamusha dhaqaalaha & khayraadka dalka. Sidoo kale, iyada ayaa ah cida soo rogta canshuur & dakhli ururisba.

Sidaas awgeed, waxay ku qasban tahay inay bixiso adeegyada bulshada sida caafimaadka, waxbarashada, isgaadhsiinta, jidadka, biyaha la cabo ee nadiifta ah IWM. Islamarkaana, waa in ay xukuumadu si siman oo caadil ah u gaadhsiisaa adeegyadaas, dhammaan shucuubta Deegaanada kala duwan ku nool miyi & magaalaba ha ahaatee.

Dhinaca kale, waxaa bulshada rayidka ah saran waajibaadkaas mid la mid ah. Waxaa bulshada, gaar ahaan shaqsiyaadka ama shirkadaha Maal-qabeenka ah ee ku dhaqan dalka iyo deegaanadaba, masuuliyad ka saran tahay caawimaada ama taakuleynta bulshadooda, dhinacyada adeegyada aas'aasiga ah ee horumarineed. Waayo shirkadaha & maalqabeenaduba, waxay u dhasheen isla bulshada, waxayna ka ganacsadaan bulshada-dhexdeeda, isla bulshada ayay maalqabeeno ku noqdeen.

Haddaba, adeeg bixintu ma aha mid xxukuumad, ama shaqsi kaliya ku kooban, balse, waa mid loo siman yahay ka qayb-qaadashada adeeg fidinta (bixinta) arrimaha bulshada.

**Shaqo kooxeed**

Idinka oo ukuurgalaya adeegyada bulsho ee goobihiina warbixin kasoo diyaariya qodobadan:

B. Xarumaha adeeg ee muhiimka ah.
T. Xubnaha shaqada ka qaybqadanaya.
J. Wax-qabadkooda shaqo.

## 4.5 Canshuurta

- Waxtarka cashuurtu u leedahay koboca dhaqaalaha dalku maxay tahay?

### Doorka ay canshuurtu ku leedahay kobaca iyo balaadhinta Maalgalinta

Sida lawada ogyahay canshuurta laga qaado badeecooyinka & tan Mushaarka waa hal-bawlaha dhaqaalaha dalka. Waayo, canshuurtu waa tan lagu kabo adeegyada bulsho ee aas'aasiga ah sida waxbarashada, caafimaadka, biyaha, jidadka, isgaadhsiinta IWM.

Sidoo kale, canshuurtu kaalin wayn ayay ku leedahay kobcinta & balaadhinta maalgashiga dalka. Canshuurta maalgaashigu dakhli badan ayaa laga helaa.

Dakhligaas laga helana waxaa loo adeegsadaa horumarinta dalka. Sidaas awgeed, balaadhinta iyo kobcinta maalgalinta dalku waxay soo hoysaa dakhli adag oo loo adeegsado kaabayaasha horumarinta dhaqaalaha bulshada.

Kaalinta Canshuurtu ay ku leedahay isku-dheeli-tirka kobaca Deegaanada.

Xukuumadaha Deegaanadu waxay xaq u leeyihiin inay canshuur soo rogaan iyo waliba dakhli ururintaba. Deegaanadu waxay leeyihiin awoodo siman oo isku dheeli tiran.

Xukuumad kasta Deegaanka ay Maamusho iyadaa u awood leh inay canshuur saarto islamarkaana dakhli ururin samayso.

Ilaha-dhaqaale ee ugu muhiimsan dawladu waxay ka heshaa dakhliga canshuurta ka soo gala. Gunooyinkaas & bulshada ayuun baa loogu adeegaa. Dhinaca kale, dawlada wuxuu xil ka saran yahay kor u qaadida nolosha dadweynaha, nabadgelyada & horumarka bulshada guud ahaan.

Haddaba, si ay u fuliso arrimahaas, bulshadana waxaa laga rabaa inay canshuurta wakhtigeeda bixiso, si loogu adeego kaabayaasha dhaqaale ee bulshada sida waxbarashada, Caafimaadka, biyaha, isgaadhsiinta, jidadka IWM.

Haddaba, xukuumada dhexee Federaaliga ah wuxuu xil ka saran yahay inay abuurto jawi habboon oo ay Deegaanadu si siman uga wada faa'iidaysan karaan kobacyada dhaqaale & dakhli ururinta canshuuraha laga qaado ganacsiga, warshadaha, beeraha, xoolaha nool, shirkadaha, mushaarooyinka IWM.

### Noocyada Dakhliyada Canshuuraha ee Xukuumada Dhexe iyo kuwa Deegaanada

Noocyada dakhli ee canshuuraha ay xukuumadaha deegaanadu iyo ta federaalku qaadaan, waxaa ka mid ah kuwan hoos ku xusan:
Haddaba, noocyadan kor lagu soo sheegay aynu sharciga Itoobiya dhigayaa in lagu soo rogi ama laga qaadi karo canshuur.

| Ilaha-dakhli ee dawlada Federaalka/ qodabka-96/ | Ilaha-Dakhliga ee Deegaanada /qodabka 97) | Ilaha-dakhli ee ay wadaagaan dawlada Federaalka & Deegaanada /qodobka – 98/ |
|---|---|---|
| • Canshuuraha lagu soo rogo Alaabaha dalka ka baxaya iyo kuwa soo galaya<br>• Canshuuraha laga soo ururiyo shaqaalaha dawlada Federaalka iyo kuwa hay'adaha caalamiga ah<br>• Dakhliga laga helo hay'adaha dawaliga ah ee ay mulkiyadooda leedahay dawlada Federaalka, iyo tan macashal-macaashka, canshuurta dheeraadka tan loo yaqaano 'Eksays-ka'<br>• Canshuurta laga soo ururiyo bakhtiyaa-nasiibka/lootariga/ qaranka iyo kuwa kaleba<br>• Canshuurta lago soo ururiyo gaadiidka cirka, Tareenka, iwm | • Canshuurta laga soo ururiyo shaqaalaha dawlada Deegaanka u shaqeeya<br>• Tan laga soo ururiyo isticmaalka dhulka<br>• Tan laga soo ururiyo shaqsiyaadka ganacsatada ah ee deegaanka<br>• Tan lagasoo ururuiyo mulkiilayaasha guryaha iyo hantida kale ee gaarka loo leeyahay<br>• Tan laga soo ururiyo hay'adaha horumarineed ee maamulka deegaanka hoos yimaada<br>• Shatiyada laga bixiyo qaybaha kaladuwan ee ismaamulka deegaanka canshuurtaha laga soo ururiyo. | • Canshuuraha laga soo ururiyo hay'adaha horumarineed ee ay sida wadajirka ah u aas'aasaan dawlada Federaalka iyo kuwa Deegaanadu.<br>• Canshuuraha laga soo ururiyo macaashul-macashka shirkadaha ganacsi ee gaarka ah iyo kuwa saamiyada<br>• Waxay si wadajir ah usoo rogaan islana ururiyaan canshuurta Rayalty-ga iyo canshuurta dakhliga laga helo hawlaha macdan baadhista iyo gaaska ee waaweyn |

## Shaqo kooxeed

Idinka oo booqasho kutagaya xafiisyada qaabilsan soo ururinta cansuurta, islamrkaana waydiinaya hawl-wadeenada xafiisyada ku shaqada leh

B. noocyada canshuuraha muhiimka ah iyo siyaabaha loo soo ururiyo

T. dhibaatooyinka lagala kulmi karo soo ururinta canshuuraha,

J. canshuurta la soo ururiyo iyo waxyaabaha lagu qabto/fuliyo, ka soo diyaariya warbixin.

## Gunaanadka Cutubka 4aad

Dhibaatooyinka halista ah ee dal halis gelin kara waxaa kamida ah nidaamka shaqo ee ku dhisan eexda/qaraabaysiga.Eexdu waxay horseedaa dhibaatooyin kala duwan,tusaale waxay xagal daacisaa dhismaha nidaamka dimuqraadiyada,muwaadiniintana waxay ka hor istaagtaa inay masuuliyadahooda ugutaan si ay xilkasnimo ku dheehantay.Sidaas awgeed,waxaa haboon inay cid kasta hanoqoqdo masuul ama shacab ee waa in lala halgamaa ficilada ku dhisan eexda,islamarkaana loo hogaaansamaa sharciga,la dhawraa sharciga,lana difaaco sharciga.Sidoo kale waa in lagu shaqeeyaa daacadnimo iyo aaminaad.hay'adaha ka shaqeeya cadaalada sida maxkamaduhu waa inay kamadax banaanaadaan saameyn kasta islamarkaana la dhawro madaxbanaanidooda garsoor,go'aanadooduna waa inay noqdaan kuwa ka badqaba ficilada ku dhisan qaraabaysiga balse waafaqsan sharciga.Sidoo kale bulshadu waxay qayb libaax kuleedahay la dagaalanka kalasooca ku dhisan haybsiga,adeeg fidinta bulshada iyo wax kasta oo la xidhiidha cadaalad-darada.Cashuurtu waxay saameyn weyn kuleedahay fidinta hawlaha maalgelinta iyo isku-dheelitirka horumarka deegaanada.Sidaas daraadeed,waxaa dawlada federaalka looga fadhiyaa inay dakhliga la soo ururiyo deegaanada ugu qaybisaa si waafaqsan cadaalada.

### Ereyada furaha u ah cutubka 4aad

| | |
|---|---|
| Cashuur: | nooc kasta oo dakhli oo ay dawladu soo ururiso |
| Cashuurta dulsaar: | dakhliga dhaqdhaqaaqyada ganacsiyada qarkood laga helo iyadoo boqolkiiba shan iyo tobon (15%) dheeri ah loo shubo dawlada |
| Cashuur ururin: | dakhliga laga soo xereeyo dhaqdhaqaaqyada kala gudbinta iyo is waydaarsiga ganasiyada kala duwan |

## Cadaalada

### Laylikska Guud ee Cutubka 4aad

I. Weedhahan soo socda ku qor 'Run' ta saxda ah, ta aan saxda ahayna ku qor 'Been'

1. Falaka iriqaysiga (eexda) ah lama tirtiri karo, in lala dagaalamo mooyee.
2. Mar marka qaarkood waxaa loo baahanyahay in xoog la isticmaalo si loo tir-tiro ficilada ku dhisan eexda iyo wax la halmaala
3. Cadaalad-darada mararka qaarkood la geysto, waxay gacan ka geysataa xoojinta dimuqraadiyada iyo horumarka.
4. Ka qaybgalka bulshada ee ku aaddan hawlaha fidinta adeegyada bulsho, waxaa loo baahanyahay oo kaliya marka ay dawladu u taag weydo.
5. Canshuurtu waxay wax ka tartaa isku soo dhawaynta kobaca dhaqaale ee deegaanada

II. Isku aadiya weedhaha ku kala hoos qaran xarfaha 'B' iyo 'T'

| B | T |
|---|---|
| 1. canshuuraha ay dawlada Federaalka iyo kuwa deegaanadu sida wadjir ka ah u soo ururiyaan | b. dugsiga |
| 2. badhitaarka iskudheelitirka kobac ee deegaanada | t. dakhliga wadajirka ah |
| 3. talaabooyinka muwaadiniinta looga baahanyahay in ay ku dhaqaaqaan si loo tirtiro ficilada ku dhisan qaraabyasiga | j. dhawrista sharciga |
| 4. hay'adaha bulsho. | x. isku dheelitirka canshuur qaybinta |
| 5. waa mid loo baahanyahay inay ka madax-banaanaato saameynta cid kasta. | kh. Maxkamada |

III. Kadooro jawaabta saxda ah, kuwan soo socda

1. Midka mida kuwan soo socda maaha siyaabaha loo tir-tiri karo ficilada qaraabaysiga/kala sooca ku dhisan

   b) sharciga oo la adeegsado

   t) xadgudbyada la geysto oo aamusnaan la iskaga dhaafo

   j) dacwad lagu oogo

   x) b, iyo t, ayaa jawaabaha saxda ah

2. Jidka loo baahanyahay inay raacaan xubnaha/qaybaha cadaalada qaabilsani
   b) danahooga gaar iyo damiirkooda
   t) mabaadii'
   j) qaraabaysiga oo laga reebanaado
   x) dhamaan
3. Kumaa looga baahanayahay in uu dabagalo/ lasocdo ficilada eexda/cadaalad-darada ku dhisan?
   b) dawlada
   t) ururada diimaha
   j) ururada bulshada rayidka
   x) ururada/hay'daha
4. Ururada buslahdu
   b) waxay muhiim u yihiin mujtamaca
   t) waa inay ka reebanaadaan ficilada qaraabaysiga/eexda ah
   j) waa kuwo ay soo dhistay dawladu
   x) b, iyo t, ayaa jawaabaha saxda ah
5. Teebaan ahayn, cawaaqibka ka dhasha ficilada qaraabaysiga?
   b) ka go'naan hooseysa
   t) ku dhaqanka hooseeya ee dimuqraadiga
   j) kor uqaadista cadaalada
   x) dhamaan

## IV. Meelaha banaan ee soo socda ku buuxiya erayada ku haboon

1. Qaab-dhismeedka dawlada Federaalka canshuuraha waxaa kala qaada _______ iyo ______
2. Mabaadii'da aasaasiga ah ee ay maxkamadu ku shaqeyso waa __________ iyo _________
3. Muwaadiniintu markay ku qanci waayaan go'aanka ay rido maxkamad heerarka hoose ah, islamarkaana cabashada loo gudbisto heerarka maxkamadeed ee ka sareeya waxaa la yidhaahaa ____________

## V. Kuwan soo socda ka bixiya jawaaba koo kooban

1. Falanqeeya qodobka ku saabsan dhibaatooyinka ka dhalan kara cadaalad-darada
2. Sheega waxtarka ay canshuurtu u leedahay horumarka dalka iyo isku dheelitirka kobaca deegaanada

CUTUBKA 5

# Wadanniyada

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay

- Dareemaan faa'iidada ay leedahay in la ogaado taariikhda qoomiyadaha, shucuubta iyo bulshooyinka.
- Gartaan hantida danta guud dadka kawada dhaxaysa ee lagu adeegto sababta loogu baahday in si taxadar leh loo ilaaliyo ama dhawro.
- Fahmaan in ay muhiim tahay in saboolnimada iyo dib u dhacnimada lala dagaalamo.
- Xuquuqda muwaadiniinta la daryeelo dareenka wadaniyada in ay kobciso.
- Fahmaan calanka qaranka iyo heesta qaranku kaalinta ay ka qaataan wadaniyada in uu kobco ama weynaado.

## 5.1 Barashada taariikhda & dhaqanka habboon ee qaramada, qowmiyadaha & shucuubta dalku, faa'iidada ay u leedahay kor u qaadista wadanniyada cusub

- Waa maxay faa'iidooyinka laga helayo (ay leedahay) barashada taariikhda & dhaqanka qaramada, qowmiyadaha & shucuubta dalku?

Itoobiya waa dal ay ku noolyihiin quruumo, qowmiyaad, iyo shucuub kala duduwan oo islamarkaana leh dhaqamo iyo luqado kala gadisan. Sidaas awgeed, qorayaasha shisheeye qaarkood ayaa waxay itoobiya ku tilmaamaan inay tahay goob "bandhig-qowmiyadeed", ama masrax, "Muyusiyeem-qowmiyadeed", lagu sheegi karo.

Sharafta qaranimada & madax banaanida dalkan itoobiyana waa mid ay naftooda iyo dhiigooda qaaliga ah u soo hureen dhammaan qowmiyadaha ka jira dalka.

Haddaba, waxaa dhacda mararka qaarkood in taariikh-qorayaasha shisheeye iyo kuwa dalkuba ay taariikhdaas weyn ee ka dhaxeysa ummadaha dalka Itoobiya, si khaldan wax uga qoraan ama si aanan isku dheeli-tirnayn.

Dhaqamadaas qowmiyadahana wax mudnaan ah lama siin mudooyin badan.

Laakiin, wakhtigan xaadirka ah waxaa dalka ka jira nidaam-dimuqraadiyadeed oo suurta galiyay in dhaqamada qowmiyadaha kaladuwan la siiyo mudnaan (fiiro) gaar ah, oo siku-dheelitiran. Sidoo kalana, waxaa xurmayn siman la siiyay dhammaan dhaqamada qowmiyadaha dalka kuwada nool, islamarkaana waxaa si siman

qoraal loogu sameeyaa taariikhda qowmiyadaha & dhaqamadooda kala duwan.

Haddii dhabadaa (wadadaa) lagu sii socdana, muwaadin kasta, waxaa ku abuurmi doona dareen cusub oo wadan jacaylnimo. Barashada & darsida haboon ee qowmiyadaha & dhaqamada ay leeyihiin, waxay gacan ka geysan doontaa (xoojinta) dal-jacayl, ama qaran jacaylnimo.

Marka la helo jiil (fac) ay ku dheehan tahay dareen qaran-jacaylna, waxaa la sugi karaa sharafta qaranimo ee dalka. Sidoo kalana, waxay meesha ka saarayaan taariikhda xun ee faqrinimada la xidhiidha ee dalkan Itoobiya lagu bartay.

## Layliska 1

Su'aalahan soo socda ardayeey ka shaqeeya.

1. Ku guuriya buugaagtiina shaxdan soo socota ee ku saabsan qowmiyadaha ku dhaqan dalka qaarkood; kadibna idinka oo ka tixraacaya tusaalaha lagu siiyay, buuxiya meelaha banana ee kale.

| Tira tax | Magaca-qowmiyada | Luqada ay ku hadasho | Deegaanka ay ku dhaqan tahay |
|---|---|---|---|
| 1. | Sidaamo | Af-sidaamo | D/D/Sh/ koonfureed |
| 2. | | | |
| 3. | | | |
| 4. | | | |
| 5. | | | |

2. Si loo dhawro dheeli-tirnaanta taariikheed ee dhaqamada & luqadaha, qowmiyadaha dalka, maxay tahay kaalinta (doorka) kaga aaddan muwaadin kasta?
3. Waa maxay kaalinta aad idinku ku leedihiin, xoojinta dareenka wadani-yadeed?
4. Maxay yihiin dhibaatooyinka aad isleedihiin waxaa lagu tir-tiri karaa oo kaliya dareen wadaninimo ama dareen wadan jacayl? Sheega kuwaas!

## 5.2 Dhawrista (xurmaynta) sinaanta qaramada, qowmiyadaha & shucuubtu, waxtarka ay u leedahay dhismaha wadanniyada



Jaantuska 5.1. Sinaanta Shucuubta

Wakhtigii nidaamyadii hore taariikhda iyo dhaqamada, qaramada, qowmiyadaha & shucuubta dalkani Itoobiya, wax tixgalin ama mudnaan ah oo lasiin jiray ma jirto.

Sidoo kale nidaamka siyaasadeed, dhaqaale & kan bulshaba wuxu ahaa mid ay la dageen cadaalad-daro, iyo gumaysi. Iyada oo ay sidaas ahayd, hadana dadweynaha iyaga oo isku duuban ayay u jilib-dhigeen weeraradii isticmaar ee doonayay inay qaranimada & madaxbanaanida dalka jabiyaan, islamarkaana gumeystaan.

Wakhtigan xaadirka ah qowmiyadaha dalku, waxay heleen aqoonsi ay iskood iskugu Maamuli karaan. Waxaa kale oo loo sugay xuquuqda ah in ay kobcin karaan dhaqamadooda, islamarkaana adeegsan karaan luqadahooga gaar ahaaneed.

Haddaba, maadaama oo ay hada haystaan fursad sinaansho oo ay kaga wada faa'iidaysan karayaan nabadgelyada, horumarka iyo dimuqraadiyada si isku mid ah, ayay hada balan ku galeen inay wada dhistaan bulsho leh dhaqaale & siyaasad saldhig adag yeelata oo isku kalsoon iyadu.

Sidaa daraadeed, si loo sii wado ka midha dhalinta dimuqraadiyada, muwaadin kasta waxaa saran waajibaad iyo masuuliyad u gaar ah sidii arrintaas loo fulin lahaa.

Marka la sugo sinaanshaha-xuquuqeed ee qaramada, qowmiyadaha & shucuubta dalka, waxaa abuurmaysa jacayl qoto-dheer, oo ay dalkooda u hayaan muwaadiniintu.

Muwaadinka markay dal-jacaylnimadu ku weynaato (xoogaysato), wuxuu u hawl-gali doonaa sidii loo tir-tiri lahaa ama loo badali lahaa taariikhda xun ama aragtida xun ee dalka laga haysto ee ah gaajada/faqriga, dagaalada iyo deganaansho la'aanta indhaha caalamka hadhaysay.

Haddaba, si looga midha dhaliyo aragtida & himilooyinka la tiigsanayo la xidhiidha hawlaha dalka laga wado sida horumarka, dimuqraadiyada, Maamulka suuban iyo abuurista (aslixinta) nabadgelyo waarta, waa in qowmiyaduhuna door weyn ay ka ciyaaraan arrintaas iyada ah sidii loo gaadhi lahaa natiijadeeda.

**Layliska 2**

Su'aalahan soo socda ardayeey kawada xaajooda.

1. Miyaa laga hadli karaa dal-jacayl iyada oon la dhawrin xuquuqda qowmiyadaha? Waayo?
2. Horumarka dalkeenu waa mid ku xidhan hadba sida loo xurmeeyo xaqa & xuquuqaha ummadaha/qowmiyadaha, waayo?

## 5.3 Dhibaatooyinka/Waxyeelada ay dalka u horseedi karto xafidaad la'aanta qalabyada Adeega guud



Jaantuska 5.2. Xafidaad la'aanta hantida guud

- Sawirkaas kore maxaa idiinka soo baxay.
- Dhibaatada aad ka fahanteen sawirkaas, xalkeedu muxuu yahay?

### Dab iyo Biyo

Waxaa jiray Dab iyo Biyo inay si wadajir ah u soo gateen dibi iyo qalabka beera falashada iyaga oo iskaashanaya labadoodu. Hadaba, waxaa dhacday maalin maalmaha ka mida in ay tuugo ka xado dibigoodi ay wada lahayeen Dab iyo Biyo

## Wadanniyada

Dhacdadanina wxay ka xanaajisay ninkii Dab. Wuxuuna yidhi isaga oo lahadlaya ninkii "Mudane Biyo, waan ka xumahay in la xado dibigii hantida aynu wada lahayn. Markaas si aan cadawgeena usga aar gudano, waxaan go'aansaday anigu inaan dab qabad siiyo dhamaan kaynta cawska, guryaha iyo dibiga iyo tuugtaba" ayaa u sheegay mudane Biyo isaga oo la socodsiinaya dareenkiisa.

Biyihiina isagoo la hadlaya mudane Dab, wuxuu ku yidhii "Walaal Dabow maxaad sidan ugu fikirtay? Agaa!" miyay kula haboontahay inaad wada gubto daka wax xaday iyo kuwa wanaagsan ee bulshada ka tirsan? Mida kale, wax yaabahan kale ee degaanka dabiiciga ee iyagna aad tidhi dab ayaan sudhayaa ma kula haboontahay? Miyayna ahayn kuwa buslhada ka dhexeeya oo lawada manaafacaadsado? Tuuga waxaynu ku soo heli xeelada kale inaga oo isticmaalayna.

Ma ogtahay in uu tuugu adiga ku soo mari doono, marka u damco inuu cunto karsado? Mase ogtahay inuu anigana isoo mari doono, marka uu u baahdo inuu dhaqdo/xalo/ dharka iyo weelasha. Markaas ayaynu qabandoona si aan sharciga u horgeyno tuugtaas. Xeeladahaas ayaynu ku soo qabanaynaa balse looma baahnaa in aan isticmaalo habab khatar gelinaya hantida danta guud. Markaas sidaas ayuu Dabkii ku dejiyay. Hadaba, runtii iyada oo laga joogo wakhti kooban, markii ay Dab iyo Biyo arnitaas kawada hadlayeen, ayay isla tuugtii dibiga xadday u yimaadeen iyagoo raadsanaya dab ay ku soshaan hilibka iyo Biyo ay iskaga dhaqaan caloosha/uuska dibigii ay qasheen. Halkaasay raggii Dab iyo Biyo iyaga oo isku-iljebinaya, islamarkaana hubinaya inay yihiin kuwii tuugta ahaa ee xadday dibigoodii ku qabteea tuugtii. Waxayna horgeyeen sharciga.

Halkaasuuna ninkii Dab isaga oo u bogaya fikirkii uu mudane Biyo soo jeediyay ee lagu qabqabtay xatooyadi dibiga, islamrakaana qiraya inuu khalad ahaa go'aanki hore ee uu isagu qaatay sidii loo soo qaban lahaa tugtaas.

Markaas looma baahnaa cadho shaqsiyadeed oo maamulka dawliga ahna lagu nacayo, islamarkaana la qaado talaabooyin dadka u horseedi kara waxyeelo iyadoo la adeegsanayo xoog, xumaan iyo cid ku xumayn. Arimahaasina, wax uun bay sii murgin karaan.

Waxaa loo baahanyahay inuu muwaadin kasta ka hortago shirqoolada loo maleegayo dalka. Muwaadinka wanaagsani waa kan ka fikira amniga dalka iyo shacabka, islamarkaana ka hortaga ama la dagaalama falalka lidka ku ah horumarka dalka.

### Layliska 3

Ka jawaaba su'aalaha soo socda

1. Maxay ahayd fariinta sheekadaasi xambaar sanayd ee ugu muhiim sanayd?
2. Qas-qasaadu waxay murgiso mooyee, nabad ma keento, marka la leeyaay maxaa loola jeedaa?
3. Maxaa loo leeyahay muwadin kasta waxaa ka saran masuuliyad sidii uu uga hortagi lahaa falalka shirqool ee ka dhanka ah dalka?

Hantida guud ee dawlada & shacabka ka dhaxeysa waxaa ka mid ah sida buundooyinka, kaabadaha, Jidadka, Xarumaha korontada laga dhasho, laydhasha-wadooyinka, dhuumaha (qasabadaha) biyaha iyo telefoonada dadweynaha. Hantidanina ma aha mid shaqsi leeyahay, balse waa mid kawada dhaxeysa dhammaan muwaadiniinta dalka.

Waxaana lagu dhisay lacag (maal) laga soo ururiyay dadweynaha. Isla dadweynaha ayaa ah kuwa ka faa'iidaysanaya adeegyadaas guud.

Sidaas awgeed, waxaa loo baahan yahay in u muwaadin kasta xil iska saaro xafidaada adeegyadan guud ee ummada, islamarkaana u ogaado inay yihiin hanti ummada ka dhaxeysa, oo ay iyadu leedahay. Xafidaad la'aanta hantida dawlada & shacabka, waxay dhibaato ama waxyeelo u geysataa muwaadin kasta oo bulshada ka mid ah. Haddaba, adeegyadani maadaama oo ay yihiin hanti umada kawada dhaxaysa waxaa loo baahan yahay in aan lagu tagrifalin, la lunsanin, ama la xadin. Waana in lawada ilaaliya hantida guud ee ummada/bulshada. Matalan, haddii uu ruux arko iyadoo shaqsiyaad yari ay jajabinayaan, burburinayaan, xadayaan, ama ay israaf ku sameynayaan hantidii ummada, waa in u ka dhiidhiyaa falalkaas oo kale, islamarkaana ka hor istaagaa kuwa burburka iyo xatooyada u geysanaya qalabka, adeega ama hantida ummada. Sidoo kale, waa in loo sheego qaybaha cadaalada ama hay'adaha sharciyada qaabilsan si looga qabto dambiilayaasha wax yeelada u geysanaya hantida dadweynaha, sharcigana la horkeeno.

## Layliska 4

1. Maxaa loo jeedaa marka la leeyahay qalabyada adeega guud waa hantida ummada?
2. Miyaan ka reebanaan karaa in aan waxba la inaga waydiinin, inaga oo arkayna iyadoo la burburinayo ama lagu tagrifalayo hantida shacabka ee adeegyada guud?
3. Sheega qaar ka mid ah qalabyada hantida (adeega) guud ee shacabka ee ka jirta goobihiina, sidoo kalena faah-faahiya siyaabaha si habboon loogu xafidi karo.

## 5.4 Falalka foosha xun ee halis ku noqon kara nabadgelyada & Amniga dadweynaha

### 5.4.1 Dadaalada in la muujiyo ay tahay si looga hortago ficilada (falalka) xun-xun ee halista ku noqon kara nabada & amniga shacabka

Waxaa jira talaabooyin ama ficilo xun-xun oo halis galin kara nabadgelyada & amniga dadweynaha, islamarkaana la filan karo wakhti kasta. Matalan, ficiladaas xun-xun waxaa ka mid ah sida dadweynaha oo nacaybsho laga dhax-abuuro, qowmiyadaha dalka kuwada noo loo la iska horkeeno, goobaha & gaadiidka dadweynaha oo qarxin iyo burburin loo geysto/lagula kaco, iyada oo la fulinayo siyaasaad ujeeddo maan-gaabnimo leh, geedisocodka baris-barashada oo la carqaladeeyo xasiloonideeda, IWM.

Falalkaas ama ficiladaas foosha xun lihina khasaare mooye wax faa'iido ah oo ay dadweynaha u keenayaan ma jirto.

Sidaas darteed, waxaa muwaadinka wanaagsan looga fadhiyaa inuu ogaado islamarkaana ka hortago ficil kasta oo halis gelin kara amaanka guud ee dadweynaha; anshaxa & masuuliyadu waa astaamaha lagu yaqaano muwaadinka suuban.

Waxyeelada ama dhibaatada ay falalka/ficilada xun-xuni u keenaan dalka iyo dadkaba, ma aha kuwo wakhti kooban oo kaliya ku eg, balse waxay noqon karaan kuwo sii jiitama ama muddo dheer sii socda.

Waxaana loo baahan yahay in laga fogaado ficilada xun. Haddaba, waxaa ruux kasta oo dalkiisa & dadkiisa jecel laga rabaa inuu la tacaalo/ la dagaalamo ficilada foosha xun intii karaankiisa ah.

Sidoo kalena, waa in hay'adaha sharciga lala soo socodsiiyaa, cidda samaynaysa ficilada ama falalka noocaas ah.

### Layliska 5

Kawada munaaqashooda su'aalahan soo socda

1. Sheega ficilada xun-xun ee aad isleedihiin waxay waxyeelo u keeni karaan dalka & dadkaba, idinka oo koox-koox uga wada xaajoonaya.
2. Qodobeeya, masuuliyada laga rabo muwaadinka si loo cidhib-tiro falalka xun ee khal-khalin kara amniga guud ee dadweynaha.
3. Sidee ayaad u fahanteen, marka aynu leenahay dhibaatooyinka ka dhalan kara ficilada xun xun ma aha oo kaliya kuwa jira mudo kooban, balse waa kuwo sii socon kara mudo-fog?

## 5.5 La dagaalanka saboolnimada iyo Dib-u-hadhnimada

### 5.5.1 Waajibaadka laga rabo xukuumadda iyo Muwaadiniinta sidii loo fulin lahaa qorshayaasha horumarka, iyo siyaasada & istaraatijiyada ku wajahan cidhib-tirka saboolnimada iyo dib-u-hadhnimada

- Waa maxay qorshayaasha horumarineed ee Dawlad-Deegaaneedka Soomaalidu?

 Ardaydu haka wada munaaqashoodaan!

#### Marka ficil lagu muujiyo qorshayaasha Horumarineed

Xalka koobaad ee lagu xaqiijin karo dammaanad qaadka-dhuuniga cunnada, islamarkaana lagaga bixi karo faqriga/saboolnimada, waa iyada oo xooga la saaro ka faa'iidaysiga dalaga beeraha & xoolaha nool ee dalka sida ugu haboon. Xukuumaddu iyada oo haysata taageerada beeralayda & xoolo-dhaqatada dalka ayay salaxday (dajisay) qorshayaal istaraatijiyadeed oo ku wajahan horumarka. Sidoo kale waxay muujisay talaabooyin kor loogu qaadayo dhaqaalaha dalka oo lagu diirsan karo natiijadooda ilaa hadda. Tanina, waa mid lagu doonayo sidii kor loogu qaadi lahaa heerka nololeed ee beeralayda & xoolo-dhaqatada dalka. Beeralayda dalku iyaga oo ka faa'iidaysanaya taakulada-badhitaar ee ay dawladu siiso ayaa waxay awoodeen inay dhul yar oo kooban ka soo saaraan midha kala duwan oo ka baxa beerahaas. Tanina waxay dhaxalsiisay inay si wayn wax uga badalaan xaaladooda nololeed.

Haddii ay qorshayaasha horumar ee dawlada hirgalintoodu sidaa ay ku sii socoto, iskadaa in wax laga badalo heerka nololeed ee bulshada beeralayda dalka, waxaa la gaadhi karaa oo kale in dalkan Itoobiya laga dhigo mid ka mid ah wadamada dakhligoogu yahay kuwa dhaqaale ahaan dhax-dhaxaadka ah muddo wakhti gaaban gudaheeda. Sidoo kale waxaa tan la bar-bar wadaa qorshayaal & istaraatijiyado waxtar u leh kobaca dhaqaale ee dalka guud ahaan.

### Layliska 6

1. Maxaa ugu wacan in natiijo wanaagsan laga gaadho siyaasada horumar ee ku aaddan wax soo saarka beeraha marka laga hadlayo kor u qaadista nolosha dadka beeralayda ah?
2. Barihiina kala hadla arrinta la xidhiidha taakulada badhi taar ee la siiyo beeralayda.

Dawladu waxay dalka ka hirgelisay qorshayaal horumarineed oo kala duduwan sidii meesha looga saari lahaa saboolnimada iyo dib-u-dhaca la degey ee ay ku caan baxday Itoobiya. Tusaale;

qorshayaasha horumarineed ee dalka laga wado, waxaa ka mid ah sida siyaasadaha & istaraatijiyada horumarinta Miyiga, istaraatijiyada horumarinta warshadaha iyo istaraatijiyada kobcinta awooda. Haddaba, haddii aan la joogtaynin hirgalinta siyaasada, istaraatijiyada iyo barnaamijyada horumarineed ee horey loo qorshaystay, wax natiijo ah lagama gaadhayo.

Si meesha looga saaro dhibaatooyinka carqabada ku noqday nolosha dadka, waxaa loo baahan yahay in la isbar-bar wado hirgalinta siyaasada & istaraatiijiyada horumarineed ee ku aaddan cidhibtirka faqriga/saboolnimada iyo dib-u hadhnimada magaca xun ku reebtay dalka guud ahaan. Hadal badan iyo rajo la dhawro uun laguma dabar-goyn karo.

Haddaba, qorshayaasha horumarineed si ay u noqdaan kuwo dhamaystiran islamarkaana natiijo wanaagsan leh, waxaa loo baahan yahay marka hore in ay muwaadiniintu yeeshaan dhaqan-shaqo oo wax ku ool ah. Sidaas awgeed, si looga midha dhaliyo himilooyinka la tiigsanayo ee ku wajahan cidhib-tirka faqriga & dib-u-hadhnimada, waa in muwaadin kastaa u ku dadaalaa sidii u shaqada u hayo nooc kasta ha ahaatee, u natiijo wanaagsan uga soo hoyn lahaa. Sidoo kale, waxaa muwaadin kasta la gudboon inuu hawlgalo sidii dalka looga suulin (dabargoyn) lahaa taariikhda xun ee faqrinimada & dib-u-hadhnimada ku aftirsata ee raadka xun ku reebtay dalkeena Itoobiya.

**Layliska 7**

1. Ardayeey kawada hadla (xaajooda) qodobada aad isleedihiin waxay noqol karaan xal lagaga hor tagi karo saboolnimada iyo dib u hadhnimada dalkeena.
2. Waa maxay kaalinta dawlada & shacabka kaga aaddan hirgalinta istaraatijiyada iyo qorshayaasha loo dajiyay hawlaha horumarka dalka? Kawada munaaqashooda Ardayeey.

### 5.5.2 Muhiimada Adeeg bixinta Mutadawacnimadu ay u leedahay cidhib-tirka saboolnimada iyo dib u hadhnimada



Jaantuska 5.3. Dhalinyaro dhir/geedo beeris samaynaysa

- Maxaad ka fahmaysaan sawirkan?

Dhaq-dhaqaaq kasta oo xukuumadi ay wado manoqonayo mid laga gaadho natiijadii laga rabay/filayay, haddii aan lagu kabin, ama lagu ladhin adeegyada mutadawacnimo ee ay muwaadiniintu iskood ugu tabarucaan si samafal ahaan ah. Gaar ahaan sida muwaadiniinta dalalka Itoobiya oo kale oo ku dadaalaya sidii looga guuleysan lahaa faqrinimada, islamarkaana raba sidii loo gaadhi lahaa qaninimo, waxaa laga rabaa inay gacan samafalnimo ka geystaan arrintaas iyada ah sidii looga gun gaadhi lahaa.

Samafalnimadu/mutadawacnimadu maaha ficil waxqabad oo ay ka dambeeyaan talooyin iyo awaamiir ruuxa lagu siiyo ama lagu cadaadiyo inuu sameeyo tabaruc, balse waa mid (ficil) ku xidhan isxilqaanka shaqsiyadeed, ama rabitaanka ruuxu/qofku ku doonayo is'ahaantii inuu gacan u fidiyo bulshadiisa haday tahay muruq, maskax iyo maalkiisaba. Matalan, dhalin yaradu waxay agagaarkooda/goobahooda ka samayn karaan tabarucaad mutadawacnimo oo ah inay gacan u fidiyaan caruurta da'yarta walaalahooda ah sidii ay u soo ururinta lahaayeen, islamarkaana uga caawiyaan waxbarashada sida dhinacyada

akhriska, qoraalka iyo aqoonta kaleba, si ay natiijo wanaagsan u soo hooyaan ururada samafal ee ka jira goobaha kala duwan waxay samayn karaan is-abaabul ay caawimo ugu fidinayaan dadka taagta daran iyo kuwa foqorada ah ee ku nool deegaanadooda, sida dadka waaweyn ee aan lahayn cid daryeesha, dadka qaba cudurka fayraska HIV/AIDS, dadka ka jiran xaga maskaxda, iyo caruurta agoonta ah ee ay waalidadoodu ku leedeen cudurada kala duwan awgeed oo la xanaaneeyo. Sidoo kale ururada samafalku waxay gacan ka geysan karaan sida daryeelista nadaafada bay'ada (deegaanka), la dagaalanka musuq-maasuqa, dhaqanada xun-xun iyo falalka dambiyada. Haddaba, hawlahan kala duwan ee mutadawacnimadu waa kuwo waxtar wanaagsan u leh bulshada dalka. Ka shaqeynta arrimaha samafalka maaha kaliya mid lagu kobcinayo horumarka dalka, balse waa mid isla tusaale wanaagsan noqon karta oo lagu dayan karo.

### Layliska 8

1. Maxaa loo jeedaa marka la leeyahay qorshaha horumarin ee aan lagu badhi-taarin kaalmada adeeg fidin ee ay muwaadiniintu ku tabarucaan, natiijadii la rabay lagama gaadhayo?
2. Maxaa awaamiirta dawlada loogu dabaqi waayay hawlaha samafal ee is ahaanta loogu tabaruco?
3. Ardaydu iyaga oo koox-koox ah ha ka wada hadlaan adeegyada samafal ee laga wado goobahoda kadibna warbixinta ha u soo bandhigaan fasalka.

## 5.6 Muwaadinimada

### 5.6.1 Waxtarka ay wadaniyada uleedahay xuquuqda muwaadiniinta oo la dhawro

- Xuquuqda muwaadiniinta oo la dhawro waxtar noocee ah ayay hanashada wadaniyada uleedahay?

Muwaadiniintu waa quruxda dal leeyahay. Marka la sugo xuquuqda-muwaadiniinta dal ku nool, waxaa loo baahan yahay inay iyaguna u istaagaan sidii ay uga shaqeyn lahaayeen horumarka iyo wanaaga dalkooda.

Haddii aan la xurmayn xuquuqda ruux leeyahay lama filan karo dareen dal Jacayl inuu ku abuurmo ruuxaas. Sidoo kale, kama-qayb qaato dadaalada horumarineed ee lagu doonayo in dalka lagaga tir-tiro saboolnimada.

Wakhtigan xaadirka ah waxaa jira dad badan oo si fir-fircoon uga qayb-qaadanaya hawlaha dalka laga wado, maadaama oo hada muwaadin kasta la siiyay (u haysto) damaanad-qaad xuquuqeed oo dastuuri ah.

Dalkana waxaa laga wadaa horumar balaadhan oo maal-qabeenadu hantidooda gashanayaan wadanka. Waxaa jira muwaadiniin dibad (qurbe) jog ahayd oo hada dalka ku soo laabtay oo siyaaba kala duwan horumarka uga qayb qaadanaya. Waxaa kaloo jira aqoonyahaniin iyo xirfadlayaal dalka ku soo noqday iyagoo ka faa'iidaysanaya xaaladaha & fursadaha haboon ee dalka ka jira awgeed, aqoontooda uga faa'iidaynaya dadweynaha deegaanada dalka.

Xaaladana waa mid ku tusaysa haddii la dhawro/ xurmeeyo xuquuqda bani aadamnimo ee u shaqsigu leeyahay in si tartiib-tartiib ah ay ruuxa ugu abuurmi karto dal jacaylnimo. Qaar ka mid ah astaamaha muujinaya dareenka dal jacaylnimo waxaa ka mid ah;

- Dadaal shaqo oo aad natiijo ka soo hoysid.
- Aslixinta dimuqraadiyada & maamulka suuban oo aad gacan ka geysatid
- Arrimaha Deegaanka iyo qaranka oo aad ka qayb-qaadato.
- Sugida amniga oo aad masuuliyad iska saartid.

### Layliska 9

Kawada munaaqashooda su'aalaha soo socda;

1. Ruuxa aan xuquuqdiisa la xurmayn dalka qalbiga maka jeclaanayaa?
2. Ruuxa/muwaadinka dalkiisa jecel ficilada u ku dhaqmo 3 ka mid ah sheega.

## 5.7 Calanka qaranka

### 5.7.1 Kaalinta calanka iyo heesta qaranku ay ku leeyihiin abuurista wadaniyada




Jaantuska 5.4. Orodyahanada geesiyaasha ee dalka

- Maxaad ka fahanteen sawirka kor ku xusan?

"Heesta qaranka ee shucuubta Itoobiya"

### Layliska 10

Su'aalaha soo socda kajawaaba

1. Maxay yihiin fariimaha muhiimka ah ee ay heestu xambaarsantahay?
2. Maxay ka dhigantahay,"weedha leh waxaad tahay xarun dhaqano bilicsan"
3. waa tee weedha faraysa muwaadiniinta ilaalinta sharafta qaranimadooda?

Calanku waa astaan tilmaamaysa dawlada, qaranimada shacabka iyo awooda wadan leeyahay. Sidoo kale,macnaha sharfinta calanku waa mid aynu ku muujinayno jacaylka aan u hayno dalkeena.calanka iyo heesta waxay had iyo jeer ku lamaanyihiin wadaniyada.

### Layliska 11

Ka jawaaba su'aalaha soo socda:

1. koox ahaan uga wada xaajooda sida aynu jacaylka dalka iyo shacabka aynu u qabno ugu muujin karo calanka iyo heesta qaranka.
2. ruuxa aan jeclayn calankiisa iyo heesta dalkiisa,miyuu dhihi karaa dalkayga waan jecelhay?kawada hadla.

## Gunaanadka Cutubka 5[aad]

Dal jacaylnimadu waxay ruuxa/muwaadinka ku abuurantaa marka la dhawro (xurmeeyo) taariikhda iyo dhaqamada qowmiyadaha iyo shucuubta kala duwan ee dalka kuwada dhaqan. Ruux aan ka dheregsanayn taariikhda & dhaqamada dalku leeyahay, wax wadan jacaylnimo la yidhaahdo oo u yeelan karaa ma jirayso.

Maaha barashada taariikhaha iyo dhaqamada qowmiyadaha oo kaliya waxa loo baahan yahay, balse waxaa kale oo la rabaa inuu muwaadinku garto qiimaha ay leedahay xurmaynta/dhawrista la siiyay xuquuqaha-sinaansho ee muwaadiniinta iyo ka qayb-galkooda arimaha dalka laga wado guud ahaan. Dhinaca kale ruuxa/qofka haddii aan laga qaybgalin arimaha dalka, markaas mid meesha taala maaha in la dhaho ama la yidhaahdo ruuxaas dalkaaga jeclaw.

Haddii ficil lagu muujiyo xaqiijinta xuquuqda dadka, waxaa la gaadhayaa markaas in la helo isfahan/ is'afgarad guud oo qaran. Marka la helo isfahan waxaa la helayaa in khayraadka kooban ee dalku leeyahay si siman looga wada faa'iidaysto, iyo waliba in si haboon loo wada isticmaalo hantida adeega guud ee dadweynaha ka dhaxeysa.

Muwaadinka ay dal jacaylnimadu ku weynaato nafsad ahaantiisa, wuxuu sameeyaa inuu ka fogaado ficilada ama falalka xun-xun ee amniga dadweynaha dhibaataynn kara. Wuxuuna ku dadaalaa si aynan falal xuni u dhicin. Haddii ay dhacaana wuxuu u hawlgalaa sidii u ula socodsiin lahaa hay'adaha ku shaqada leh.

Muwaadinka waxaa laga rabaa inuu kaalin muhiim ah ka qaato sidii saboolnimada iyo dib u hadhnimada hadda dalku ku sugan yahay looga saari lahaa, islamarkaana loo gaadhsiin lahaa dalka horumar waara. Sidoo kale, haddii qorshayaasha dawliga ah aan la bar-bar wadin ka qayb-galka tabarucaada muwaadiniinta iyo adeega taakulo lagama gaadhayo natiijo wanaagsan oo wax ku ool ah.

Dhammaan muwaadiniinta waxay masuuliyad ka saran tahay inay u istaagaan sidii taariikhda xun ee saboolnimada iyo dib u hadhnimada dhaqaale ee magaca xun ku reebtay dalka looga cidhib-tiri lahaa. Dhidibadana loogu taagi lahaa Itoobiya cusub oo qowmiyaduhu sinaan kuwada noolaadaan.

## Ereyada furaha u ah cutubka 5[aad]

| | |
|---|---|
| Qaranimada/madaxbanaanida dal: | dalka ka xorta ah faragelinta/saameyn shisheeye |
| Macaashka dimuqradiyad: | midhaha wanaagsan ee laga dhaxlay dimuqraadiyada |
| Maamulka suuban: | maamulka ka reeban cadaalad-darada iyo qaraabaysiga |
| Ficilada xun-xun: | falalka kharbudaad ee halis gelin kara amniga dalka iyo dadkaba |
| Khayraad: | hantida guurtada iyo tan maguurtada ah |

## Layliska guud ee Cutubka 5aad

I. Akhriya su'aalaha soo socda kadibna, kaga jawaaba weedha saxda ah 'Run' ta aan saxda ahayna 'Been' ku qora.

1. Dalkan Itoobiya waa mid lagu sheego inuu yahay wadan "Masrax-qowmiyadeed", ama "Musiyeem qowmiyadeed", luqadaha iyo qowmiyadaha kala jaad-jaadka ah awgeed.
2. Barashada dhaqamada iyo taariikhaha qowmiyadaha waa mid ku xidhan aqoonta dhuleed ee dalka.
3. Heesta calanka qaranku waa astaanta dal jacaylnimada.
4. hawlaha mutadawacnimo maaha kuwa kaabaya horumarka dawlada.
5. Astaanta calanka qaranku waa mid tilmaamaysa sinaanta quruumaha,qowmiyadaha iyo shucuubta,

II. Isku aaddi weedhahan ku kala hoos qoran xarfaha 'B' iyo 'T' midba ta ku aboon.

| | B | | T |
|---|---|---|---|
| 1. | Ficil wax-qabad oo rabitaankaaga ku xidhan | b) | Heesta qaranka |
| 2. | Calanka qaranka | t) | summadda qaranka |
| 3. | Astaanta qaranka | j) | Tilmaanta shucuubta |
| 4. | Dimuqraadi | x) | falalka lidka ku ah sumcada iyo hantida dalka. |
| 5. | Astaanta axdiga muwaadiniinta | kh) | xuquuqda ra'yi dhiibashada |
| 6. | Ficilada xun-xun | d) | Astaanta dawlad xor ah |
| 7. | Dhaqanka & luqadaha | r) | Adeega samafal. |

III. Meelaha bannaan ee soo socda ku buuxiya erayada ama weedhaha ku haboon.

1. Calanka dawlad-deegaanka Soomaalidu wuxuu ka kooban yahay _____midab.
2. Dadweynaha goob/meel wada degan agabka ama adeega ay si siman u wada isticmaalaan waxaa la dhahaa ___________.
3. Luqadda rasmiga ah ee lagaga shaqeeyo xukuumada dawlada deegaanka Soomaalida waa ____________.

## Wadanniyada

IV. Ka dooro jawaabta saxda ah;

1. Dalkeenu wuxuu xornimadiisa ku ilaashaday;
   - b) xoogiisa ciidan
   - t) istaraatiijiyadiisa dhuleed
   - j) halyaynimada naf hureed ee ubadkeeda
   - x) dhamaan jawaab way noqon karaan.
2. Isku-dheelitirnaan la'aanta qoraal ee taariikhaha qowmiyadaha dalka waxaa u sabab ah;
   - b) dhammaan qoraayaasha taariikhaha oo shisheeye ahaa
   - t) qoraayaasha dalka oo aan qoraal ku samayn taariikhda
   - j) majirto taariikh si khaldan loo qoray
   - x) qorayaasha dalka iyo kuwa shisheeye oo aan xog dhab ah ka haysan taariikhaha qowmiyadaha dalka qaarkood.
3. Cidda looga baahan yahay ilaalinta hantida dawlada iyo dadweynahaba;
   - b) Shacabka oo kaliya
   - t) xooga booliska oo kaliya
   - j) dawlada oo kaliya
   - x) xukuumada iyo shacabka oo is garabsanaya
4. Calanka qaranku waa
   - b) Astaanta madax-banaanida
   - t) xaqiijinta midnimada
   - j) summada/calaamada lagu garto dawlada xorta ah
   - x) dhammaan
5. Ruux kasta oo dalkiisa jecel waa
   - b) mid si toos ah uga qayb qaata arrimaha dalkiisa
   - t) mid xurmayn (qadarin) u haya calanka iyo heesta qarankiisa.
   - j) Mid si haboon u maareeya/xafida hantida guud ee dadweynaha
   - x) dhammaan.

V. Jawaabo koo-kooban ka bixiya su'aalahan soo socda;

1. Maxaa muwaadin kasta la gudboon si dalka looga cidhib tiro saboolnimada iyo dib u hadhnimada?
2. Maxay dadku ugu dhiiradaan bixinta kaalmo, ama adeeg samafal?
3. Maxaa loo jeedaa marka la leeyahay, dareenka dal jacaylnimadu wuxuu xoogaystaa oo kaliya marka la dhawro sinaanshaha xuquuq ee muwaadiniinta.
4. sidee baynu u xurmaynaa calanka iyo heesta qaranka.

CUTUBKA 6

# Masuuliyadda

Ujeeddooyinka guud ee cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Dareemaan ballan-qaadku in uu muhiimyahay.
- Aaminaan doorka mas'uuliyadeed oo si karti leh in looga soo baxo in looga baahan yahay.
- Fahmaan in ay lagama maar-maan tahay ilaalinta goobaha taariikhiga ah.
- Gartaan faa'iidada ay leedahay ilaalinta hantida guud ee bulshada.
- Fahmaan dhibaatooyinka dhaqaale iyo kuwa bulsho ee cudurk dilaaga ah HIV/ Aidsku u horseeday dalka.

## 6.1 Gudashada waajibaadka Masuuliyadeed

### 6.1.1 Muhiimada ay leedahay waajibaad gudashada masuuliyadeed



Jaantuska 6.1. shaqaalaha dab-damiska ah oo la tacaalaya dab qabsaday Haamo shidaal

- Maxay shaqaalaha dab-damisku ugu dhiiradeen inay dadaal adag u galaan sidii loo damin lahaa dabkaas?
- Sida ka muuqata sawirkaas, haddii aysan shaqaalaha dab-damisku xakamayn dabkan qabsaday dugsiga, maxay noqon lahayd masiibada tan xigtay?

Kasakow faa'iidada waajib gudashada masuuliyadu u leedahay shaqsiyaadka & bulsha ahaanba, waxaa kale oo ay muhiim (saldhig) u tahay horumarka dalka. Mar kasta oo u ruuxa muwaadinka ahi si wanaagsan uga soo baxo waajibaadkiisa shaqo (masuuliyadeed) wuxuu ka gaadhayaa, ama ka kasbanayaa hortaba qanacsanaan ama niyad sami deganaansho oo raali gelisa nafsad ahaantiisa. Sidoo kale, ruuxa ah mid taxadar badan shaqo ahaan wax weyn ayuu noloshiisa ku soo kordhinayaa. Guud ahaan, wadarta ashkhaasta ficilada natiijada wanaagsan lihi waxay xoojiyaan kobaca guud ahaaneed.

Dadka (Muwaadiniinta) sida xilkasnimada leh uga soo baxa masuuliyadooda shaqo, waxay beertaan sumcad wanaagsan iyo kalsooni loo hayo ama lagu qabo sida ay wax u wadaan. Kalsoonida lagu qabana waxay ku muujiyaan ficiladooda waxqabad. Waxayna noqdaan kuwo bulshada dhexdeeda laga jeclaado ama laga qadariyo.

Sidoo kale, waxay mutaystaan ixtiraam iyo in ay noqdaan kuwo lagaga dayan karo sida ay u guteen waajibaadkooda la xidhiidha xilka-shaqo ee ay ummada u hayeen awgeed. Haddaba, dadka ku sifooba dadaalada noocan ahina waxay ku guuleystaan inay kobciyaan ama kor u qaadaan nolol-maalmeedkooda gaar ahaaneed.

Isla markaana, waxay horsed ka noqdaan sidii loo qaadi lahaa talaabooyin lagu gaadhi karo horumar deg-deg ah oo laga faa'iidaysan karo.

### Layliska 1

1. Maxay tahay xil gudashada masuuliyadu?
2. Maxay tahay (yihiin) faa'iidada (faa'iidooyinka) laga heli karo gudashada (ka soo bixida) xilka masuuliyadeed?

### 6.1.2 Dhibaatooyinka ka dhalan kara xil-kasnimo la'aanta masuuliyadeed

- Maxay dhibaatooyinka ka dhalan kara xilkasnima la'aanta masuuliyadeed?

Shaqsiyaadka aanan la imaan kalsooni daacadnimo ku waajahan xilka masuuliyadeed ee ay bulshada u hayaan, waxay qudhadoodu (nafsad-ahaantoodu) mutaysan doonaan duli iyo faqrinimo (caydhnimo) ku habsata noloshooda guud ahaan. Dadka noocaas ahina, waxay caqabad ku noqdaan dadaalada lagu doonayo in kor loogu qaado danaha iyo horumarka bulsho.

Sidoo kale, dadka aan ka soo bixin masuuliyadooda shaqo, waxay noqdaan kuwo aysan bulshadu isku halayn Karin, islamarkaana, aan loo wakiilan Karin inay matalaan dano/arimo shacab. Shaqsiyaadka noocan ahina wax isbadal ah, ama kobac ah kuma soo kordhiyaan xaalada nolosha qoysaskooda. Carruurta/ubadka ay barbaariyaana ma noqdaan kuwo yeesha barbarian nidaam wanaagsan (suuban), markaasna, waxay bulshada kusoo kordhiyaan culeys & dulsaarnimo hor leh. Sidaa daraadeed, waxaa ruuxa muwaadinka ah looga baahan yahay inuu masuuliyada saran u guto si daacadnimo iyo xil-kasnimo ay ku dheehan tahay.

### Layliska 2

1. Faah-faahiya waxyeelada ay nolosha shaqsiga soo gaadhsiin karto xilkasnimo la'aanta masuuliyadeed.
2. Waa sidee/noocee nolosha gaar ahaaneed iyo tan bulshaba, ee ruuxa aan lahayn dareenka masuuliyadeed.

## 6.2 Dhawrista Axdiga/dhaarta xil

- Waa maxay Axdigu ama dhaartu?
- Maxaa laga heli karaa Axdi/dhawr fulinta?

Xurmaynta Axdigu/dhaartu waa mid ka tarjumaysa kartida adkaysi ee ay waajibaad gudashada masuuliyadeed leedahay.

Asal ahaan dhaartu/Axdigu waa weedh salka ku haysa xaqiijinta ama hubinta aaminaad/kalsooni loogu yaboohayo dhinac kale.

Waana mid rajo kalsooni ah lagu siiyo dhinacyo kale sida: shacab, dawlad iyo kuwa kaleba. Xubinka

ama dhinaca axdiga/wacadka qaadanayana (galay) waxaa lagu qiimeeyaa ficilada & natiijadiisa wax-qabad ee u markaas la yimaado. Sidoo kale, waxaa ruux kasta oo xil masuuliyadeed haya looga fadhiyaa inuu la yimaado ficilo wax qabad oo natiijo wanaagsan leh. Haddaba, natiijada ficilada wax-qabad ee shaqsiyaadka, ururada, hay'adaha dawliga ah iyo kuwa aan dawliga ahaynba dhammaan waxay saldhig u yihiin horu-kaca iyo horumarka dalka. Si kastaba ha ahaatee, waxaa dhinacyada wacadka/Axdiga galay laga rabaa inay oofiyaan (fuliyaan) balanka ay galeen, islamarkaana waa inay xoojiyaan dadaaladooda xil-gudashada masuuliyadeed guud ahaan.

Fulin (oofin) la'aanta axdiguna ama balankuna waa khaa'inimo. Wakhti iyo balan kasta oo la lumiyana waxay la mid yihiin fal-dambiyeed la galay oo kale. Natiijo darada aaminaadna waxay shaqsiyaadka, ururada ama masuuliyiinta xukuumadeedba ka dhigtaa kuwo la yiso ama aan bulshada dhexdeeda laga qadarin. Kadibna, waxay ku dambeeyaan in laga caydhiyo shaqooyinkooda. Maadaama ooynan xilkoodii shaqo sidii la rabay u gudanin. Karti daradoodaas waxay caqabad ku noqotaa kobaca dalka guud ahaan.


### Layliska 3

Kawada munaaqashooda su'aalahan soo socda;

1. Maxay tahay faa'iidada laga helayo Axdi qaadka masuuliyadeed?
2. Shaqsi ahaan maxaa ruuxa ka soo galaya in u xurmeeyo/dhawro axdiga/balanka u horey u galay?

## 6.3 Khayraadka Dabiiciga iyo Goobaha taariikhiga ah

### 6.3.1 Dhibaatooyinka ka dhalan kara Xafidaad la'aanta Kh/dabiiciga iyo goobaha taariikhiga ah

Jaantuska 6.2. shiditaanka dhirta

- Maxaa idiinka soo baxay sawirkan?

#### Arin cid kasta khuseysa

Sida lawada egsoonyahay dalkeenu wuxuu qanni ku ahaa khayraadyada kala duwan ee dabiiciga sida kaymaha, xayawaanka duur joogta ah, gaar ahaan kuwo aan meel kale laga helin dunida. Balse, waxaad mooda hadda inay xaaladaasi meesha ka sii baxayso, sababa laxidhiidha tadawur /isbadal/ ku yimiday cimilada guud ahaan. Isbadalkan cimilada ku yimidayna waa mid ka dhashay xaadhufinta kaymaha/dhirta deegaan ee uu aadamuhu u gesto khayraadka dabiiciga.

Isabadalka cimiladuna, wuxuu noqday mid raad xun ku reeba nolosha aadamaha ama bulshadaa dalka, waayo ndasheena waa mid sitoos ah iyo si dadbanban ugu xidhan deegaanka dabiiciga iyo waxyaabaha uu ka koobanyahay.

Xaadhufinta khayraadka dhirtu wuxuu sababaa carra-guur saameyn ba'an ku keena wax soo saar ka beeraha. Xadhufinta dhirtu waxay sababta oo

kale xayawaanka duurjoogta ah oo ka hayaama deegaanka, islamarkaana halkaas lagu waayo dakhigii laga heli lahaa goobaha dalxiiska loo tego. Sidoo kale, xaadhufinta dhirtu waxay keentaa roob-yaraan la soo gudboonaata deegaanka. Roob la'aantaana waxay raad xun ku reebtaa nolasha bulshada, gaar ahaan bulshada xoolo-dhaqatadee ah oo noloshoodu ku tiirsantahay cimilada roobka, oo hadba uguur-guura meesha lagu sheego roob, si ay u badbaadiyaan nolasha dadka iyo duunyadaba.

Sidaas awgeed, isbadalka cimilada ee ka dhasha xaadhufinta dhirtu, wuxuu horseedaa dhibaatooyin la xidhiidha abaaro, kuleyl iyo duunyadaba.

Hadaba, maadaama oo ay nolosheenu ku xidhantahay deegaanka dabiiciga ah, waxaa lagama maarmaan ah in la daryeelo, islamarkaana bulshada lagu wacyigeliyo waxyeelada uu keeni karo, hadii aan si haboon looga faaideysan khayraadka dabiiciga ah. Markaas waxay masuuliyad ka saarantahay cid kasta, maadaama oo ayna cid gaar ah lahayn khayraadka dabiiciga ah, balse u yahay mid ummada ka dhexeeya. Waa in la yareeyaa xaadhufinta dhirta dabiiciga ah lagu hayo, islamarkaana la qaado talaabooyin dhir beeris lagu sameynayo, si laaga baaqsado masiibooyinka abaaro iyo biyo la'aan ee soo noqnoqonaysa.

### Layliska 4

Ka wada xaajooda su'aalaha soo socda

1. Khayraadka dabiiciga ah ee dalku xaalad noocee ah ayuu ku suganyahay/
2. Xaadhufinta dhirtu maxay sababtaa?
3. Kh/dabiiciga oo qani lagu noqdo maxay ka taraysaa dalxiiska?

Dalkan Itoobiya wuxuu ahaa mid hodan ama qani ku ah khayraadka dabiiciga ah sida kaymo aad u baaxad weyn oo ku xeeran (fadhiya) dhul aad u balaadhan. Isla markaana, waxaa kaymahaas ku noolaan jiray xayawaan noocyo & tiro badan oo duur jog ah. Laakiin wakhtigan xaadirka ah waxaa jirta xaalad ka duwan taas hore, oo naxdin iyo wal-wal badan leh oo ah nabaad-guur iyo baaba ku dhacay khayraadka-dabiiciga ah. Xaaladanina waxay horsed ka noqotay cimiladoo isbadal ku yimaado, ama tadawar ku yimaada hawada/cimilada guud ahaan.

Xafidaad ama daryeelis la'aanta khayraadka dabiiciguna waxay sobobtaa waxsoosaarka midhaha beeraha oo noqdo mid aad u gaabis ah ama hooseeya (liita), hawada ama cimilada dabiiciga ah oo isbadal ku yimaado, carrada oo ay dabaylaha & biyuhu nabaad guuriyaan. Arrimahana waa kuwo galaafta nolosha dad iyo duunyo farabadan. Haddaba, si looga samata baxo masiibooyinka noocaas ah waxaa lagama maarmaan ah in laga shaqeeyo sida loo daryeeli lahaa khayraadka dabiiciga sida xanaanaynta & ilaalinta dhirta/kaymaha kala duwan ee ku yaala deegaanada kala duwan ee dalka, islamarkaana si habboona looga manaafacsado/faa'iidaysto. Matalan, marka ay dhirta ka dabar go'do dhulka.

Waxaa dhacaysa in ay carraduna ka suusho/ka tir-tiranto oo ay nabaad-guuriyaan dabaylaha & biyuhu, waayo dhirtu waxay carrada u ahayd xayndaab ilaali ama dygsi oo ka difaaca daadadka iyo dabaylaha xoogan. Carradu marka ay nabaad-guurtana waxaa hoos u dhaca ama gaabis noqda waxsoosaarka midhaha beeraha. Sidoo kale, hawada oo isbadal ku yimaado kadibna,

sababta ama abuurta dhul lama degaan saxara ah, iyo abaaro horseeda macaluul iyo dhimasho ku timaada dad iyo duunyaba, meelo ka tirsan aduunkan aynu ku noolahay korkiisa.

Sidaas awgeed, waxaa ruux kasta la gudboon inuu ku dadaalo sidii loo daryeeli lahaa kh/dabiiciga ah, islamarkaana u ka shaqeeyaa beerista dhirta iyo geedaha kaleba, uuna la dagaalamaa xaadhufinta lagu hayo khayraadka dhirta ah isagoo kaashanaya kartidiisa, xoogiisa iyo aqoontiisa gaar ahaaneedba. Dadkana waa in lagu baraarujiyaa faa'iidada ay dhirtu u leedahay nolosha dadka iyo duunyadaba iyo waliba, waa in lagu wacyi geliyo oo kale dadweynaha khasaaraha ay xaadhufintu u leedahay deegaanka aynu ku noolahay.

Waxaa kale oo habboon in xil-la iska saaraa daryeelista & xanaaneynta kh/dabiiciga si dhulka loogu horumariyo guud ahaan.

Dhirta oo kaliya ma aha kh/dabiiciga ah, balse waxaa ka mid ah sida seerayaasha, wabiyada, macdanta iyo goobaha taariikhiga ah haday tahay dhisme iyo Agab ba. Haddaba, guud ahaan kh/dabiicigu waa mid faa'iido dhaqaale iyo kuwo bulshaba u leh dalka. Sidaa daraadeed, waa in xafidaad habboon la siiyaa.

## Layliska 5

Kawada xaajooda su'aalahan soo socda;

1. Xaalad noocee ah ayuu khayraadka dalku ku sugan yahay?
2. Maxaa ka dhalan kara xaadhufinta dhirta?
3. Qaninimada kh/dabiicigu siday uga faa'iidaysan kartaa kobcinta dalxiiska?

## 6.4 Fayraska HIV/AIDS

- Sheega HIV/AIDS ku sida u xooga wax soosaar ee dadka wax u yeeleeyo?
- Sharaxa sababta u cudurkani xawli ugu fidayo.

Cudurkani waa mid aad u faafaya islamarkaana aad khatar dilaa u ah oo fara-ba'an ku haya manta dunidan aynu ku noolahay, gaar ahaan wadamada dhaqaala ahaan soo koraya. Inkasta oo dadaalo farabadan la sameeyay, hadana ilaa hadda, wax daawa ah oo loo helay dawayntiisa ma jirto. Cudurkanina wuxuu galaaftay malaayiin ruux noloshooda. Wadamada u sida xun(ba'an) ugu faafayna waxaa ka mid ah dalalka Afrika, gaar ahaan kuwa ka hooseeya lama degaanka saxaraha oo ay Itoobiyana ka mid tahay. Sababaha uu cudurkani sida xawliga ugu faafayo wadamada soo koraya, waa aqoon daro iyo fikir la'aan ay ka qabaan cudurka iyo waxyeelada xun ee u leeyahay dadka iyo dalkaba. Sida ay tilmaamayaan daraasaadyada ilaa hadda la sameeyay, dadka u cudurkani asiibay waa kuwo 15 jir & wax ka badan ay da'doodu tahay. Haddaba, da'daasina sida lawada ogsoonyahay waa dadkii xooga waxsoo saar, waayo waa kuwa leh aqoon, khibrad, xirfad iyo farsamo gaar ahaaneed oo kala duwan.

Sidoo kale, kuwani waa xoogii mustaqbal ee waxbarashada ku jiray ee la rajaynayay inay dalka majarihiisa qabtaan wakhtiga dhaw. Sidaas awgeed, waxaa dalka soo wajahaya muddo gaaban gudaheeda, shaqaale yari xirfadlayaal oo aan badal loo hayn

## Masuuliyadda

Dhibaatooyinka ama waxyeelada u cudurkani u leeyahay bulshada iyo dhaqaalaha dalka waxaa ka mid ah sida kuwan soo socda.

1) Dhibaatooyinka Bulsho

b) Daweynta iyo aaska bukaanka cudurkani wuxuu culeys-bulsho ku keenaa qoysaska ama qaraabada u dhibanahaasi ka soo jeedo.

t) Ubadka/carruurta ay waalidadoodu ku leedeen cudurkan awgeed, waxay noqdaan kuwo agoomo noqda oo aan wax daryeela haysan.

j) Waxaa luma jiilalkii (xoogii) mustaqbal ee dalka u soo kici lahaa hogaaminta & horumarinta dalka.

x) Waalidiinta ubadkoodu ku leedaan (hoobtaan) cudurkan HIV/AIDS, wuxuu ku dambeeyaa gablen iyo ubad la'aan kalifta inay waayaan wax daryeela/ daranya tira.

kh) Ururada bulshada ee ka jira goobahaas oo iyaguna maal, muruq iyo wakhtiba ku bixiya in tacaalida dadka bukaanka ah.

2) Dhibaatooyinka dhaqaale.

b) bukaanka cudurkani ku dhaco waxay culays adag ku hayaan cisbitaalada iyo goobaha kale ee caafimaad. Dawladana waxaa kaga luma kharash adag oo dhaqaale daaweynta iyo adeegyada kale ee caafimaad, ee loo fidiyo dadkan qaba cudurkan HIV/AIDS-ka.

t) Wax soo saarka warshaduhuna wuxuu noqdaa mid liciifa oo gaabis noqda, sababtoo ah waxaa lumay xoogii ama jiil wax soo saar ee xirfada & aqoonta u lahaa sancooyinka warshadeed.

j) Midhaha beeraha ka soo go'ana/ka soo baxana wuxuu noqdaa mid luma maadaama oo la waayay xoogii wax soo saar ee dalaga beeraha cudurkan HIV/AIDS awgeed.

x) Cudurkan HIV/AIDS, wuxuu culeys ku noqdaa cudurada kale ee la isku gudbiyo sida T.B, Kenserka, IWM.

Haddaba, dhibaatooyinkaas dhaqaale iyo bulsho ee u cudurkani sababo awgeed, waxaa halis gala da'yartii/xoogii bulsho iyo dhaqaale ee u dalku lahaa sidii loo heli lahaa ama loo sugi lahaa.

### Maxaa in la qabta ay tahay?

Arrinta ugu horeysa ee in la qabto ay tahay waxa weeyi in la ogaado cudurkan iyo siyaabaha la iskugu gudbiyo si taxadar ku jiro, isla markaana loo hogaansamo maareynta noloshaada gaar ahaaneed. Sidoo kale, ka sokow ka ilaalinta naftaada cudurkan, waxaa kale oo muwaadinka la gudboon in uu bulshada kale ka wacyigaliyo halista iyo fiditaanka cudurkan si loo xakameeyo faafitaanka cudurkan iyo waxyeelada u u leeyahay bulshada. Waxaana loo baahan yahay in laga qayb-qaato aqoon iswaydaarsiyada (seminaarada) ku wajahan baraarujinta shacabka halista uu leeyahay. Haddaba, haddii la mideeyo dadaalada lagaga hortagayo cudurkan waxaa hubaal ah

in laga gaadhayo natiijo wax ku ool ah sidii loo yarayn lahaa halista cudurkan & fidistiisaba.

Haddaba, intabadan fiditaanka cudurkan waxaa u sabab ah ficilada galmada xaaraanta ah, iyo Hooyada uurkale oo ilmaha u gudbisa. Sidaa darteed, si loo xakameeyo waxyeelada & faafitaanka cudurkan HIV/AIDS, waxaa habboon in la sameeyo arrimahan soo socda

b) Sinada/galmada xaaraanta ah oo laga fogaado ama laga dheeraado.

t) Ka hor inta aan la guursan oo baadhitaan habboon la sameeyo.

j) Lammaanaha qoyska oo ka fogaadaa gogol-dhaafka ka baxsan dhexdooda.

x) Inta aynan hooyada uurka leh (xaamilada) ahi ee qabta HIV/AIDS u gudbin Ilmaha (cunuga) uurka ku jira oo lagaga hortago daaweyn ama laga talaalo cudurkan, islamarkaana ay hooyadu si cad ula xidhiidho goobaha caafimaad iyada oonan qajilaynin/baqanayn.

Ka sokow siyaabaha fiditaan ee cudurkan HIV/AIDS, waxaa jira oo kale waxyaabo kale oo sababa gudbinta cudurkan, kuwaasi oo ka soo jeeda intabadan dhaqamada xun-xun sida isticmaalka qalabyada aflayda ah (Irbadaha, maqaska, musbaarada, mandiilaha, cidiyo gurista, makiinadaha timo-jarista iyo xalaalaynta/gudniinka fircooniga ah oo lagu sameeyo hablaha qaarkood, IWM.

Sidaas awgeed, waxaa muwaadiniinta dalka la gudboon inay muujiyaan dadaal iyo taxadar dheeri ah si loo xakameeyo, islamarkaana loo yareeyo halista & dhibaatada u dalka u leeyahay haday tahay dhaqaale & bulshaba.

## Layliska 6

Ka wada hadla su'aalahan soo socda:

1. Idinka oo soo qaadanaya laba dal oo kamida kuwa lama-degaanka Saxaraha ka hooseeya, sheega sababta uu HIV/AIDS ku sida xawliga ah ugu faafayo
2. Sidee buu AIDSku usii fidiyaa saboolnimada
3. Dhibaatooyinka ka dhasha, dhimashada macalimiinta iyo khabiirada wax soo saarka dalaga beeraha, qodobeeya.

## Gunaanadka Cutubka 6aad

Shaqadu waa sida kaliya ee horumar iyo qaninimo lagu gaadhi karo. Shaqadaasina, waxaa natiijo wanaagsan laga soo hayn karaa oo kaliya marka ay muwaadiniintu (dadku) hawlaha shaqo ee ay hayaan xilkeeda si karti leh ay uga soo baxaan ama u gutaan.

Furaha horumarka iyo kobaca bulshaduna waa muwaadiniinta fir-fircoon ee xilka shaqo ama tan masuuliyadeed ee ay hayaan oo si habboon/wanaagsan uga soo baxaan hawsha iyada ah ee loo igmaday inay fuliyaan.

Haddaba, kuwa xilkooda shaqo u guta sida ugu habboon, waxay bulshada dhaxdeeda ka noqdaan kuwo loo hayo jacaylo, ixtiraam iyo sharaf ay ku kasbadeen balankii waajibaad oo ay fuliyeen (oofiyeen) awgeed. Dhinaca kale, kuwo ku fashilma (ku guul daraysta) gudashada waajibaadkooda shaqo/masuuliyadeed waxay noqdaan kuwo aan helin wax qadarin (ixtiraam), sumcad iyo sharafba oo laga necbaado bulshada dhexdeeda.

Waxaa kale oo ka mid ah xil-gudashada shaqo ama axdiga masuuliyadeed, ilaalinta iyo xanaaneynta kh/dabiiciga ah iyo goobaha (ama waxyaabaha qadiimiga) taariikh ahaan. Waana waxqabad/ficil xil ka saran yahay muwaadin kasta. Haddiise aan la ilaalin amase aan la xanaaneyn waxyaabaha khayraadka dabiiciga iyo taariikhiga ah, waxaa dalka soo foodsaari kara fawdo/dhibaato yeelata cawaaqib xun oo horseedi karta masiibooyin aadanimo oo galaafta nolosha dad iyo duunyo tira badan.

Waajibaad-gudashaduna waa mid ka bilaabanta shaqsi ahaan ruux kasta, matalan naftaada oo aad ka ilaaliso cudurka xun ee HIV/AIDS, islamarkaana aad uga digtid qaybaha kale ee bulshada waxyeelada uu u leeyahay bulshada & dhaqaalaha dalkaba.

Sidaas awgeed, la dagaalanka fayraskan waa mid aan laga maarmayn. Sidoo kale waxaa habboon in la ogaado siyaabaha loo gudbiyo iyo siyaabaha looga taxadari karo. Masuuliyaduna waa mid saran ruux, shacab iyo xukuumadba in lala tacaalo cudurkan aan dawada lahayn.

## Ereyada furaha u ah cutubka 6aad

| | |
|---|---|
| Shilka dab: | waxyeelada ka dhalata dabka |
| Aamin-daro: | aaminaad la'aan |
| Balan daro: | oofin la'aanta balan/axdi |

## Layliska guud ee Cutubka 6aad

I. Kadib marka aad akhridaan su'aalaha soo socda kaga jawaaba "Run" ama "Been" hadba ta ku habboon.

1. Dadka xil-kaska ah waa kuwo Aaminaad & Aamin-daraba leh.
2. In la yeesho aragti horusocodnimo hadba waxay ku xidhan tahay aqoonta & nidaamka hab dhaqan ee qofka/ruuxa.
3. Ka dhabaynta balanka/axdiga la galay waxaa qiimayn kara hadba ficilada waxqabad & natiijada laga soo hooyo.
4. Khayraadka dabiiciga ah waa mid iska sii jiri kara haddii la ilaaliyo & hadaan la ilaalinba.
5. HIV/AIDS ku dadka mooyee, dalka wax waxyeelo ah uma keeno.

II. Isku aaddi weedhaha/Erayada ku kala hoos qoran xarfaha "B" iyo "I" hadba ta ku habboon.

| B | T |
|---|---|
| 1. Aamin daro | b. Daacadnimo shaqo oo waxtar leh. |
| 2. Adkaysi ruuxi ah iyo karti shaqo | t. Danahahaaga oo loo lumiyo dadkale |
| 3. lamma-degaan | j. Xilkasnimo-daro |
| 4. Goobaha taariikhiga ah | x. Xoojinta waraabka dhirta. |
| 5. Aqbalaada danaha Dadka kale | kh. Hadhaagii xadaaradihii hore |
| 6. Ooffin la'aanta balanka | d. bataax/ niis |

III. Meelaha banaan ee soo socda ku buuxiya Erayada ku habboon.

1. Horumar dhaqaale & isbadal nolol bulsho waxaa lagu gaadhi karaa oo kaliya marka laga soo baxo _____
2. Si looga hortago khatarta nabaad guurka iyo isbadalka cimilada waxaa haboon in ________.
3. _______iyo_______ waa siyaabaha ugu khatarsan ee la iskugu gudbin karo cudurka HIV/AIDS.
4. Waxaa muhiim ah in la daryeelo _________ si aan loo noqonin kuwo bilaa taariikh ah.

## Masuuliyadda

IV. Ka doorta jawaabta saxda ah:-

1. Xilkasnimo la'aantu
   - b) Waa gudasho la'aanta waajibaad
   - t) Waa qayra-masuulnimo la muujiyo
   - j) Waa masuuliyad-daro lala yimaado
   - x) Natiijo la'aan xileed.
   - kh) dhammaan.
2. Xil ka soo bixida masuuliyadeed
   - b) Waa mid aanan lahayn faa'iido gaar ahaaneed.
   - t) Waa mid aanan laga gaadhayn qanacsanaan gaar ahaaneed.
   - j) Waa mid aanan shaqo ku lahayn balan/axdi iyo wax la xidhiidha.
   - x) Waa mid aanan lahayn ku dayasho habboon oo lagu dayan karo
   - Kh) Midnaba.
3. fidinta hawlaha daixiisku
   - b) Waa hadhaaga-taariikheed oo la gado
   - t) Waa garashada taxadarka leh ee kh/dabiiciga iyo goobaha taariikhiga.
   - j) Waa in la tir-tiro kaymaha si wadooyin loo dhiso .
   - x) Waa iyada oo khayraadka dabiiciga iyo agabkii hore laga samata bixiyo burburinta.
4. fiditaanka HIV/AIDSka ee dalalka Saxaraha kahooseeyaa waa;
   - b) gacan qaadka
   - t) wada cuntaynta
   - j) wada shaqeynta
   - x) b & t
5. Kuwan soo socda keebaan run ahayn marka laga hadlayo HIV/AIDS?
   - b) HIV/AIDS maaha mld laisku gudbiyo
   - t) HIV/AIDS-ku waa cudur la daawayn karo
   - j) HIV/AIDS-ku waa mid waxyeelo soo gaadhsiiya dhaqaalaha & bulshada dalkaba.
   - x) b iyo t

V. Su'aalaha soo socda jawaabo ka kooban ka bixiya.

1. Xilka-masuuliyadeed oo la guto, maxay ku soo kordhin nolosha & horumarka dadka iyo dalkaba?
2. Maxaa inala gudboon sidii loo daryeeli lahaa khayraadka dabiiciga ah ee u dalku leeyahay?
3. Sheega sababaha u cudurka HIV/AIDS-ku fara-kulul ugu hayo dalalka soo koraya ee ay qaarada Afrika ka mid tahay.

CUTUBKA 7

# Hawl-karnimada shaqo

Ujeeddooyinka guud ee cutubka.

Marka ay dhammeeyaan barashada cutubkan kadib ardeydu waxay awoodi doonaan in ay:

- Dareemaan sharafta shaqada iyo wakhtiga
- Gartaan in ay habboon tahay in qorshe Hawl-galeed la diyaarsado laguna dhaqmo.
- Fahmaan ujeeddooyinka maalinta iyo dhaqaale ee dastuurka ku salaysan.
- Gartaan kartida aqoonta shaqo iyo ta anshax ahaaneed oo la yeesho in ay wax soo saarka iyo horumarka aasaas u tahay.

## 7.1 Waxqabadka natiijada leh

### 7.1.1 Wakhtiga oo hawlo-shaqo looga faa'iidaysto inta uusan kaa lumen/ tagin

- Maxay tahay faa'iidada laga helayo wakhtiga oo looga faa'iidaysto hawlo-waxqabad?

Shaqadu waa hawl tacab waxqabad oo la fuliyo/ la suubiyo si looga gaadho ujeeddada & natiijada laga rabo in laga soo hooyo hawshaas iyada ah. Sidoo kale, shaqadu waa dadaal waxqabad oo lagu daboolo ama lagu maareeyo geedi-socodka baahiyeed ee nolosha ruuxa/qofka bani-aadamka ahi u baahan yahay. Hawlaha, ama dhaq-dhaqaaqyada waxqabadna, waa kuwo loo huro(la gesho) muruq, maskax iyo wakhtiba, si looga dhigo mid wax ku ool ah ama midha dhal ah oo laga gaadho ujeeddooyinkii laga lahaa iyo natiijada looga dan lahaa arintaas iyada ah. Adkaysiga hawl karnimana, waa xaalad qofka dhaxalsiisa ama ka caawisa inuu ka gun gaadho ujeeddooyinkiisa iyo himilooyinkiisa shaqo ee mustaqbalka dhaw & kan fogba. Sidoo kale, hawl karnimada shaqo waa tan ruuxa/qofka/dadka ka reebta in lagu kaco ama la geysto ficilo/falal xun xun oo ka dhan ah sharafta & karaamada nolosha shaqsiga bani aadamka ah, sida tuugsi (baryo) xatooyo (tuuganimo), beensheegnimo, dulsaarnimo, khiyaanada, boobka budhcadnimo, shaxaadka wakhti lumiska ah IWM.

Dhinaca kale, hawl ama shaqo/tacab kasta oo la qabto waxay u baahan tahay in la gesho wakhti ama muddo ku filan si looga dhigo hawshaas mid taabagal ah oo guul ku dhammaata. Sida lawada garan karo shaqada & wakhtigu waa laba mar xaladood oo aan kala hadhi Karin.

Waayo, wakhtigu waa kan go'aaminaya fulinta & fulin la'aanta hawlaha shaqo ee hadba la damacsan yahay in la suubiyo.

Sidaas awgeed, waxaa habboon in la is waafajiyo ama la isku-sal gooyo wakhtiga & hawlaha waxqabad. Wakhtigu waa xaalad muhiim ah in looga faa'iidaysto ficilada ama hawlaha waxqabad sida ugu habboon. Waxaana ruux kasta la gudboon inuu ku xisaabtamo xaalad kasta oo wakhti sida daqiiqad, saacad, maalin, todobaad, bil ama sanad kasta oo soo marta nolosha ruuxa/ qofka. Sidoo kale, wakhtigu waa kan nolosha bani aadamku ku xidhan tahay sida qorshaynta hawlaha shaqo ee ku aadan nolol-maalmeedka ruuxa ama dadku leeyahay.

Inta badan ka midha keenida shaqo waxay ku xidhan tahay hadba sida looga faa'iidaysto wakhtiga. Haddaba, haddii aad aragtay qof/ruux ka gaadhay hawlihiisa shaqo natiijo wax ku ool ah, waa mid markaas ka faa'iidaystay wakhtigiisa qaaliga ah ee soo maray. Ruux kasta oo lumiya wakhtigiisa qaaliga ah ama sugaysa guul-daro iyo qoomamayn la xidhiidha ficiladiisa Wakhti lumin.

Sidaas awgeed, shaqada & wakhtigu waa laba marxaladood oo udub-dhaxaad u ah geedi socodka nolosha & jiritaanka bani aadamka.

Sidoo kale, shaqadu waa mid qadarin iyo tixgelin ka mudan bulshada dhexdeeda.

Matalan, waxaa jira odhaahyo (hal-haysyo) lagu cabbirayo qiimaha & qaayaha ay leedahay shaqada wax soosaar iyo hal-abuur ee la qabto. Tusaale; waxaa jirta murti (odhaah) Soomaaliyeed oo ah: "Nimaan shaqeysan shah ma'cabbo".

Haddaba, odhaahdani ama murtidani waa mid Soomaaliyeed oo ka tarjumaysa faa'iidada & waxtarka ay u leedahay shaqadu dadka bani'aadamka ah.

Waana mid ku tusaysa in ruuxa shaqeysta oo kaliya ah uun u gaadhayo ujeeddooyinka & danaha uu rabo, balse ma aha mid u ruux kasta oo aan dadaal shaqo la imaan u gaadhi doono.

Ugu dambeyntii wakhtigaaga oo aad uga faa'iidaysato dadaal adag iyo hawl karnimo shaqo, waxay sahashaa in lagu gaadho natiijo & horumar la taaban karo, oo anfacda dhammaan dadka & dalkaba guud ahaan.

### Layliska 1

Su'aalaha soo socda ka jawaaba

1. Xaaladaha noocee ah ayaa lagu tilmaami karaa wakhti lumiska?
2. Ku xisaabtanka wakhti sidee ayuu ula jaan qaadi karaa horumarka dalka?

## 7.1.2 Waxqabadka-shaqo ee ku dayashada iyo bogaadinta mudan



Jaantuska 7.1. Orodyahanada Dalka- Masarat Dhafaar

- Maxay tahay macnaheedu marka la leeyahay shaqo ku dayasho mudan?
- Sheeg Amaanta (Xurmada) loo hayn karo ruuxa muujiya hawl wanaagsan oo loo bogo natiijjadeeda, islamarkaana mudan in lagu dayan karo?

Waxaa jira hawlo-waxqabad oo noocyo kala duwan leh. Nooc kasta oo waxqabad shaqana waa mid u baahan dadaal & karti adag oo la muujiyo si looga dhigo mid midha dhal ah oo lagu diirsan karo natiijo ahaan. Haddaba, ruux kasta oo ka midha dhaliya nooc kasta oo shaqo wuxuu noqdaa mid bulshada dhaxdeeda ku leh magac; sumcad iyo amaan u ku kasbaday/ku mutaystay kartida iyo adkaysiga shaqo ee u la yimid, shaqo ahaan. Sidoo kale, wuxuu ahaanayaa mid yeesha ku dayasha mudan oo lagu dayan karo dhiiranaanta iyo guulaha waxtar ee u ka soo hooyay dhaq-dhaqaaqyadiisa hawl-maalmeed ee u ku hawlan yahay shaqo/waxqabad ahaan.

Guud ahaan dadka/shaqsiyaadka wanaagsan ee ka gun gaadho hawl-maalmeedkooda shaqo maalin oo kaliya kuwa hela amaan iyo sumcad iyaga u gaar ah, balse waxay noqdaan kuwo ay bulshada iyo dalkuba ku dhaatanan ama ku faanaan natiijada & guulaha wax ku ool ee ay u soo hooyeen ummada iyo qarankooda. Matalan, muwaadiniinta dal marka ay ka qaybgalaan tartanada caalamiga ah sida Orodada, kubada iyo cayaaraha kaleba, maahin naftooda oo kaliya waxay ka wakiil yihiin, balse waxaa kale oo ay matalayaan ummadaha & dalalka ay ka soo jeedaan jinsiyad ahaan.

Sidaa daraadeed, mar kasta oo kooxi soo hoyso/ama shaqsiyaad soo hooyaan natiijo guul leh, waxay magac & sumcadba u soo hooyeen qarankooda & shucuubta dalkooda, taas ay ku muujiyaan isla guusha kadib astaamaha ama calamada dalalkooda oo ay lulaan ama huwadaan, dabaal deg farxad, iyo rayn-rayn ahaan.

Sidaas awgeed, kooxdaasi ama shaqsiyaadkaasi, waxay magac, sumcad iyo sharaf u soo jiidaan ummada, dalka iyo nafsad ahaantoodaba.

Waxayna noqdaan halyayyo ama geesiyaal lagu faano ama lagu dhaarto waxtarkooda wax ku oolka ah. Waxaa kale oo ay horsed ka noqdaan in ay da'yarta ama jiilalka yar yare e soo koraya ay kaga daydaan ficilada dhiiranaan iyo geesinimo ee ay ka soo hooyeen hawlahoodii wax qabad/shaqo. Sidoo kale guulaha iyo natiijada wanaagsan ee ay soo hooyaan geesiyaashaasi, waxay dhaxalsiisaa inay mutaystaan bogaadin, hambalyo iyo mahadnaq (Amaan) loogu abaal gudo hawlahooda waxqabad ee geesinimada leh. Hawlahaas oo kalena waxay yihiin kuwo u keena dalka koboc & horumar dhaqaale iyo mid bulshaba.

### Layliska 2

Kawada munaaqashooda qodobadan soo socda;

1. Sidee ayuu ruuxu u awoodi karaa in uu la yimaado ficilo-waxqabad oo anfici kara deegaankiisa iyo dalkiisaba?
2. Markay tahay goorta lagu sheegi karo waxqabad ama shaqo ku dayasho mudan yeelata ama lagu dayan karo la qabto?

## 7.2 Qorshaynta hawlaha waxqabad

### 7.2.1 Muhiimada jadwal diyaarinta wakhti ay u leedahay hawlaha waxqabad

- Maxay tahay faa'iidada jadwal diyaarinta wakhti ay leedahay?
- Jadwal-diyaarinta xiisaduhu waxtarka ay u leedahay ardayda sheega?

Hawl kasta oo la fulinayo ama la qabanayo waa mid u baahan in la qorshaysto ama loo dejiyo jadwal shaqo oo laga duuli karo aas'aas ahaan, si

ay hawlaha waxqabad u noqdaan kuwo u socda si habsami iyo hufnaan ahba, islamarkaana leh qorshayaal & ujeeddooyin cad-cad oo la tiigsan karo in laga sal gaadho.

Haddaba, waxaa muhiim ah in wakhtiga iyo hawlaha shaqo la isku sal-gooyo ama la isku-jaangooyo hadba hawsha iyo mudada la qabanayo/fulinayo ficilada hawlaha waxqabad. Sidaas awgeed, qorshaynta jadwalada shaqo waxay gacan ka geysanayaan in wakhtiga shaqo sida ugu habboon looga faa'iidaysto sidii natiijo wax ku ool ah looga gaadhi lahaa arrin kasta oo waxqabad. Waxaa kale oo jadwalka wakhti inaga caawin kara garashada saacadaha, maalmaha, todobaadyada, ama bilaha shaqo iyo kuwa fasaxa ah. Markaas jadwalka shaqo waa mid faa'iido balaadhan u leh ummad ama ruux kasta oo la tacaalaya hawlaha nolol-maalmeed, sida shaqaalaha ama dadka muruq iyo maskax maalka ah ee u guntaday sidii ay u dabooli lahaayeen baahidooda nololmaalmeed.

Sidoo kale, jadwalka shaqo waa mid faa'iido u leh hawlaha baris-barashada ee goobaha waxbarasho sida dugsiyada ama goobaha kale ee waxbarasho. Waayo, wuxuu u sahlayaa barayaasha & ardaydaba la socodka hawlaha waxbarasho iyo wakhtiyada loo cayimay in la galo amase laga soo baxo shaqooyinka xiisadeed.

Sidaa daraadeed, wakhtiga jadwal waa mid fududeynaya hawlaha & ficilada shaqo ee la xidhiidha gudashada iyo ka midha dhalinta wax qabad kasta oo la fulinayo.

### Layliska 3

Ka jawaaba su'aalaha soo socda

1. Qorshe shaqo oo lagu hawlgalo maxay tahay faa'iidadiisu?
2. Falanqeeya, xidhiidhka ka dhaxeyn kara wakhtiga, shaqada iyo natiijada laga fili karo?

## 7.3 Quudhsiga shaqo iyo caadaysiga nolol hawl-la'aan (ma shaqeystanimo)

### 7.3.1 Quudhsiga shaqo iyo nolol mashaqeystanimo waxyeelada ba'an (xun) ee ay u leedahay kobaca gaar ahaaneed iyo mida guud ee dalka



Jaantuska 7.2. Gaadhi gacan muruq maal

- Waa maxay waxyeelada ay leedahay shaqo-quudhsiga iyo ma'shaqaystanimadu?
- Maxay tahay cawaaqibka xun ee quudhsashada shaqo iyo ma'shaqeystanimadu ay ku keeni karaan nolosha gaarka ah iyo tan guud ee dalka?

## Hawl-karnimada shaqo

Waxaa hortaba loo baahan yahay in la ogaado, shaqa kasta oo la qabto ha noqoto mid muruq ama maskax maal ah, waa xalaal, islamarkaana mudan in la siiyo tixgalin iyo xurmayn gaar ahaaneedba fulinteeda iyo ka midha dhalinteeda, adigoo kaashanaya aqoonta, xirfada ama waaya aragnimada aad u leedahay nooca hawleed ee la qabanayo markaas, iyadoo laga faa'iidaysanayo wakhtiga & fursadaha hadba la haysto sida ugu haboon.

Dhinaca kale, waxaa wax lala yaaba ah caadooyinka iyo ficilada xun xun ee la xidhiidha yasida (quudhsashada) shaqooyinka qaarkood, iyo waliba nolosha ma shaqeysi ee ku dhisan mala-awaalnimada iyo khiyaalinimo nafsad ahaan la is aaminsiiyo taas oo ah mid xaqiiqada aad uga fog, islamarkaana ah dhalan-habaabis lagu hungoobo tiigsashadeeda. Ma'jiraan sababo macquul ah oo lagu sheegi karo shaqooyinka qaar kuwa yar yar ama kuwo waaweyn, inkasta oo ay ku kala duwanaan karaan mushqaayadaha ama dheefaha laga heli karo shaqooyinka kala gadisan. Shaqa kasta oo loo guntado in laga midha dhaliyo, waa lagu guuleysan karaa haddii dadaal adag iyo hawlkarnimo la muujiyo. Muruqaaga iyo maskaxdaada aad geliso hawl/waxqabad ha noqoto nooc kasta oo shaqo, maahin ceeb ama wax laga xishoodo (qajilo) in laga shaqeysto si aad ugu dabooshid baahidaada dhaqaale ama tan qoys ahaaneedba.

Dhaqamiyaan ama Diiniyan islaweynaantu (mutakibirnimadu) waa mid aan habooneyn in lagu kaco, waana mid xaaraan & dambi ah. Sidaas awgeed, ruux kasta oo ku kaca quudhsi (yasid) shaqo wuxuu noqonayaa mid aan mahadin talaabadaas uu ku kacay, wuxuuna dugsan doonaa caydhnimo (faqrinimo) iyo Camal-la'aan ku habsata isaga gaar ahaan iyo qoyskoodaba. Wuxuuna noqdaa mid culeys & dulsaarnimo hor leh ku keena dhaqaale ahaan qoyskooda iyo guud ahaan dalkaba. Waxaa kale oo u horseed ka noqdaa sii murginta xaalada shaqo-la'aan ee dalka ka jirtay markeedii horaba. Sidoo kale, nolosha hawlkarnimo la'aan ama ma shaqeysasho, waa mid culeys dhaqaale & mid bulshaba ku soo kordhisa xaalada nololeed ee qoyskooda gaar ahaan iyo tan guud ee dalkaba. Mashaqaysigu waa ficilo ama dabeecad aad u fool xun, waana mid qayra-masuulnimo. Xaaladani waa mid qofka ka dhigta ama hoos u dhigta damiirka & dareenka shaqsi sidoo kale, mashaqeystanimadu, waa mid uu ruuxu/qofku is aaminsiiyo nolol ama caado khiyaali ah oo wakhti lumis ah.

Haddaba, xaaladahan shaqo-quudhsi iyo mashaqaysasho, waa kuwo mala awaalnimo iyo nafla-caaridnimo ku dhisan. Waana ficilo ama talaabooyin maangaabnimo iyo doqoniimo ku abtirsada. Sidoo kale arrimahani waa kuwo khatar (halis) ku ah xaaladaha bulsho & kuwa dhaqaale ee dalka. Waxay waxyeelo u geystaan kobaca xaalada nololeed ee qoysaska iyo horumarka guud ee dalka.

Sidaas daraadeed, waxaa loo baahan yahay in laga fogaado falalkan foosha xun ee mashaqaysadnimo iyo shaqo yasid (quudhsi) waxaana loo baahan yahay in la ogaado faa'iidada ay leedahay shaqadu

ha noqoto mid sare iyo mid hoosaba. Haddaba, shaqo kasta oo la qabto, waa inay noqotaa nid niyad iyo ficil ahaabna loo qabanayo sidii loogu talagalay. Sidoo kale, shaqo kasta oo la hayo waa laga midha dhalin karaa haddii la aamino shaqo ahaan.

**Layliska 4**

Kawada hadla su'aalaha soo socda

1. Halkay ka soo jeedaa fikrada ah nolol ma shaqeysasho isla markaana wax la cuno?
2. Sidee ayaa looga hortagi karaa caadada mashaqeysi?

## 7.4 Ujeeddooyinka horumar iyo dhaqaale

### 7.4.1 Ujeeddooyinka horumar & dhaqan-dhaqaale ee lagu xusay dastuurka Muhiimada ay u leeyihiin kobaca dalka

- Maxay yihiin faa'iidooyinka ay u leeyihiin kobaca dalka, ujeeddooyinka horumar iyo kuwo dhaqaale?
- Maxay tahay faa'iidada ku jirta in ujeeddooyinka horumar & dhaqaale lagu xuso dastuurka?

Tallaabooyin kasta oo dhaq-dhaqaaq horumar waxay leeyihiin ujeeddooyin & himilooyin ah in dadweynaha laga haqab-tiro baahida adeegyada aas'aasiga ah iyo waliba sidii wax looga badali lahaa xaalada nololeed ee bulsha weynta dalka sida lawada ogsoon yahay, dalkan Itoobiya marka la bar-bar dhigo inta badan dalalka kale ee caalamka, waa dal ay la degtay aragtiyo xun oo dib-u hadhnimo iyo dulsaarnimo sumcad xun ku reebtay. Haddaba, taas iyada oo laga duulayo, ayaa waxay Itoobiya safka hore kaga jirtaa wadamada ugu hooseeya kobaca dhaqaale. Dhab ahaan xaqiiqadu iyada oo ay sidaas tahay, ayaa hadaba waxaa muhiim noqotay, in wax laga qabto xaaladan, islamarkaana laga hirgaliyo ujeeddooyin dhaqan-dhaqaale iyo kuwo horumarineed, waana tan ta sababtay in Dastuurka Jamhuuriyada Dimuqraadiga Federaalka Itoobiya, lagu xuso ujeeddooyinka horumar iyo dhaqan-dhaqaale ee la damacsan yahay in dalka laga hirgaliyo, si looga tirtiro taariikhda iyo sumcada xun ee faqrinimo iyo dib u hadhnimo ee lagu yaqaano dalka.

Ujeeddooyinkan horumar iyo dhaqaale ee la sheegayana waxaa lagu qeexay faah-faahintooda qodobka 89 ee Dastuurka J.D.F.I. kuwa ugu waaweyn ama ugu muhiimsan waxay kala yihiin sidan:-

1. Xukuumada wuxuu xil ka saran yahay dhammaan muwaadiniinta dalka sidii ay u gaadhsiin lahayd aqoonta iyo hantida laga soo ururiyay guud ahaan dalka.
2. Xukuumada waxay masuuliyadi ka saran tahay wax ka qabashada xaaladaha dhaqaale, islamarkaana baahinta (xidhiidhinta) fursadaha khayraad si ay cadaalad ku dheehan tahay, qaybaha dalka oo dhan.
3. Ka hortaga masiibooyinka dabiici iyo kuwa aadamiga ahba, haday dhacaanna si deg-deg ah wax looga qabto gargaarka & samata bixinta dadka ay waxyeeladu la soo daristay.
4. Waxay xukuumadu taakulo (taageero) gaar ah u fidinaysaa qowmiyadaha ama deegaamada dib uga dhacay xagga horumarka sababo la xidhiidha siyaasadihii dawladihii hore ee dalka soo maray.

5. Xukuumada wuxuu xil ka saran yahay in dhulka & khayraadka ku jira gacanta shacabka la hooskeena dawlada si looga dhigo faa'iidada & kobaca mid laga wada faa'iidaysan karo.
6. Xukuumada waxaa la gudboon inay dadweynaha ka qaybgaliso barnaamijyada iyo dhaq-dhaqaaqyada siyaasadeed ee qorsha dajin. Dadweynahana waxaa looga baahan yahay inay ku garab galaan hirgalinta arimahaas.
7. Xukuumada waxay masuuliyad ka saran tahay ka qayb-galinta raga & haweenka si siman, hawlaha qaran ee ku saabsan dhaqaalaha & arrimaha bulshada.
8. Xukuumadu waa inay ku dadaashaa sugida caafimaadka, amniga iyo xaalada nololeed ee shaqaalaha & shacabka.

Haddii lagu dhaqmo haddaba arrimahan la xidhiidha jihaynta hawlaha horumarineed ee lagu xusay dastuurka J.D.F.I, waxaa hubaal ah in la badali karo muuqaalka iyo aragtida xun ee dalka laga haysto, islamarkaana dadweynaha dalka looga faa'iidayn karo kobaca dhaqaale iyo dhisida nidaamka dhaqaalaha suuqa xorta ah.

### Layliska 5

Kawada hadla su'aalaha soo socda

1. Sidee ayaa looga dhabayn karaa kobcinta/ horumarka dalka?
2. Maxaa kobaca dhaqaale ee dalka loogu sheegaa inuu yahay mid dib u hadh ah?
3. Maxaa la gudboon dadka & dawladaba in la hirgaliyo ujeeddooyinka horumar iyo kuwa dhaqaale ee lagu xusay Dastuurka J.D.F.I.?

## 7.5 Hab-dhaqanka hawl-karnimada leh

### 7.5.1 Ahmiyada anshaxa & kartida xirfadeed u leeyihiin abuurista hab-dhaqan hawl-karnimo leh

- Sheega waxtarka anshaxa & kartida xirfadeed ay u leeyihiin abuurista hab-dhaqan hawl-karnimo?

Waxaa muhiim ah in la yeesho tarbiyad ama anshax wanaagsan iyo karti xirfadeed oo shaqo si loo abuuro jawi haboon oo hawl karnimo iyo waxqabad adag lagu gaadhi karo.

Akhlaaqda wanaagsan waxay ruuxa u sahli kartaa hanashada fir-fircooni iyo adkaysi shaqo oo waxtar leh.

Dhinaca kale anshaxa wanaagsani wuxuu gacan ka geystaa abuurista karti iyo xirfad shaqo oo laga dhaxlo waayo-aragnimada ama khibrada shaqo ee lagu gaadhay adaabta iyo dabeecada wanaagsan.

Haddaba, wadar ahaan anshaxa iyo kartida xirfadeed, waxay horseed ka noqdaan abuurista hab-dhaqan shaqo oo la yeesho mustaqbalka dhaw iyo kan fogba. Sidaas daraadeed, waxaa lagama maarmaan ah in la yeesho dabeecad ama anshax suuban oo ku gaadhsiin karta adkaysi shaqo mustaqbalka.

### Layliska 6

Ka shaqeeya su'aalaha sooscda

1. Sharaxa xidhiidhka ka dhexeeya hanashada hawlkarnimada shaqo iyo lahaan shaha anshaxa suuban?
2. Sidee baa kor loogu qaadi Karaa xirfada shaqo?
3. Maxay tahay kaalinta muwaadiniinta kaga aaddan inay la yimaadaan anshax wanaagsan?

## 7.5.2 Uheelanaanta in cidkale wax laga korodhsado iyo in loo boggo natijada xirfadeed ee dadka kale



Jaantuska 7.3. Xubno booqanaya beero

Sawirka maxaad ka fahanteen?

Boogaadinta xirfadaha dadka kale maxay waxtar u leedahay shaqadooda?

**Macalin Maxammed iyo Macalin Maryan**

Macalin Maxammed iyo Macalimad maryan waxay macalimiin ka kala yihiin dugsiyo kaladuwan. Ka hor intii ayna ku kulmin tababar kor loogu qaadayo xirfadooda, aqoon hore is kumaynan lahayn. Markii ay dhamaysteen tababarkii loo qaybtay, waxay fursad u heleen in ay isbartaan islamarkaana ka sheekaystaan hawlaha shaqo iyo xaaladaha baris-barashada dugsiyadooda iyagoo waaya-aragnimada mid ba kan kale ka qaadanayo. Isla goobtii ayay

Balan ku kala qaateen si ay isku soo booqdaan iyaga iyo ardaydooduba. Hadaba, maalmo kadib, ayuu macalin Maxammed isaga oo wada ardaydiisii booqasho khibrad koradhs-aaddeen dugsigii Macalimad Maryan iyaga oo ka duulaya martiqaad horay loogu fidiyay. Markay soo gaadheen halkaas waxaa ku soo dhaweeysay Macalimad Maryan iyo ardaydeedii oo si wanaagsan u qaabilay, islamarkaana lagu soo wareejiyay qaabaha kala duwan ee dugsiga si ay khibtad uga karodh sadaan. Hadaba, isla markii, ay booqashada ku joogeen dugsiga maryaniyo, waxay la kulmeen arday dugsiga ka qalin jabinaysay xiligaas, kuwaas oo wax ka baranayay qaybta xirfadaha iyo tababarada dugsiga sida xirfadaha farsamo ee alwaaxda iyo Biraha, dawaarlanimada, korontada iwm

Dugsigu waxuu u diraa tababaro sare kuwa keena natiijo wanaagsan. Kuwa kalena, waxaa loo fududeeyaa sidii ay iskood shaqo, u abuur u sameysan lahayeen, iyaga oo ka-faaid aysanaya aqoontii iyo anshaxii wanaagsanaa ee shaqo-abuur ka heleen intii ay dugsiga wax ka baranayeen.

Mudane Maxammed iyo ardaydiisuba su'aalahii ay wax ka waydiiyeen, waxaa laga siiyay faahfaahin iyo sharaxaad dheeraad ah. Maxammed oo ardaydii dugsiga ay booqashada ku joogeen uga sheekaynaya shaqadiisa iyo xirfadiisa, ayaa sheekaynaya shaqadiisa iyo xirfadiisa, ayaa waaya aragnimadiisa la wadaagay.

Ugu dambaystii, Maxammed iyo Ardaydiisii oo la dhacsan sida qalbiga furan ee loogu soo dhaweeyay dugsiga, ayaa halkaas mahadnaq iyo bogaadin uga soo jeediyay dugsiga. Martida loo ahaa. Sidoo kale waxay amaan uga soo jeediyeen waxqabadka wanaagsan ee dugsigu facigay Waxayna soo afjareen booqashadii iyagoo dhinacoodana u fidiyay martiqaad Marwo Maryan iyo arday deeda inay ku yimaadaan booqasho khibrad korodhsi dugsigooda

## Hawl-karnimada shaqo

### Layliska 7

Indinka oo ka duulaya sheekada ka jawaaba su'aalaha soo socda

1. Maxay labada martiqaad martigaadka booqasho iskugu fidiyeen?
2. Macaalin Maxammed iyo ardaydiisu booqashada maxay ka karodh sadeen saseen?
3. Maxay tahay faaidada laga helayo inuu midba soo booqdo xirtadaha shaqo ee kan kale, islamarkaana amaan u soo jeediyo dhinaca kale?

In loo diyaar garoobo wax ka barashada dadka kale, islamarkaana layeesho dhaqan loogu hambalyeeyo waxqabadka wanaagsan ee qaybaha kale ee bulshadu, waa aas'aaaska in layeesho hab-dhaqan hawlkarnimo.

Sida lawada ogsoonyahay, dadku dhamaan malaha xirfado iyo kartiyo isku mid ah. Mid baa macalin noqon kara, midkale ayaa nijaar noqon kara, halka uu mid kalena ka noqon karo shaqaale xafiis. Sidoo kale, mid baa ganacsade ama Injineer noqon kara, halka uu mid kale ka noqon karo xirfadle caafimaad. Dal wuxuu kobci karaa oo kaliya marka ay muwaadiniintiisa leh xirfadaha kala duwaan si wadajir ah ugu hagar-baxaan sidii loo horumarin lahaa dalkooda. Muwaadin kasta shaqada u gacanta kuhayo waxay door weyn ku leedahay kobcinta horumarka dhaqaale ee dalka. Hadaba si kaalintooda horumar loo kobciyo, waxaa loo baahanyahay in la xurmeeyo, islamarkaana la bogaadiyo xirfad kasta oo shaqo. Muwaadiniintuna, waxaa laga filayaa inay xirfadlayaasha aqooneed ka korodh sadaan waaya-aragnimada xirfadeed, islamarkaana uga faaideeyaan laf ahaantooda shaqo sida ugu haboon loogu gudbiyo cida shaqada wanaagsan, waxaa hubaal ah in uu ruuxaasi maalin ba maalinta ka sii dambaysa si laban-laabi doono dadaalkiisa waxqabad, sidaasna ay bogaadintu saamayn wanaagsan ku yeelanaysa waxqabadka shaqo. sidaas awgeed, dawlada iyo bulshada ba waxa laga rabaa inay xirfadaha iyo xirfadlyaasha u abuuraan jawi haboon iyagoo dhiirigalinaya, islamarkaana dhawraya xurmada ay mudan yihiin.

### Layliska 8

Kajawaaba su'aalaha soo socda

1. Sidee buu dal ugu kobcaa shaqada?
2. Maxay tahay faaidada laga helayo bogaadinta xirfad iyo aqoon korodhsiga laga helayo dadka kale?
3. Wax dhaafsan bayaad inta xirfadaha iyo xirfadlayaasha, maxaad dawlada u soo jeedin lahaydeen inay latimaado si loo gaadho heer wanaagsan

## Gunaanadka Cutubka 7aad

Sida aad horey ugu soo barateen cutubkan dhaxdiisa, waxaa muhiim ah in la qabto hawl ama waxqabad wanaagsan oo waxtar u yeelan karta nolosha gaarka ah, tan qoyska iyo guud ahaan kobaca dhaqaale ee dalka. Waxaana haboon in hawlaha shaqo lagu salgooyo wakhtiga si ay hawlaha waxqabad u noqdaan kuwo habaysan oo leh qorshayaal iyo jadwalo lagu xisaabtami karo ka midha dhalinta hawl kasta oo la rabo in laga gaadho natiijo iyo yool wanaagsan. Marka shaqa kasta laga soo hooyo natiijo waxtar leh, waxaa ruux ama qof kasta oo ka dambeeyay guushaas shaqo noqdaa mid yeesha sumcad iyo magac wanaagsan, islamarkaana kasbada amaan, bogaadin iyo mahad naq looga soo jeediyo deegaanka & dalka guud ahaan. Wuxuuna noqdaa mid tusaale wanaagsan u noqda bulshada qaybaheeda kale.

Dhinaca kale, waxaan horey u soo baranay waxyeelada & dhibaatooyinka ay leeyihiin ficilada xun ee caajiska iyo fadhi ku dirirnimada shaqa-quudhsi ama mashaqeysi u leeyihiin heerka nolosha gaar ahaaneed, tan qoys iyo tan guud ee dalka . Dhaqamada noocan ahina waa kuwo ka dhan ah hawlaha horumar ee lagu doonayo in lagu cidhibtiro saboolnimada iyo dib u hadhnimada dhaqaale ee dalka la degtay mudada fog. Shaqsiyaadka noocan ahina waa kuwo ku dambeyn doona dulsaarnimo iyo faqri ay dugsadaan. Haddaba, waxaa loo baahan yahay in laga foojignaado ficilada mashaqeystanimo iyo tan shaqa-quudhsi ee lidka ku ah wax soo saarka & dhaqaalaha dalkaba.

Dhanka kale, dalkan Itoobiya waa mid muddo dheer ay la degeen dagaalo, abaaro iyo dib u dhacnimo dhaqaale, taasina waxay ku reebtay raad xun oo u soo jiiday sumcad & magac xun indhaha caalamka horteeda. Sidaas awgeed, waxaa la dejiyay qorshayaal iyo barnaamijyo horumarineed oo meesha lagaga saarayo magaca xun ee dalka lagu yaqaano ee saboolnimada iyo dib u hadhnimada. Haddaba, waxaa dastuurka J.D.F.I lagu xusay ujeeddooyinka lagu hagayo dhaqaalaha & horumarka dalka si bulshada looga haqab-tiro baahida dhaqaale iyo ta bulsho ee ay qabaan, islamarkaana loo gaadhsiiyo si siman dhammaan qaybaha dalka oo dhan. Fulinteedana wuxuu xil gaar ah ka saran yahay xukuumada. Sidoo kalena, waxaa shacabka laga sugayaa inay ku garab-galaan xukuumada hirgalinta ujeeddooyinkaas kor lagu xusay iyo waliba sidii looga midha dhalin lahaa

## Ereyada furaha u ah cutubka 7aad

| | |
|---|---|
| Saaqid: | mashaqaystaha, dibjir |
| Kacaakuf: | daalaa dhaca nolol-maalmeed. |
| Faaidada: | waxtar |

## Laylisyada guud ee Cutubka 7aad

### I. Ku qor "Run" ama "Been".

1. Waxaa haboon in xirfad kasta iyo xirfadlayaasha oo dhan la siiyo qiimo & xurmo isku mid ah.
2. Dalka ay dadkiisu leeyihiin kartida iyo adkaysiga shaqo, waxaa yaraanaysa khatarta/halista masiibooyinka aadamigu sababo ay leedahay.
3. Koritaanka dalka waxaa la heli karaa oo kaliya marka la abuuro xirfado farsamo oo aad u sareeya.
4. Ma haboona inaad xirfado kale ka soo korodhsato dad kale.

### II. Isku aaddi erayada ku kala hoos qoran xarfaha "B" iyo "T".

| B | T |
|---|---|
| 1. Boggaadin | b) Faa'iidada camalka wanaagsan ee la qabto. |
| 2. Karti | t) Xil gudasho la'aan |
| 3. qooma'mayn | j) Ilmaha ugu horeeya |
| 4. Ajar (Liibaan) | x) Ammaan loo fidiyo soo hoynta natiijo wanaagsan. |
| 5. Dhicis | kh) Khibrada & Aqoonta laga helo xirfadaha shaqo. |
| | d) Wax dhammaaday ama dhaafay oo laga shalaayo. |

### III. Buuxiya Meelaha Banaan.

1. Hortaba waxaa loo baahan yahay in la sameysto _______ lagu hawl galo si loo fuliyo shaqada wakhtiga loogu tala galay.
2. ______ iyo ______ waa caadooyin xun xun oo waxyeela ku keeni kara horumarka dalka guud ahaan.

### IV. Ka dooro jawaabta saxda ah.

1. Koritaanka dalka si loo xaqiijiyo
   b) waa in la ogaadaa shaqa la'aan la iska noolaado uuni inay tahay caado (dhaqan) xun.
   t) Dhammaan muwaadiniintu waa inay helaan fursada shaqo oo siman.
   j) ujeeddooyinka dhaqaale waa in ficil lagu muujiyaa.
   x) Dhammaan.

2. Marka la leeyahay muwaadinku wuxuu qabtay shaqo lagu dayan karo
   b) Waa marka u magac & sumcad lagu faani karo u soo hooyo ummadiisa & dalkaba.
   t) Waa marka uu hay'ad samafal aas'aaso.
   j) Waa marka uu ka qayb-galo tartanka ciyaaraha Olombika.
   x) Waa marka magaciisa si deg-deg ah looga maqlo Raadiyaha iyo Jaraa'idka.
3. Si loo abuuro hab-dhaqan shaqo oo qoto dheer:
   b) waa in la bulshada laga dhiso xaga wacyigelinta
   t) waa in la tir-tiro caadooyinka xun ee shaqo quudhsiga iyo kala qoqobnaanta shaqo ee raga&haweenka,
   j) waan lai sku dhafaa xirfada iyo anshaxa shaqo.
   x) dhamaan
4. Saldhiga ujeeddooyinka dhaqaale ee dalka waa;
   b) Bulshada oo si isku mid ah looga faa'iideeyo hantida dalka.
   t) Taakulo gaar ah oo loo fidiyo qowmiyadaha dib uga dhacay xaga horumarka
   j) Xaalada dhaqaalaha dadweynaha dalka oo kor loo qaado.
   x) Dhammaan.
5. dhibaatooyinka bulsho ee loo baahan yahay in dalkeena laga cidhib-tiro:
   b) mashaqaystanimada iyo dawarsiga.
   t) dadka kale oo wax laga korodhsado iyo bogaadinta kuwa mutaysta
   j) xoojinta shaqo.
   x) dhamaan

## V. Ka bixiya Jawaabo kooban.

1. Marka la leeyahay shaqadu ma laha mid yar iyo tu wayn maxay tahay?
2. Maxaa lagu qeexi karaa dulsaarnimada?
3. Maxaa loola jeedaa marka la leeyahay wakhtiga sida ugu haboon ha looga faa'iidaysto?

CUTUBKA 8

# Isku Filaanshaha

Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Dareemaan faa'iidada ay leedahay in naftaada laga illaaliyo nooc kasta oo dulsaarnimo ah islamarkaana naftaada sharaf ama ixtiraam la siiyo.
- Gartaan waxyeelada uu leeyahay ka ganacsiga kootarabaanku.
- Dareemaan muhiimada ay leedahay isku-kalsoonidu.

## 8.1 Ka bixitaanka dulsaarnimada (ka samata-baxa dulsaarnimada)

### 8.1.1 Ka xorowga dulsaarnimo iyo dhawrista sharaf



Jaantuska 8.1. Naafanimadu kaama hor istaagayso isku filaansho

- Maxay kaga duwan tahay sharaftaada oo aad dhawrto isla weynimada?

Marka la leeyahay kor u qaadistaada sharaf, kama dhigna macnaheedu in islaweynimo la muujinayo. Balse, waa xaalad lagu sugayo sumcada & karaamada aad mudan tahay qof/ruux ahaan, islamarkaana waa xaalad aad ku muujinayso inaadan ruuxna ka hooseynin muuqaal magac iyo maskax ahaanba. Sidoo kale dhisida ama kor u qaadista sharafta aad leedahay waa mid kuu sahlaysa inaad ka-xor noqoto karti darada, isxaqirid (xaqirid), dul saarnimada iyo kalsooni daro ku soo wajahda ama ku soo food-saarta. Sugitaanka sharaf wuxuu ruuxa ka caawiyaa inuu noqdo mid yeesha karti, Ad-adayga, fir-fircooni, iyo kalsooni uu ku hanan karo mustaqbalkiisa ujeeddooyinkiisa dhaqan-dhaqaale, bulsho iyo kuwa siyaasadeedba. Ruuxa dhisa sumcadiisa sharaf, wuxuu leeyahay cad-caddaan, hal-abuur, dhiiranaan iyo kalsooni u ku qabo hawl kasta iyo waxkasta oo uu rabo inuu ku kaco ama falo. Wuxuuna ruuxu ku dadaalaa inuu difaacdo ama soo ceshado ugu horeynba sharaftiisa gaarka ah, kadibna u sameeyo isdhaxgal uu la yeesho dhinacyada kale ee uu xidhiidhka shaqo iyo bulsho la leeyahay. Dhinaca kalena wuxuu dhankiisa yeelaa inuu aqoonsado sumcada &

sharafta ay mudan yihiin qaybaha kale ee u macaamilka bulsho & shaqo la leeyahay.

Haddaba, in la helo kalsooni isku filaan oo lagaga maarmo dulsaarnimo iyo yasid (xaqiraad) la mutaysto, waxaa haboon in marka horeba la sugo ama la ilaaliyo sharafta iyo haybada gaar ahaan ee ruuxu mudan yahay. Kadib marka lagu guuleysto in la sugo sumcada & sharafta la mudan yahay, ayaa la abuuri karaa karti kalsooni iyo hal abuurnimo lagu kobciyo xaalada dhaqan-dhaqaale, bulsho & ta siyaasadeed ee nolosha gaarka ah iyo mida guud ee dalkaba.

### Layliska 1

Kawada xaajooda su'aalaha soo socda

1. Sheega dabeecadaha qofka (ruuxa) dhawra sumcadiisa sharafeed?
2. Maxay kula tahay inuu falo; haddii uu ruuxa dhawra sharaftiisa u khalad galo ama khaldamo?
3. Dadka ilaaliya sharaftooda gaar ahaaneed, maxay u necebyihiin baryada & sharaf-darada?

## 8.1.2 Ka Xorowga dulsaarnimada iyo isku filaanta

Dulsaarnimada oo laga kaaftoomo islamarkaana laga xoroobo, waxay la mid tahay iskufilaan la gaadhay. Iskufilaanimaduna waa xaalad lagaga maarmo ku tiirsanaanta dhinac kale sida dhaqaale, bulsho, ama siyaasad ahaan. Waana mid ay dadku iskood iskugu tashadaan sidii ay xaalada nolol maalmeedkooda u maareyn lahaayeen ama u dabooli lahaayeen baahidooda nolol maalmeed iyaga oo kaashanaya aqoonta, khibrada, awooda iyo khayraadka (hantida) ay hadba haystaan.

Haddaba, dadku markay iskood iskugu tashadaan, iyaga oonan cid kale ama dhinac kale wax ka sugin, waxaa hubaal ah in ay mustaqbalka gaadhi doonaan isku filaansho dhinacyo badan taabanaya haday tahay xaalad dhaqaale, bulsho ama mid siyaasadeedba. Sidaas awgeed, mar kasta oo iskufilaansho la abuurana waxaa meesha ka baxaya baahidii dulsaarnimo ama ku tiirsanaan ee loo qabay xaalado ama arimo gaar ah. Sidoo kalena markasta oo ku tiirsanaan (dulsaarnimo) laga baxana, waxaa la gaadhayaa in la dhawro sharafta & sumcada gaar ahaaneed, iyo waliba tan guud ee deegaan ama dalba.

Markaas, dulsaarnimada & iskufilaanshuhu, waa laba xaaladood oo lid isku ah.

Taas waxaan ula jeednaa haddii ay jirto xaalad dulsaarnimo, markaas waxaanan meesha ka jirin xaalad isku filaan. Sidoo kale, haddii u isku filaansho meesha ka jiro, dulsaarnimadu wax aan meesha ka jirin ayay noqonaysaa.

### Layliska 2

Kawada hadla su'aalahan soo socda

1. Maxay tahay dulsaarnimada oo laga kaaftoomo?
2. Maxay ka dhigan tahay iskufilaanshanimadu?

## 8.1.3 Ka xorowga/ka samata-baxa dulsaarnimada waxtarka uu u leeyahay kobaca dhaqaale & midka bulsho, iyo waliba dhismaha muwaadinka wanaagsan

### Dalka Jarmalku Sidee ayuu uga soo kabtay bur-burkii ka soo gaadhay Dagaalkii 2aad ee Dunida

Sida lawada ogsoonyahay dalka Jarmalku waa mid ka mid ah wadamadii ka qayb galay dagaal weynihii labaad ee Dunida, kaasoo socday muddo ilaa lix-sano ah. Haddaba, dagaalkaasi wuxuu ahaa mid lagu hoobtay oo galaaftay nolosha iyo hantida malaayiin dad ah. Wuxuuna ku reebay dunida raad xun oo aad u waxyeeleeyay dhammaan dunida, siiba gaar ahaan wadamadii sida tooska ah ugu lugta lahaa ee reer yurub. Dalka Jarmalkuna wuxuu ahaa mid qayb libaax ka qaatay hurinta colaadaas iyo dagaalkan saamaynta xun ku keenay dhaqaalaha & arimaha bulsho ee dunida, gaar ahaana kuwa dalkiisa oo sobobay burbur dhaqaale, bulsho iyo mid siyaasadeedba.

Sobobahaas dagaal awgeed, dalka iyo dadka Jarmalkaba waxaa soo wajahay burbur dhaqaale & mid bulsho oo ka dhashay colaadii u huriyay Naasigii Hitler oo ahaa hogaamiyihii dalka Jarmalka wakhtigaas. Dhammaadkii dagaalkii 2aad dad badan oo reer Jarmal ah waxay noqdeen kuwo caydh ah oonan awoodi Karin inay nolol ahaan isku filaadaan, waxayna noqdeen kuwa ku tiirsan gargaarka iyo mucaawino loo fidiyo. Taasna waxay waji gabax ku noqotay dad badan oo reer Jarmal ahaa oo lahaa karti iyo ad-adayg hawl karnimo.

Hase ahaatee, mudo yar oo toban sano kadib ah waxay dadka Jarmalku ku guuleysteen inay boodhka & tiifta ka soo gaadhay dagaalkii labaad ee dunida, iska jafaan ama ka soo kabtaan khasaaraha iyo burburka ku habsaday iyaka.

Markaasna, waxay ku guuleysteen inay dib u dhisaan kaabayaashii dhaqaale, bulsho iyo horumar ee uu ku leeday dagaalkii. Waxaana dib loo dhisay goobihii & ilihii dhaqaale sida warshadaha, ganacsiga, gaadiidka, jidadka, adeegyada bulsho, adeegyada caafimaad, kuwa waxbarasho, IWM. Ugu dambeyna waxay noqdeen kuwa ka dhiga dalkooda Jarmalka kan ugu dhaqaale weyn dhammaan dalalka Yurub. Sidoo kale waxayna noqdeen kuwa muujiya karti iyo dhabar-adeyg shaqo oo ka saaray Jarmalka tiifta iyo raadka xun ee u dagaalku soo gaadhsiiyay. Jarmalku manta waa mid ka mid ah wadamada qaniga ah ee caalamka.

Waxayna taas ku gaadheen dadaal, karti iyo dhiiranaan muwaadinimo oo ay la yimaadeen. Haddaba, cid kasta oo la timaada dadaal & rabitaan lagu doonayo in la noqdo kuwo ka baxa dulsaarnimada, islamarkaana noqda kuwo isku filaan gaadha.

### Layliska 3

Kawada hadla qodobadan hoos ku xusan;

1. Dalka Jarmalka maxaa ugu wacnaa inuu ka soo kabto burburkii dhaqaale & bulsho ee ka soo gaadhay Dagaalkii labaad ee Dunida?
2. Maxay tahay waxa lagaga dayan karo dadka reer Jarmal?

### 8.1.4 Kontara-baanka & Dareenka ku tiirsanaanta



Jaantuska 8.2. Qoys ka wada hadlaya Dhibaatooyinka Kotorobaanka

- Maxay tahay waxyeelada u kontarabaanku ku keeno dhaqaalaha iyo nolosha bulsho ee dalka?

Kontarabaanku hortaba waa ganacsi sharci dara ah. Markaas wax sharci dara ahina waa la garan karaa dhibaatada iyo waxyeelada u leeyahay.

Haddaba, ganacsiga sharci darada ahina waa mid ka baxsan sifa kasta oo sharci ah. Waxyeelada koobaad ee u kontarabaanku ku keeno dalka waa tan dhaqaale. Dawladu waxay ku waydaa canshuurtii dakhli ee soo gali lahayd kharash ahaan. Kadibna, waxaa yaraanaya adeegyadii bulsho ee ay xukuumadu siinaysay dadweynaha, waayo, dawladu kharashka kama keento meel kale, balse ilaha-dhaqaale ee ay leedahay waa dakhliga ka soo gala canshuuraha ay saarto mushaarooyinka iyo ganacsiyada kala duwan ee ka jira dalka.

Dhinaca kale, ganacsiga sharci darada ahi wuxuu raad xun ku reebaa bulshada ku lugta leh kontarabaanka iyo kuwa la macaamila ganacsigaas sharci darada ah. Hortaba, bulshadaasi waxay noqonayaan kuwa dulsaar ku ahaada kontarabaanka ka ganacsigiisa. Marka labaadna, khasaare ayaa ka soo gaadha haddii lagu qabto kontarabaanka uu dalka soo gelinayo, waayo wuxuu soo geshay hanti badan oo aan laga maarmi Karin in lagaa qaato.

Guud ahaan ganacsiga sharci darada ahi waa mid waxyeela nolosha qoysas badan oo bulshada ka tirsan. Sidoo kalena, wuxuu waxyeelaa dhaqaalaha iyo horumarka dadka iyo dalkaba. Sidaas awgeed, waxaa loo baahan yahay dad & dawladba in lala dagaalamo ganacsigaas islamarkaana bulshada laga wacyigaliyo khasaaraha u leeyahay ganacsiga noocaas ahi. Sidoo kale, waxaa xukuumada la gudboon inay u fududayso dadweynaha sidii ay u abuuran lahaayeen ganacsi sharciyaysan oo wax ka badali kara nolosha qoysas badan, islamarkaana dakhli soo gelin kara dalka.

**Layliska 4**

Kawada hadla su'aalaha soo socda;

1. Sheega noocyada waxyeelo ee u koontarabaanku keeni karo?
2. Sidee loola dagaalami karaa kontarabaan?

## 8.2 Isku Kalsoonaanta

### 8.2.1 Abuurista dareen isku kalsoonaan

- Maxay tahay faa'iidada isku kalsoonaan?
- Maxay tahay in la sameeyo si loo abuuro isku-kalsoonaan?

Kalsoonidu waa xaalad aad muhiim ugu ah ruuxa bani aadamka ah. Waayo, kalsoonidu waa tan ka

caawisa qofka inuu yeesho dareen dhiiranaan iyo fir-fircooni dheeri ah u ku guro hawlihiisa nolol-maalmeed. Isku-kalsoonaantu waa tan ruuxa awoodsiisa inuu kaga faa'iidaysto maskaxdiisa, muruqiisa, maalkiisa, kartidiisa, ama xirfadiisa aqooneed, isaga oonan dareemin wax qajilaad, cabsi ama xishoodba. Ruuxa leh kalsooni buuxda, waxaa u hawlkasta oo u qabanayo ka muujiyo fir-fircooni & dhiiranaan dhaq-dhaqaaq. Haddaba, isku kalsoonidu waxay ruuxa ka caawisaa inuu noqdo mid leh karti, cod karnimo, cadcadaan, fur-furnaan IWM.

Sidoo kale, ruuxa kalsoonida isku qaba waxa weeyi mid aanan wax mubdi ah aanan gelin hawl-maalmeedkiisa shaqo ama wax-qabad. Wuxuuna noqdaa mid sida ugu haboon wax u guta oo wakhtigiisa hawleedna sida ugu fiican ayuu u gutaa.

Haddaba, isku kalsoonaantu waxay dadka gaadhsiisaa inay noqdaan kuwa iskufilan oo yeesha karti iyo fir-fircooni shaqo oo ay wax kaga badalaan noloshooda qoys iyo tan guud ee dalka.

## Layliska 5

Kawada hadla qodobadan soo socda;

1. Sheega astaamaha isku kalsoonaan
2. Waa maxay faa'iidada ay leedahay isku kalsoonidu?

### 8.2.2 Faa'iidada ay isku kalsoonidu u leedahay kobaxa qoys iyo tan dalkaba

Faa'iidooyin aan la soo koobi karayn ayay isku-kalsoonidu u leedahay nolosha qoyskaaga gaar ahaan iyo guud ahaan kobaca horumar iyo dhaqaale ee dalka.

Kalsoonidu waxay dadka u horseedaa hawl karnimo iyo dhiiranaan ay u hayaan hawlaha & ficilada ay qabanayaan wakhti kasta. Kalsoonidu waxay ruuxa ka dhigtaa inuu noqdo mid yeesha go'aamo & talaabooyin oo u aayihiisa bulsho iyo dhaqaaleba kaga tashanayo, isaga oonan cidna waxba ka sugin. Sidoo kale, wuxuu noqdaa mid ku fogaada dulsaarnimada & caadooyinka xun-xun ee dib u hadhnimada ah.

Ruuxa kalsoonida buuxda qaba wuxuu noqdaa mid intabadan ka midha dhaliya hawlihiisa waxqabad. Kadibna ku filaada nolosha qoyskiisa, islamarkaana wuxuu noqdaa mid ku dayasho fiican u horseeda bulshada dalka sidii ay kor ugu qaadi lahaayeen noloshooda iyo horumarka dalkaba guud ahaan.

## Layliska 6

Kawada xaajooda su'aalahan soo socda;

1. Waa maxay waxtarka ay kalsoonidu leedahay?
2. Ma sheegi kartaan bulshada qaar lagu sheegi karo inay kalsooni leeyihiin?

## Isku Filaanshaha

### Gunaanadka Cutubka 8aad

Ardayeey, waxaan filayaa inaad ka dheregsan tihiin, waxyaabaha aynu horey ugu soo baranay cutubkan oo kala ahaa dulsaarnimada oo laga baxo inay faa'iidooyin bulsho & dhaqaalaba u leedahay dadka & dalkaba. Sidoo kale, waxaynu soo baranay xaaladaha iskufilaansho iyo waxtarka uu u leeyahay bulshada & dhaqaalaha dalka, sidii kor loogu qaadi lahaa kobcintooda. Sidoo kale, waxaynu ka soo sheekaynay faa'iidooyinka ay isku-kalsoonaantu u leedahay kobaca & horumarka dalka.

### Ereyada furaha u ah cutubka 8aad

| | |
|---|---|
| Xarnimo: | madax-banaanida dhawrsoon |
| Keelaha/jidgooyada: | meelaha lagu hubiyo gawaadhida dulka la soo galooyo |
| Xishood: | qajilaad, shir ka nax. |

## Layliska Guud ee Cutubka 8$^{aad}$

I. Weedhaha soo socda tii sax ah, ku qor 'Run' taan sax ahayna ku qor 'Been'

1. Kalsoonida marka la kasbado, kadib waa mid waligeedba jiraysa
2. Hadii aynu ogaano dhinacyadeena adag iyo dhinacyadeena liita, umma dabcayno dhaliilaha qaldan ee ay dadka qaar noo soo jeediyaan
3. Afkaartaada oo si cad oo toos ah loo dhiibto, waa astaan ka mida kulsoonida
4. Ruuxa isa sharfa, waa niid islaweyni leh
5. Koontarabaanku waa caddowga bulshada caalamka

II. Isku-aaddiya weedhaha ku kala, hoos qoran xarfaha 'B' iyo 'T'

| B | T |
|---|---|
| 1. Qafka wax ka barta khaladkiisa | b) caddeynta-ka lsooni-daro |
| 2. Isa-sharfin | t) caaqil |
| 3. Isku filaan | j) afkaarta oo aan si cad loo dhiiban |
| 4. Xishood | x) isku-kalsoonaan |
| | kh) xoriyada is-jahaynta qofka |

III. Su'aalaha soo scoda ka doorta jawaabta saxda

1. Abuurista isku kalsooni, waa in
   b) waxaa loo baahnayahay in la ogaado aqoontaada, islamarkaana la kobciyo
   t) xaqiiqada oo la aqbalo
   j) qoriiqada oo la aqbalo
   x) dhamaan
2. Dadka rabba inay gaadhaan is ku filaan
   b) naftooda uun bay wax u taraan kaliya
   t) qoyskooda kaliya uun bay wax u taraan
   j) waxay wax u taraan dalkooda, qoyskooda iyo shaqsiyadooda
   x) waxba faaido malaha
3. Kalsoonidu
   b) waa mid lagu kasbado hadba kobaa aqoonta
   t) waa mid lagu kasbado ururSigа hanti badan
   j) waa mid lagu quudhsado dadka kale
   x) waa mid saameyn weeyn ku leh, kobcinta shagsiyadaada

4. Dadka leh aragtida dulsaarnimo?
   b) waa kuwo culeys ku ah dalka
   t) waa kuwo culeys ku ah qoyskooda
   j) waa kuwa cidhidhyan
   x) dhamaan
5. Ganacsiga koontarabaandhigu:
   b) waa ficil waxtar u leh kuwa ka ganacsada
   t) waa mid qalalaase u keena bulshada iyo dhaqaalaha ba
   j) waa mid horseeda fidinta musuq maasuqa
   x) 't' iyo 'j' ayaa ah jawaabo

## IV. kuwan soo socda, buuxiya meelaha banaan

1. Cida la kulanta koontarabaa la soo gelinayo ee u soo sheegta cid ay khuseyso waxaa la siiyaa gunno _____________ layidhaahdo
2. ______________ cida ka xorowda waxay yeelan aragti madax bayaan
3. ______________ waa lahaansha ha aragti toosan oo ku wajahan naftaada xaalad kasta oo aad ku jirto

## V. Su'aalahan soo socda, jawaabo koo kooban ka bixiya

1. "cida aan isku filayn, xor maaha" marka la leeyahay, maxaa loojeeda.
2. Isa-sharfintu maxay ka dhigantahay?
3. Sheega alaabada koontarabaandhiga ah ee dalka lagu saaro, shan ka mida.

CUTUBKA 9

# Kaydsashada

Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Dareemaan muhiimada uu leeyahay dhaqanka kaydsiga oo la yeesho.
- Fahmaan in ay faa'iido leedahay in qorshe iyo kolba taagtoodu sida ay saamaxdo la isku-maamulo ama loo noolaado.

## 9.1 Kaydsashada

### 9.1.1 Muhiimada ay kaydsashadu leedahay

- Maxaa loola jeedaa marka la leeyahay wax-kaydsigu waa muhiim?
- Faah-faahiya faa'iidada wax kaydsashadu ay u leedahay dalka, ka sokow tan gaar ahaaneed.

Sida aad ogsoontihiin hab-dhaqanka wax kaydsashadu waa dabeecad aad u muhiim ah, marka la eego dhinaca xaaladaha heerka nololeed ee qaybaha kala duwan ee bulshada. Waayo, waxa ama hantida dheeriga ah ee aad sida haboon u kaydsio, waxay ku anfaci doontaa mustaqbalka dhaw ama kan fogba. Dhinaca kale, dabeecadaha israafka ah (wax-kaydsasho la'aan) waa kuwo aad ugu xun xaalada dhaqaale ama bulsho ee qoysaska iyo dalkaba. Matalan cimilada dunidu waa mid aan deganayn oo isbad-badalaysa dabeecad ahaan, markaas haddii ay dhacdo inaad midha-wanaagsan aad ka soo goosato beeraha, waxaa haboon in aad si haboon u qorshaysid inta kugu filan wakhti xaadirka, islamarkaana inta dheeriga ahna aad dhigtid meel haboon oo lagu kaydsan karo mustaqbalka, si looga maarmo baahi (macaluul) ku soo food-saarta, haddii aan la helin wakhti roobaadkii, oo baaqdo "inuu ka curto xiligiisii".
Sidaas awgeed, wax kaydsigu waa dhaqan haboon oo in la barto ay tahay si looga kaaftoomo baahi ama dulsaarnimo kula soo darista.

Haddaba, kaydsashadu waa hab-dhaqan u wanaagsan xaalada nolosha qoyska iyo dhaqaalaha dalkaba. Waana mid ka samata bixinaysa inaad noqoto dulsaar, islamarkaana ku gaadhsiinaysa isku filaan dhan kasta ah oo lagaaga dayan karo.

**Layliska 1**

Ardayeey, Deegaanadiina ama goobaha aad degentihiin, ficilada xun xun ee horseedi karaya faqrinimo, ee aad isleedihiin way ka jiri karaan agagaarkiina, kawada hadla koox-koox ahaan fasalka dhexdiisa.

## 9.2 Qorshe iyo inta karaankaa oo lagu socdo

**B. Karaankaa (itaalkaa) oo la noolaado**

Inta tamartaa ay tahay oo la noolaado waxay kuu sahlaysaa inaad ka reebanaato bixinta

kharashyo dheeri ah, islamarkaana waxaad awood u yeelan doontaa inaad hanti iyo maal (lacag) aad kaydsan karto si aad mustaqbalka kaw iyo kan fogba ay ku anfacdo. Haddii taas lagu guuleystana, waxaa la gaadhayaa in u ruuxu si fudud (dhib yar) u maaraysan karo noloshiisa wakhtiga xaadirka ah iyo tan mustaqbalkaba. Sidoo kalena, taasi waxay anfaci doontaa deegaankaaga iyo dalkaba guud ahaan.

Dhinaca kale, dadka aan lahayn lahayn kartida xisaabtan, waxay dusha u ridan doonaan culeys dhaqaale, sida dayn aysan si fudud iskaga bixin karin, sababta oo ah waxaa u daynsanayaa hanti & maal ka badan inta ay tamartiisu (Itaalkiisu) yahay.

Wuxuuna isku hawlayaa gadashada alaab aansan munaasab ahayn marka laga eego heerka nololeed ee u ku jiro wakhtigaas. Wuxuuna ku hamiyaa hanti ka baxsan ama ka badan tan dakhli ee nolol-maalmeedkiisa. Sidaas awgeedna, wuxu qarka had iyo jeer u saaran yahay halis ama khatar qalalaase dhaqaale. Sidoo kale, waxaa ku habsada dareen ah islayaraan (yasitaan) oo nafsadiisa ka qaba. Mana helo farxad & qanacsanaan nololeed waligii.

Isticmaalka lacagtuna waa mid u baahan aqoonta ama kartida wax-kaydsasho. Siyaabaha loo kaydsado lacagtuna waa mid ay ku kala duwanyihiin shaqsiyaadku iyo mujtamacyaduba.

Tusaale, dadka qaarkii waxay ku dadaalaan sidii ay lacag marnaba uga dhamaanin, waayo waxay u baahan yihiin alaabo joogta ah inay hadba soo iibsadaan.

Sidoo kale, waxay dadka qaarkii ku dadaalaan inay si isdabajoog ah bangiyada u dhigtaan lacag ama hanti kalaba. Haddaba, lacagtaasi la dhigtayna waxay dhashaa lacag dulsaar ah oo faa'iido u ah dadka wax dhigta bangiyada in kasta oo ay ribo tahay, lacagta dulsaarka ahi.

**T. Faa'iidada u leeyahay qorshuhu.**

Qorshayntu waa arin aad muhiim ugu ah nolosha iyo kobaca qoys yeelan karo. Haddaba, qorshuhu, waa xaalad lagaga fogaan karo khasaare & qalalaase dhaqaale oo bulsho ama shaqsi soo food saari karta had-walba.

Isticmaalka qorshe wuxuu inaga caawiyaa maareynta nolosha qoysaskeena, degaankeena iyo waliba guud ahaan dalkeena. Wuxuuna wax ka taraa kobaca & horumarka dhaqaale ee bulshada wadanka. Hawlaha shaqo ama waxqabadna waxay noqdaan kuwo habaysan oo si habsami ah u socda, iyada oo san marnaba la joojin.

Sidaa darteed, waxaa muhiim ah in aynu hawlaha shaqo ee aynu qabanayno ku socodsiina qorshayaal cad-cad oo leh hadafyo la tiigsan karo, si looga midho dhaliyo hawl kasta oo la fulinayo. Sidoo kale, qorshuhu wuxuu inaga caawiyaa sidii aynu wakhtigeena, Maalkeena iyo muruqeenaba aan sida ugu haboon uga faa'iidaysan lahayn.

## Layliska 2

Kawada munaaqashooda qodobadan soo socda:-

1. Waxaad sheegtaan sida kobaca shaqsiyaad loogu xidhiidhin karo kobaca guud ee dalka.
2. Qodobeeya/faah-faahiya waxtarka uu u leeyahay haggida nolol-maalmeed.

# Kaydsashada

## Gunaanadka Cutubka 9$^{aad}$

Sid alawada ogsoon yahay waxaa jira khayraad dabiici iyo hanti kalaba oo ah kuwo aad u kooban xajmi (cadad) ahaan marka loo eego baahida aan xadidnayn ee bani aadamku u qabo. Haddaba, si looga faa'iidaysto khayraadkan kooban waxaa muhiim ah in fiiro gaar ah la siiyo ilaalinta & xanaaneynta kh/dabiiciga ah, ee ka jira dunidan aynu ku noolahay korkeeda. Sababtoo ah nolosha & jiritaanka dadka iyo noolaha kaleba. Waa mid ku xidhan kh/dabiiciga ah. Sidaas awgeed, waxaa haboon in khayraadka aynu haysano laga ilaaliyo israafka, islamarkaana la tashiilo sida ugu haboon. Israafka khayraadka ama hantida waxaa ka dhalan kara khasaare hanti lumis ah oo horseedi kara saboolnimo iyo macaluul nagu habsata. Sidoo kale, waxaa loo baahan yahay in khayraadka ama hantida la kaydsado si loo isticmaalo mustaqbalka dhaw & kan fogba. Nidaamka wax kaydsashaduna waa sida kaliya ee lagaga fursan karo israafnimo & khasaare maal oo ku soo gaadhi kara dhaqaale ahaan.

Haddaba, in la yeesho hab-dhaqan wax-kaydsasho, waxaa muhiim ah in la helo qorshayn haboon oo waxtar u leh bulshada & dhaqaalaha. Qorshuhu, wuxuu ruuxa ka caawiyaa inuu si fudud u maareeyo noloshiisa gaarka ah iyo waliba tan qoyskiisa, islamarkaana wuxuu qorshuhu u sahlaa ruuxa inuu ka hortago khatar qalalaase dhaqaale oo ku habsan karta qofka. Markaas, ardayeey, qorshe la'aantu waa nidaam daro, waxyeelo ku keeni karta bulshada oo u horseedi doonta faqri iyo qalalaase dhaqaaleba, haddii aan si haboon loo maarayn khayraadka aynu haysano.

## Ereyada furaha u ah cutubka 9$^{aad}$

Hay'adaha kaabayaasha horumarka: arimaha sida isgaadhsi gaadiid iyo adeegntelefoonda, koronada iwm.

Maalgelin: lacagta oo la gesho wax soo saar joogta ah ama adeeg shaqo.

Himilo: aragtida mustaqbal oo lasii aabiro iyadoo la dejinayo yool iyo hadaf la tiigsanayo

Dayn: hanti ama alaab la'sooqaato si loo bixiyo mudo cayiman gudohod

# Kaydsashada

## Laylisyada Guud Ee Cutubka 9aad

Ardayeey layliskan ku roga buugaantiina,kadibna ka shaqeeya

### I. Ku qor 'Run' ama "Been" su'aalaha soo socda hadba ta ku haboon

1. Waxkaydsadhadu waa mid khasaare iyo faa'iidaba u leh qofka/ruuxa.
2. Ruuxu hadduu yaqaano siyaabaha lagu tijaaro, wuxuu Gartay bay ka dhigan tahay waxkaydsashadu waxay tahay.
3. Khayraadka dabiiciga ah ma'aha mid dhammaan kara.
4. waxaa loo baahnayahay in aynu miisaaniydeena si isleeg u isticmaalo mustaqbalka dhaw iyo kan fogba.
5. Xeeladaha nolol-maalmeedka wanaagsan waa marka la yeesho xeelado kharash bixin iyo dakhli isku dheeli tiran.

### II. Iskuaaddi

| | B | T |
|---|---|---|
| 1. | Khayraadka dabiiciga | b) macdanta |
| 2. | Qorshaha qoyska | t) qorshaha |
| 3. | Aragtida dib u hadh | j) dadka kale oo aan loo fikirin |
| 4. | Israaf | x) taagtaada oo lagu socda |
| 5. | Ururka kaydsiga iyo dayminta | kh) ta barri kama fikirayo |
| | | d) baahida aan xadidnayn oo dusha la saarto. |

### III. Su'aalaha soo socda Ka dooro jawaabta saxda ah

1. Xaaladaha dal u keeni kara horumar waa:-

   b) Dadweynaha oo laga xoreeyo fikradaha dib u dhacnimada

   t) Qorshaha xiliga fog

   j) Qorshaha xiliga dhaw/gaaban

   x) Dhamaan waa sax

2. mid ka mid kuwan soo socda lama jaanqaadayo, marka laga hadlayo ku xisaabtanka jiilka mustaqbalka:
   b) Hanashada iyo gudbinta hab dhaqanka kaydsashada
   t) Abuurista jiil ka dheregsan aqoonta iyo tacliinta
   j) Khayraadka oo aan loo isticmaalin ku talax-teg
   x) Ilaalinta iyo daryeelka deegaanku ma khuseeyo iyaga.
3. Mid ka mida kuwaan soo socda, wuxuu hormood ka yahay israafka:
   b) Tidinta goobaha aflaanta
   t) Fidinta goobaha aflaanta
   j) Muwaadiniinta oo loo abuuro fursado waxbarasho
   x) Barashada qorshaha qoyska
4. Isku filaansuhu waa:-
   b) Dadka oo laga goosto
   t) Dadka kale oo lagu garab galo sidii ay iskugu filaan lahaayeen
   j) Dulsaarnimada oo laga xaroobo
   kh) dhamaan marka laga reebo 'b' waa sax

## IV. Meelaha banana ku buuxiya weedhaha ku haboon

1. Isticmaal darada hantida ama maal waxaa la dhahaa ________
2. Xeeladaha ficil ee shaqsiyan iyo qaran ahaan loo baahanyahay in lagu dhaqmo marka kaydsashada. Laga hadlayo, waxaa ka mida __________ iyo _____________

## V. Jawaabo kookooban ka bixiya su'aalaha soo socda;

1. Israafka iyo faxalnimadu maxay ku kala duwan yihiin?
2. Bakhayrnimada & kaydsashadu sidey iskula jaanqaadi karaan?
3. Kh/dabiicigu waa maxay?
4. Waxaa loo baahnayahay in aynu miisaaniydeena si isleeg u isticmaalo mustaqbalka dhaw iyo kan fogba.

CUTUBKA 10

# Ka qayb-galka fir-fircoon ee bulshada

Ujeeddooyinka Guud ee Cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Dareemaan faa'iidada ay leedahay in si fir-fircoon ay bulshadu uga qayb qaadmudane arrimaha agagaarada iyo kuwa bulshadaba.
- Gartaan faa'iido ama waxtar in ay leedahay in qaybaha kala duwan ee bulshada la isku-habbeeyo lanna adkeeyo.

## 10.1 ka qaybgalka muwaadiniintu muhimada uu u leeyahay horumarka deegaanka, nabad galyada iyo dhismaha nidaamka dimuqraadiyada (to be inserted in place of current

### 10.1.1 Ka qaybgalka bulshada



Jaantuska 10.1. Waxaanu taageeraynaa Dimuqraadiyada, Nabadgelyada & Horumarka.

Maxay muwaadiniintu uga qayb qaadanayaan horumarinta dalka?

Waxaad soo barateen inay dimuqraadiyadu tahay dadweynaha oo si fir-fircoon uga qayb qaata arrimaha waddankooda ee go'aamada u baahan ka qayb-galka bulshadu ma'aha wax ku kooban tartamidda iyo wax doorashada balse ka qayb-galku wuxuu noqol karaa noocyo kala duwan oo badan. Kuwaas oo kala ah: heer xaafadeed, tuulo, dugsi, degmo, gobol iyo heer degaan IWM.



Jaantuska 10.2. Wareysi lala yeeshay dadkii banaan baxa samaynayay xubin ka mid ah.

Haddaba, qofka waddaniga ah waxaa looga baahan yahay heer alla heerka uu Joogaba inuu arrimaha bulshada dantu ugu jirto oo dhan si fir-fircoon uga qayb-qaato haddii ay tahay hadal iyo haddii ay tahay ficil la qabanayo.

Muwaadiniintu waxay qaab socodka shaqo sixitaan ku samayn karaan, xukuumadda kolba

jirta iyaga oo soo dhisaya ururo siyaasadeed, bulsho, shaqaale, aan soo sheegnay sababtoo ah xukuumadu waxay u baahan tahay in had iyo jeer shaqadeeda lagu dabagalo oo muwaadiniintu qiimeeyaan waxay bulshada iyo waddanka ay u qabanayso. Waxaa khasab ah in xukuumadda iyo madaxdeeda bulshadu qiimeyso si loo helo maamul suubban oo ku dhisan caddaalad.

Waxaa dhici karta urur siyaasadeed oo mar hore ku guulaystay doorashadii dhacday, inuu doorashada labaad ee kale uusan guulaysan oo tar-tanka lagaga badiyo. Taasna waxaa sabab u noqon karta bulshadii shalayto soo dooratay ururka inay maanta kalsoonidii ay u qabeen kala noqdaan haddiise urur siyaasadeed ku shaqo wanaagsan bulshada u soo qabtay waxaa dhacaysa inay mar labaad doorashada ku guulaystaan oo ay bulsho weyntu doorato taas macnaheedu ma'aha bulshadu waxay sugaysaa wakhtiyada doorashadu ay jirto oo ay codkeeda ku ciil bixi karto, muwaadiniintu ama bulshadu waxay xaq u leedahay inay had iyo jeer dabagal adag ku sameyso xukuumadda iyo madaxda ay soo doorteen sida ay u shaqaynayaan waa inay figradahooda ka dhiibtaan waxa socda isla markaana qiimeeyaan geedi socodka shaqo ee xukuumadda, taas ay xukuumadda ku qiimaynayaan inay waajibaadkii iyo xilkii ay qaaday ka soo baxday iyo in kale.

Sidaas ay tahay, bulshadu heerar iyo noocyo kala duwan ayay ka qayb galkeeda ku muujin kartaa. Horayba sida aan u soo sheegnay bulshadu arrimaha heer kastaba ha'ahaadeene waxay uga qayb gali karaan si toos ah iyo si aan toos ahayn. Sidaan tooska ahayn, marka aan leenahay, waa marka wakiilo ay soo doorteen uga qayb-galaan arrimaha jira iyaga oo matalaaya bulshada soo dooratay.

Waxaan tusaale u soo qaadan karaa gudiyada xaafadda marka ay madaxdooda dooranayaan waxaa fagaaraha doorashada iskugu yimaada dhammaan dadka ku nool xaafada, halkaana waxa muwaadin kastaaba xor u yahay in codkiisa iyo kan taageerada ah uu siiyo musharaxa uu rabo. Haddaba, ka qayb-galka bulsho ee noocaas oo kale ahi waxaa loo yaqaan ka qayb-galka tooska ah ee bulsho.

### 10.1.2 ka qaybgalka fir fircoon ee muwaadiniinta ee ku aaddan hawlaha dhimista saboolnimada iyo xaqiijinta horumar degdega ah



Jaantuska 10.3. Dhul beero waraabin laga wado

Hawl kasta oo ay xukuumaddu fulinayso waa inay ahaato mid bulshada iyo waddankaba wax tar u ah, haddaba, haddii xukuumadda wax qabadkeedii yahay mid bulshada iyo waddanka dani ugu jirto, bulshadana waxaa loo baahan yahay inay dhinaceeda ka dadaasho hawlaha ama

mashaariicda bulshada iyo waddankaba dantu ugu jirto ee loo baahan yahay inay dadweynuhu (bulshadu) ka qayb qaataan aad ayay u tiro badan yihiin. Waxaana ka mid ah kuwan soo socda:-

Dhisida nidaamka dimuqraadiyada, horumarinta dhaqaale, hoos u dhiga saboolnimada, maamulka suuban, is-fahanka daacadnimada iyo la xisaabtanka, caafimaadka, waxbarashada, difaaca, ka hortaga masiibooyinka dhaca.

Arrimahani waxay noqon karaan kuwo heer xaafadeed, tuulo, degmo, gobol, deegaan ama heer qaran ah. Haddaba, dhammaan bulshadu kolba heerka ay joogto inay ka qayb gasho ayaa habboon maadaama ay faa'iido u tahay iyaga.

Arrimahaas aan kor ku soo sheegnay ee muhiimka ah waxaa dheer arrin kale oo muhiim ah oo loo baahan yahay inay dhammaan dadweynuhu kaalin wanaagsan ka qaataan. Waxayna tahay ilaalinta deegaanka taasoo ka qayb-galka fir-fircoon ee bulsho la'aaneed aan la dhaqan galin karin.

Waddamada nidaamka dimoqraadiyadeed qaatay waxaa wada leh bulsho weynta iyo maamulkooda, waxayna leeyihiin xuquuqda doorashada awoodda maamul.

Haddaba, si ay dadweynuhu xuquuqda ay leeyihiin uga faa'iidaystaan waxaa looga baahan yahay inay la yimaadaan ka qayb-gal fir-fircoon oo dhinac kasta ah, waxaa habboon qofka ay masuuliyadda u dooranayaan inay marka hore ay ogaadaan waxa uu yahay, tayadiisa, daacadnimadiisa, is xil qaamidiisa, ka masuulnimadiisa ay ogaadaan oo ay sidaa ku soo doortaan. Looma baahna qof aan xil qaadi karin inay cod siiyaan. Waajibaadka saran dhammaan dadweynaha in ayna soo dooranin dad danaystayaal ah. Waxaa dhacda madaxda la soo doortaa markay awoodda qabsadaan kadib inay ula kac u ilaawaan balantii ay bulshada soo dooratay u qaadeen ee ahayd inay daacadnimo iyo is xil qaan ugu shaqayn doonaan, waxay noqdaan kuwo u deegsada awooddii loo dhiibtay waxyaabo bulshada iyo waddankaba dani ugu jirin ama inay wadanka iyo bulshadaba gaadhsiiyaan khatar aan si dhib yar looga soo kaban karin. Haddaba, waxaa loo baahan yahay bulshadu inay ahaato mid fir-fircoon oo had iyo jeer daba gal iyo qiimayn la daba joogta waxyaabaha ay qabanayaan masuuliyiinta ay soo doorteeni. Waxay awood u leeyihiin ama u madax banana yihiin madaxdii ay shalay soo doorteen haddii ay wax-qabadkooda ku qanci waayaan inay awoodda ka qaadaan oo ay eryaan, waana xuquuq dimoqraadi ah oo ay leeyihiin.

Fikradaha oo si xornima ah loo dhiibtaa, is habaynta iyo is-ururintu waa xuquuq dimoqraadiyada, haddana waa qaababka lagu soo dhiso nidaamka dimoqraadiyadeed. Dadweynuhu si gaar ahaaneed iyo si wada jir ahba waa inay wixii fikrado iyo talooyin ah ee wadankooda waxtar u ah soo bandhigaan iyaga oo adeegsanaya qalabka warbaahinta eek ala duwan iyo banana bax waxay soo jeedin karaan siyaasadaha, awaamiirta, istaraatiiiyadaha, qorshayaasha, barnaamijyada, talooyinka ay leeyihiin horumarka wadankooda ayay wax tar u noqon karaan ayaga oo urur siyaasadeed oo midaysan ah. Haddaba, arrimahaas aan kor ku soo sheegnay waxay u baahan yihiin inay la yimaadaan fir-fircooni ah dhammaan dadwaynaha wadan ku wada nool. Waana arrimo si dadban iyo si toos ahaaneedba

ugu xidhan bulsho waynta dalka. Nidaamka dimoqraadiga waxay wax yeelo soo gaadhi kartaa marka ka qayb-galak bulsho uu noqdo mid aad u hooseeya oo ku dhisan aniga maxaa iga galay.

Ka qayb-galka fir-fircoon ee muwaadiniinta looga baahan yahay inay si wanaagsan u fahmaan macnaha xuquuqda aadamiga iyo tan dimoqraadiyada, kadibna, ay u halgamaan iyo tan muwaadiniinta kalaba inay fahmaan kala duwanaanshaha fikradaha iyo aragtida dadka. Islamarkaana la yimaadiin dulqaad iyo istixgelin, si loo helo nabada iyo wada noolaansho, lagu gaadhi karo horumar dhaqan-dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeed.

Sidaa oo kale waxaa loo baahan yahay nidaam dimoqraadiyadeed oo ku salaysan qaranimada shacabka reer Itoobiya in geedi socodka dhisida nidaamku uu u baahan yahay maamul suubban oo wanaagsan iyo is xil qaanimo ka muuqata in maamulka suubban lagu heli karo xoojinta hay'adaha ilaalinta xuquuqda aadamiga iyo tan dimoqraadiyada, taas oo loo baahanyahay inay kaalin wanaagsan ka qaataan muwaadiniinta dalku.

Ilaalinta deegaankuna waa arrin sidaas oo kale u baahan ka qaybgal fir-fircoon ee bulshada dhammaan dadweynuhu waa inay xil weyn iska saaraan daryeelka, deegaankooda: sida dhirta, geedaha, biyaha, carrada, ugaadha, dhammaan khayraadka dabiici ee ay leeyihiin maadaama hay'adaha dawliga iyo kuwa aan dawliga ahayn ee xilka arrimahaas qaaday aysan kaligood wax kasta qaban Karin. Waxaa loo baahan yahay inay bulshadu gacan wanaagsan ka gaysato ilaalinta deegaankooda. Ilaalinta deegaanku wax la fududaysan karo ma'aha maadaama deegaanku yahay aas'aaska nolosha bani'aadmiga. Tusaale; haddii ay arkaan qof dhirta deegaankooda guraya inay aamusaan looma baahna, waa inay khatarta ku soo fool leh dareemaan, isla markaana talaabo sharciga waafaqsan ka qaadaan cidda sidaas yeesha. Dhirta iyo geedaha haddaan daryeelo waxaan daryeelay carradii, cimiladii, biyihii, duur joogtii IWM.

Haddaba, dadwaynuhu si gaar ahaaneed iyo si wada jir ah waa inay uga soo baxaan waajibaadka ka saran ilaalinta deegaankooda. Sidaa darteed, hawl kasta oo ay dawladdu waddo waxaa loo baahan yahay inay bulshadu qayb libaax ka qaadato, waana fursada kaliya ee dadku horumar la taaban karo ku gaadhi karto.

### Layliska 1

1. Bal waxaad isla meel dhigtaan arrimaha iyo hawlaha deegaankiina ee aad is leedihiin waxay u baahan yihiin ka qayb-gal bulsho oo fir-fircoon, kadibna, waxaad ka wada doodaan qaabka bulshadu wax uga qaban karto?
2. Waxaad faah-faahisaan xidhiidhka u dhexeeya dimoqraadiyadda iyo ka qayb-galka fir-fircoon ee bulsho?
3. Bal waxaad sharaxdaan sida ka qayb-galka bulsho ee fir-fircooni ku noqday aas'aaska dhisida nidaamka dimoqraadiyada.
4. Isku qaybiya laba kooxood kadibna waxaad sharaxdaan arrimaha dalkeena ee u baahan ka qayb-galka fir-fircoon ee bulsho.

### 10.1.3 Ka qaybgalka firfircoon ee muwaadiniinta ee ku aaddan abuurista cadcaddaan iyo laxisaabtan



Jaantuska 10.4. Dugsigu waa inuu yeeshaa cadcadaan shaqo.

Ururada bulshadu waxay kaalin heer sare ah ka qaataan ka qayb-galka bulshada ee fir-fircoon. Dadku waxay sameystaan ururo kala duwan kuwaas oo lagu saleeyay danaha guud ee lawada wadaago sidii wax loogu qaban lahaa. Ururadu waxay noqon karaan kuwo loogu talagalay si wax looga qabto horumarka bulshada, daryeelka khayraadka dabiiciga ah, arrimaha dumarka, dhalinyarada, xirfadaha iwm.

## 10.2 Ururada bulshada rayidka

### 10.2.1 Ka qeybgalka ururada bulshadu faa'iidooyinka ay u leeyihiin horumarka dalka





Jaantuska 10.5 Shirka haweenka

Ururada bulsho ee aan kor ku soo sheegnay iyaga oo jira, taa macnaheedu ma'aha in kaalinta shaqsigu ka qaadan karo dhisitaanka nidaamka dimoqraadigu uusan ahayn wax la yaraysan Karin. Haddana, kaalinta ururada bulshadu ay ka qaataan dhismaha dimoqraadigu uu yahay mid wax la bar-bar dhigaa uusan jirin.

Ururada bulshada waxaa kale oo ay qayb-libaax ka qaataan horumarka arrinta wadanka, maadaama ururku uu meel isugu keenay cududii bulshadu lahayd. Ururada bulshadu waxay taageero midaysan oo dhaqso badan siiyaan hawlaha horumarinta dhaqan-dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeed ee ay dawladu waddo.

Tusaale; haddii ay dhalin yaradu ku heshiiso inay deegaankooda dhireeyaan, hawshaasna sidii ay u fulin lahaayeen ay urur mid ah sameystaan. Xukuumaddu waxay ku khasban tahay inay wax la qabato oo ay la shaqayso ururkaas dhalinyarada ah.

Ururada bulshadu ayaga oo ka duulaya macluumaadka ama xogta ay ka helaan warbaahinta sida Jaraa'idka, idaacadaha la dhagaysto iyo kuwa layska arko ayaa waxay si wanaagsan u qiimayn karaan wax qabadka xukuumaddooda ama madaxdooda.

# Ka qayb-galka fir-fircoon ee bulshada

Waxay si fir-fircoon uga qaadan karaan geedi socodka doorashooyinka tuulooyinka, xaafadaha, degmooyinka, Gobolada ay ku nool yihiin ka dhaca. Waxaa kale oo ay ka qayb-qaadan karaan doorashooyinka heer qaran lagu qabto.

Waxaa bulshada lagu baraarujin in qofka ama ururka siyaasadeed ee ay kolba isleeyihiin waxbay waddanka u qaban karaan inay codka siiyaan.

Waxay soo bandhigi karaan cabashooyin ay ku diidan yihiin waxyaabaha ka jira xukuumadda.

Waxay samayn karaan banaan baxyo nabadeed oo ay ku diidan yihiin ama ku dhaliilayaan wax qabadka xukuumadda jirta.

Waxay qoraal ahaan iyo af ahaanba kala xaajoon karaan dhaliisha ama dhibka jira madaxdooda. Waxay warbaahinta siin karaan ama ka soo jeedin karaan kolba waxay qabaan ee fikrado ah.

Waxay ka qaadi karaan awoodda xukuumadeed si ay waxqabad wanaagsan uga gaystaan dalkooda.

Waxay si daacadnimo iyo xil kasnimo ku jirto ugu adeegi karaan xukuumadda.

## Layliska 2

1. Bal waxaad is bar-bar dhigtaan sida ay u kala wanaagsan yihiin urur la shaqaynta iyo gooni gooni u shaqaynta?
2. Waxaad sharaxdaan ururada bulshadu wuxuu yahay?
3. Waxaad faah-faahisaa kaalinta ururada bulshadu ka qaataan hawlaha horumarinta dhaqan dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeed ka socda deegaanka?
4. Waxaad qortaa ururada bulshada kala duwan ee aad taqaano?
5. Isku qaybiya laba kooxood kadibna waxaad warbixin balaadhan ka soo qortaan?

B. Qaabka dabar goynta dhirtu ay u saamayso nolosha aadamaha?

T. Xaaladda dhirta deegaankeena Soomaaliyeed uu ku sugan yahay wakhtigan xaadirka ah?

F.G:- Xogta ka raadsada macalimiinta Joqoraafiga dhigta iyo

Buugaagta kala duwan ee ka hadlaysa arrimahaas.

### 10.2.2 Arrmaha wakhtiga taagan oo dawlada lagu garab istaago islamarkaana lagula socdo oo lagaga qaybqaato ka ururada bulshada rayidka ahaan

- Ururada bulshada rayidka ahi sidee bay dawlada u xoojin karaan islamarkaana ku dabagali karaan?



Jaantuska 10.6 shirwaynaha muwadiniinta magaalada jigjiga

Shirka dadweynaha magaalada Jig-Jiga

Beryahan dambe waxaa jira kulamo wada tashi oo ka dhacay magaalada jig-jiga. Hadaba, shir kaas waxaa soo qayb-galay qaybaha kaladuwan ee bulshada magaalada Jig-Jiga sida: ururada bulshada rayidka ah, ururada dhalinayrada, ururada haweenka, iwm

Shirkana waxaa diirada lagu saaray xalinta dhibaatooyinka mushkiladaha haysta qaybaha bulshada sida. Ururada dhalinyarada, kuwaa

haweenka, iyo waliba qaybaha bulsho ee dhexe iyo kuwa taagto yar gaar ahaan. Waxaana kulanadaas, la iskula soo qaaday qodabo ay ka mid ahaayeen sida: shaqa laaanta, dhibaatooyinka nabadgeliyo & amaan, mushkiladaha maamulka suuban, sixir bararka maciishada nololeed, iwm.

Guud ahaan waxaa kulamadaas la isku afgartay sidi loogu guntan lahaa horumarinta magaalda Jig-jiga, iyadoo dawlad iyo shacabba la is ka kaashanayo. Shirkaasna waxaa kale oo goob jog u ahaa masuuliyinta magaalada, kuwaas oo dhinacooda balan qaaday sidi ay bulshada ugu shaqeyn lahaayeen, islamarkaana ka codsa day dadwaynaha, inay kala shaqeeyaan iyaguna, si loog adhabeeyo himilada la tiigsan ayo ee ah horumarinta magaalada iyo guud ahaan in kor loo gaado nolosha dadweynaha ku dhaqan magaalada Jig-Jiga.

## Layliska 3

Idinka oo ka duulaya sheekada kor ku xusan ka jawaaba su'aalaha soo socda

1. Shir weynaha dadweynaha magaalada Jig-jiga ma urur bulshada rayid baa?
2. Maxay tahay saamaynta uu shirweeynaha dadweynaha magaaladu ku keenay dhinacyada xoojinta nabdgelyada, horumarka, iyo dimuqraadiyadaba? Maxaase natiijo, kaso baxday? Maxayse ahayd inu intaas wax ka badan qabto?
3. Shirweynaha dhexdiisa, muxuu ahaa ka qaybigalka shaqsiyaadka?
4. Muxuu shirweeynaha magaalada Jig-jiga ee dadweeynuhu, u horseedi karaa magaalooyinka kale ee deegaan ka? Ka wada xaajooda.

Bulshada rayidku waa ururo aan dawli ahayn, islamarkaana aan ahayn kuwo faaido doona. Waana ururo saameyn bulsho, dhaqaale iyo siyaasadeedba ku yeesha guud ahaan dalka. Gaar ahaan nidaamka dimuqraadiga ah, waxay ururada bulshada rayidka ah ku leeyihiin door weeyn, sidii loo yarayn lahaa dhibaatooyinka nolol maalmeed ee dhaqaale iyo kuwa bulshaba. Sidoo kale waxay doorweyn ka qaataan sidii buslahda loogu baraarujin lahaa hab dhaqanka dimuqraadiyadeed. Xubnaha ururada bulshadu waxay ku qaalaan tababaro la xidhidha ka qaybgalka madaxa banaan doorashada xubnaha hogaaminta, xilka qaadista marka

Lagu qanci waayo hogaamintiisa iyo waxyaabaha la halmaala ee nidaamka dimuqraadiyadeed. Waxaa kale oo aan la dhayalsan Karin kaalinta ay ururada bulshada rayidku ku leeyihiin la tashiga dawlada sidii qaybaha dawlada xilkooda ugasoo bixi lahaayeen. Sidoo kale, doorkooda ma jirto cid kale oo buuxin karta.

## Layliska 4

Kawada xaajooda su'aalahlaan soosocda

1. Ururada bulshada rayidku maxay kaga duwanyiin ururada kale?
2. Ururada bulshada rayidku waxtar koodu muxuu yahay?
3. Miyaynu u baahanahay inaynu sifir-fircoon uga qaybqaadano ururada bulshada rayidka? Sabab?
4. Ururada bulshada rayidka ah ee dugsigiina kajira waa noocee?

# Ka qayb-galka fir-fircoon ee bulshada

## Gunaanadka Cutubka 10aad

Waxaan cutubkan kusoo barany sida loogu baahanyahay in la helo  nidaam dimuqraadiyadeed oo gacan ka geysta  isfahan dhaxmara bulshada,in  la abuuro maamulka suuban iyo waliba dhismaha hanaan dimuqraadiyadeed oo dalka ka ka hana qaada.arimahanina waa kuwo shardi u ah in la xaqiijiyo horumar degdeg ah.hadaba si looga midha dhaliyo arimahaas waa in la helaa,islamarkaana la joogteeyaa ka qayb galka fir-fircoon ee bulshada.ka qaybgalka bulshada ee midha dhalka ah maaha mid si kali kali loo fuliyo balse waa mid si wada jir ah loogu istaago iyada oo  dhamaan qaybaha  kala duwan ee bulshadu isgarabsanayaan. Ururada bulshada rayidkuna waa fagaarihi uu shacabku usi mari lahaayeen kaqaygalkooda ku wajahan hawlaha dedejinta horumarka, sugida nabadgelyada iyo xoojinta dimuqraadiyada.sidoo kale ururadan waa masraxyo ka caawiya bulshada siday dawlada ugu dabagli lahayd,islamarkaana ugarab istaagi lahayd dawlada marka xaalado gaar ahi jiraan.

## Erayada furaha u ah Cutubka 10aad

| | |
|---|---|
| Maamulka suuban: | maamulka ka beeban kala sooc, musuq-maasuqa, islamarkaana leh adeeg bixin huffan oo degdeg ah. |
| Cadcaddaan: | nidaamka shaqo ee masuli yiinta dawlada ee waafaqsan sharciga |
| Utirsanaan: | laxisaabtanka shaqo ee laga doonayo ruuxa/masuulka hawlaha shaqo. |

## Ka qayb-galka fir-fircoon ee bulshada

### Layliska Guud ee cutubka 10aad

I. Weedhahan soo socda ku qor 'Run' ta saxda ah tan aan saxda ahayna ku qor 'Been'

1. Ka dayrinta xaaladadaha dimuqraadiyadeed waxyaabaha muujin kara waxaa kamida amar ku tag laynta shaqsiyaad ka masuuliyaiinta ah
2. Dedejinta hawlaha horumarku waxay gacan ka geysataa yareynta saboolnimada
3. In la xaqiijiyo horumar deg-deg ah umana baahna ka qaybgalka firfircoon ee dadweynaha, balse wuxuu u baahanyahay in la kordhiyo khayraadka dabiiciga.
4. In la helo maamul suuban, waxaa ku filan in cad-cadaanta iyo laxisaabtan ka midkood la xaqiijiyo.
5. Inkastoo ururada buslhada rayidka ah uu waxtar kooda dhinaca dimuqraadiyada iyo nabdgeliyada xadidanyaha, balse ay faaidadooda dhaqaale tahay mid aad u sareysa

II. Isku aaddiya weedhaha ku kala hoos qoran xarfaha 'B' iyo 'T'

| B | T |
|---|---|
| 1. la xisaabtan | b. ciday soo doorteen oo loosii maro |
| 2. ururada bulshada rayidka oo ay dusha uritaan | t. masuuliyada go'aanadooda iyo ficiladooda<br>j. wax qabadkooda oo ayna wax sir ah ka dhigin |
| 3. ka qaybgalka tooska ah | x. gacan siinta iyo dabagalka dawlada |
| 4. ka qaybgalka wakiilasho | kh. Arimaha siyaasada oo loogu dhaq dhaqaaqo si gaar gaar ah |
| 5. wax qabadka ururada bulshada rayidka ah doonka ah | d. wax qabadka faaido |
| | r. qaab-dhismeedka busho ee uku noola ah |

III. kadooro jawaabta saxda ah, su'aalahan soo socda

1. Maamulka suuban si buuxda ugama hirgelin marka la leeyahay waxaa la soo qaadan karaa sida ______________
   b) Musuq maasuqa kajira
   t) Macaamiisha oo la rafaadiyo
   j) Falalka qaraabaysiga oo lagu talax-tegay
   x) Dhamaan
2. Hawlaha waxqabad ee ay ururada bulshada rayidku qabtaan, waxaa ka mida sida
   b) fulinta siyaasadaha dawlada
   t) dadweynaha oo laga qaybgeliyo dhaqdhaqaaqyada hawlaha horumarka, nabadgelyada, iyo dimuqraadiyada
   j) inay dawlada ugu adeegaan iyagoo shacabka ka dhiganaya aalad
   x) dhamaan

3. Qayb kasta oo bulshada katirsan lama dhabooli (buuxin) karo kaalinteeda, marka la leeyahay waa:
    b) bulshada dhexdeeda waa in laga sameeyaa shaqo qaybsi
    t) qayb bulshada ka mida waxay qabanayso
    j) dabeecadaha qayb kasta u gaarka ah oo leh wax ayna cidkale buuxin karin
    x) dhamaan
4. Adkaynta dimuqraadiyada caqabadaha soo wajihi kara waa:
    b) is hadal-haynta iyo is cambaareynta
    t) dhaliilaha waxtarka leh oo aan la qaadan
    j) is dhagaysasho la'aan iyo isku dulqaadasha la'aan
    x) dhamaan waa sax
5. Ururada bulshada rayidku inay xoojiyaan, islamarkaana dabagalaan dawlada waxaa u sahli kara?
    b) waa in laga helaa meel xaalad dimuqraadiyadeed kajirto
    t) waa inay la kulmaan hogaaminta dawlada
    j) waa inay yeeshaan awood ka saraysa tan dawlada
    x) dhamaan waa sax

### IV. Meelaha banaan ee soo socda ku buuxiya weedhaha ku haboon

1. Labada siyaabood ee ay bulsho si fir-fircoon ugaga qaybqaadan karto waa __________ iyo ___________
2. Kaliya maaha horumar deg-deg ah uun inu bar barscdo ka qaybgalka fir fircoon ee bulshadu, balse ______ laga dhigo

### V. Su'aalahan soo socda ka bixiya jawaabo koo kooban

1. Sheega sadex mar xaladood oo ka dhalan kara la'aanta maamulka suuban
2. Sheega laba wax yaabood oo uu ka qaybgalka buslhadu ku soo kordhin karo maamulka suuban

CUTUBKA 11

# Aqoon Raadsi

Ujeedooyinka Guud ee Cutubka

Ka dib dhammaadka cutubkan, ardaydu waxay awoodi doonaan inay:

- Gartaan waddooyin ay aqoon ku hellaan.
- Gartaan siyaabaha aqoonta loogaga faa'iidaysto.
- Fahmaan faa'iidada iyo muhiimada ay leedahay xogtu.
- Fahmaan fikradaha iyo arragtiyada dib u dhacnimo in ay lagama maar-maan tahay in lala dagaalamo.

## 11.1 Siyaabaha Aqoonta lagu hello

Aqoontu waa xogta iyo aragtida aan ka haysano arrinta jirta. Nolosha aadmiga waxaa ka buuxa dhibaatooyin iyo su'aalo badan oo murugsan, haddaba, si su'aalaha iyo dhibaatooyinkaas looga jawaabo, waxaa aadmigu u baahan yahay aqoon inuu helo. Waxaana loo baahan yahay in aqoonta la raadsado ama la siyaadsado. Aqoon raadsiguna waa hawl aan dhammaad lahayn oo aan laga gaboobin. Bani'aadmigu wuxuu horumar dhaqaale oo dhinac kasta ah ku gaadhi karaa islamarkaana wax kasta oo sir ah oo dunidan ka jira baadhi karaa marka uu aqoon leeyahay.

Bani'aadmigu wuxuu kaga soo fudbay noloshii qadhaabsiga ee hore kuna gaadhay heerka xadaaradeed ee maanta jooga waa aqoon.

Xadaaradda aas'aaskeedu waa aqoon. Wax kasta oo hawl ah oo la qabto waxay u baahan tahay aqoon laga bilaabo farsamada lagu sameeyo sakiinta (mindiisha) illaa heerka farsamo ee lagu sameeyo diyaaradaha hawada maraa waxay u baahan yihiin aqoon. Dhammaan geedi socodka xadaarada bani'aadmigu heer kasta oo ay joogtaba waxay u baahan tahay aqoon kala duwan.

Ilbaxnimadu waa horumarka ay bulshadu sameyso ee ah mid ka soo bilaabata meel hoose, iskuna bedesha nolol sare ama Jaahilnimo laga baxo oo loo guuro ilbaxnimo iyo aqoon heer sare ah.

Tusaale; dadkii hore iyo kuwa maanta jiraaba waxay rarka u adeegsan jireen ama u adeegsadaan xoolaha nool sida geela, lo'da dameeraha IWM.

Balse maanta dunidu inteeda badan dadka ku nooli waxay gaadheen heer ay ku sameysteen dayaarado hawada mara, maraakiib badda mara iyo baabuur dhulka dushiisa loo adeegsado, natiijooyinka xadaaradaha oo la adeegsadaa

Dhinaca kale haddaan ku eegno beeruhu waa aas'aaska nolosha. Aqoontu waxay sida badan ka helaan dadka ay deegaanka kuwada nool yihiin. Aqoonta beeruhu waxay ka kooban yihiin sida beerta loo qodo, loo falo, loo hrameeyo, loo gooyo, loo tiilo, loo tumo, loo hubiyo (hadiyo) IWM.

Haddaba, beeralayda waddankeena ku nooli waxay beeraha ku qotaan aqoon ay ka helaan waayo aragnimada dheer ee ay u soo mareen hawshaas iyada ah. Midda kale wax qabadkooda beeruhu ama cilmi-baadhistooda haddii uu wakhtigii loo baahnaa dib uga dhaco waxaa dhacaysa abaar dad iyo duunyo lagu baaba'o. waxa kale oo dhaca nabaad guur ku yimaada carrada oo yareeya wax soo saarka beeraha.

Haddiise aqoonta beera falashada ee dadkeena lagu kabo aqoonta casriga ee laga helo dugsiyada, waxaa la helayaa wax soo saar tayo iyo tiro badan. Waxaa cilmi-baadhis lagu sameeyaa carrada noocyada wax soo saarka iyo heerkulka ay ku wanaagsan tahay. Waxaan laysku halayn roobka circa, si aan loogu tiirsanaan xaaladaha dabiiciga oo aan isku halayn lahayn. Waxaa la'adeegsadaa qaabka biyo wax lagu abuuro lagu heli karo, kuwaas oo ay ka mid yihiin biyaha wabiyada iyo kuwa kale oo la kaydiyay in la adeegsado. Waxaa kale oo beeraha loo adeegsadaa qalab farsamada cusub ah oo lagu soo saari karo wax soo saar tayo iyo tiro badan leh. Waxaa kale oo beeraha loo adeegsadaa daawooyin casri ah oo lagula dagaalamo cudurada waxyeela midhaha wax soo saarka ku haya.

xooga shaqada aad haysid dhamays-tirkeeda way kuu dadajiyaan.

Dadka bilaaba yaraantooda waxay waayo aragnimo aqooneed ka soo helaan waalidiinta dhashay, Jaarkooda, deegaankooda waxay kolba kala dulmaan wakhtigan casriga ah. Aqoonta waxaa laga helaa oo kale dugsiyada waxbarasho ee ku baahsan dunida. Qaybaha kala duwan ee waxbarasho waxaa lagu bixiyaa aqoon kala duwan.

Waxaana ka mid ah, xirfadaha beeraha, injineeriyadda, dhakhtarnimada, sharciga, maamulka, macalinimada IWM.

Qof kastaana wuxuu galaa oo uu awoonteeda raadsadaa qaybta uu rabo. Dadkaasi marka ay aqoontaasi ku soo qalin jabiyaan waxay soo baxaan ama latagaan meelaha shaqo. Waxqabad casriyaysan oo aad u tayo sareeya, kaalinna ay ka qaataan dadaalka loogu jiro horumarka bulshadooda iyo waddankoodaba wuxuu noqdaa mid aad u sareeya.

Bulshada dhxdeeda waxaa laga helaa dhakhtaro dhaqameed dadka daweeya, waxayna bukaanka u adeegsadaan daawooyin deegaanka ay joogaan laga helay oo loo yaqaan daawooyin dhaqameed. Aqoon yahanadaas adeegsanaya daawooyin dhaqameedku waxay dadka ku daaweeyaani waa qiyaas, aanku saleysnayn daraasaad iyo cilmi-baadhis dheer. Dhakhaatiirta aqoonta dugsiyada laga helay bugtaanka u adeegsada, waxay wax qabadkooda ku saleeyaan daraasad la xaqiijiyay.

## Aqoon Raadsi

Dhammaan farsamooyinka casriguna waxay bani'aadmiga gaadhsiiyaan isku fillaasho nololeed oo ah, dhinacyada midhaha wax soo saarka beeraha, waxayna kaalin wanaagsan ka qaataan horumarka waddamadu inay gaadhaan la rabo.

Waddamo casri ah ku dabaqeen waddamo badan oo ka mid ah dunidan aan ku noolahay waxay horumarka dhaqan dhaqaale, bulsho iyo siyaasadeed ku gaadheen, ama nolosha sare ku gaadheeni waa qaababkii shaqo ee ay horey u adeegsan jireen oo ay aqoon ku horumariyeen dadka, waxaa looga baahan yahay inay mar walba isu diyaariyaan qaab nololeedka aduunka manta lagu nool yahay. Waa midkii shalay lagu noolaa, mustaqbalkana waxaa laga sugayaa in uu dhaco tadawur wayn oo dhinac walba ah. Sidaas darteed, waxaa loo baahan yahay, in isbaddaladaas markasta diyaar loo ahaado isbaddelka iyo horumarkana waxaa aas'aas u ah aqoonta qaabka barashada aqoontuna waa wax meel ay ka joogsato aan lahayn oo waligeed sii socota inta aadamuhu nool yahay.

Aqoonta waxaa lagu daraa ficil. Aqoon aan wax lagu baddali karina waa mid aan micna lahayn. Muwaadiniintu markay aqoontooda wax ku beddelaan ama ay ku shaqeeyaan ayaa waddankooda iyo bulshadooda ay horumar la taaban karo gaadhsiin karaan.

Haddaba, haddii bulshadeenu ay ficil ahaan aqoonta ay leeyihiin u isticmaalaan shaqooyinka ay hayaan, dawladeenuna nidaam qorshe iyo siyaasado wanaagsan oo lagu shaqayn karo abuurto waxaa shaki la'aan ah inaan muddo gaaban saboolnimada inagu habsatay kaga bixi doono. Horumar la taaban karana gaadhsiinayno dalkeena iyo bulshadeenaba.

### Layliska 1

1. Waxaan soo sheegney ama aad soo barateen in natiijooyinka ay leedahay xadaaradu oo loo adeegsado shaqooyinka ay tashiili karaan wakhtigeena iyo xoogeena haddaba, arrintaas sharaxaad ka bixiya idinka oo adeegsanaaya tusaalooyin macquul ah.
2. Waxaad faah-faahisaa sida cilmi baadhistu aas'aaska ugu tahay aqoonta casriga ah?
3. Aqoontu markastaba way cusub tahay, maxaa ugu wacan?
4. Aqoon aan ficil ahaan wax lagu qabanin waxba ma'aha maxaa looga jeedaa weedhan?

### Hababka loo siyaadsado aqoonta



Jaantuska 11.1. Maroodiga Afrika

# Aqoon Raadsi

Wakhtigan aan joogno ee cilmiga farsamada cusubi heerka sare gaadhay, waxaa jira in baahida aqoontuna ay meel aad u saraysa gaadhay. Waxaa jira qaabab kale duwan oo aan ku heli karno islamarkaana aqoonteena ku siyaadsan karno. Kuwaasna waxaa ka mid ah:-

- Dugsiyada caadiga ah ee waxbarasho: - dugsiyada waxbarasho ee ku baahsan dunida qaybaha kala duwan ee waxbarasho waxaa lagu bixiyaa aqoon kala duwan, waxaan ka mid ah xirfadaha beeraha, injineeriyada, dakhtarnimada, sharciga, maamulka, macalinimada IWM.
- Waxbarashada aan caadiga ahayn: - dadka bilaaba yaraantooda waxay waayo aragnimo aqooneed ka soo helaan waalidiinta dhashay, jaarkooda, deegaankooda waxay kolba kala kulmaan wakhtigan casriga ah. Aqoonta waxaa laga helaa oo kale aqoonyahanada, macalimiinta, waxgaradka, dadka waayo araga ah ama dadka waaweyn oo aad wax weydiisid (lafadhiisatid). Intaa waxaa dheer saaxiibada aad leedahay ee aad wada shaqaysaan dooda idin dhex marta.
- Qalabka warbaahinta oo aad la socotid sida jaraa'idka, idaacadaha, la iska arko iyo kuwa la dhagaysto.
- Natiijada farsamada cusub ee isgaadhsiinta (intartedka oo aad adeegsatid iwm, ayaad aqoontaada kor ugu soo qaadi kartaa).
- Akhriska ood dhaqan ka dhigatid:- akhriska ood dhaqan ka dhigatid waxay muhiim u tahay inaad aqoonta siyaadsato ama aqoonta biirsato sida buugaagta, sheekooyinka, taariikhaha, jaraa'idka IWM.



Jaantuska 11.2. Dirunesh dibaaba iyo Qananisa Baqale


## Layliska 2

B. Ardayeey dugsigiinu ma leeyahay maktabad buugaagta laga akhristo? Hadduu leeyahay maalintii intee in le'eg ayaad ku jirtaan oo aad buugaagta akhrisataan?

Haddiise maktabad ayna jirin maxaa xal ah oo la yeeli karaa? Kawada dooda.

T. Barigii hore waxbarashadu waxay ahayd mid ku wajahan macalinka oo ardaydu yihiin kuwo aan ka qaybgal fir-fircoon la'imaan? Bal sidee baad hadda uga dhaqan galiseen qaabka cusub ee baris-barashada ku wajahan ardayda maadada waddaniyadda iyo dhaqan wanaaga?

J. Waxaad sharaxdaan hababka kala duwan ee aqoonta lagu siyaadsan karo? Kadibna, intaad laba kooxood isku qaybisaan ka dooda.



Jaantuska 11.3. Siyaabaha lagu helo aqoonta

## 11.2 Haddaba, Aqoonta lagu helay siyaabaha kala duwan ee afarta nooc ahayd, waxaa loo adeegsan karaa ama waxaa looga faa'iidaysan karaa siyaabahan kaladuwan ee soo socda sida

Cilmi baadhis ahaan

Hal-abuurnimo

Kor u qaadista nololeed

Kobaca dalka IW

Aqoontu (xogtu) waa qalab lagu ogaan karo wixii horay u dhacay. Waxaa manta socda ee jira iyo waxa mustaqbalka la qorsheystay in la qabto ama la falo.

Arrimaha jira si aan u fahanno xog ama macluumaad arrimahaas xidhiidh toos ah la leh tusaale haddii qofku rabo inuu fahmo erayga Jarmal, waxaa loo baahan yahay inuu helo wax badan oo ku saabsan jarmal waa inuu helo xog tilmaamaysa dalka jarmal qaaradda yurub meesha uu kaga yaalo waa inuu helo xog ku saabsan cimilada, taariikhda iyo xaddaarada uu lahaa wadanka. Haddaba, qofku wuxuu fikrad sax ah Jarmal ka haysan karaa marka uu helo xog dhab ah oo ku saabsan dalkaasi si kadis ah, haddii aan jarmal ugu socdaalo oo aan ka haysanno xog dhamaystiran waxaa aan ka sii diyaar-garoobi karnaa cuntada aan cuni doono waxa ay noqon doonto iyo dharka aan qaadan doono waxa uu noqon doono.

Waxaa kale oo aan isku diyaarin karnaa sida bulshada reer jarmal aan ula xidhiidhi lahayn.

### 11.2.1 Daraasaadka

Aqoonta marka laga hadlaayo waxaa iyaduna lagama maarmaan ah in la xusho qaababka daraasaadka loo sameeyo. Aqoonta waxaa lagu helaa baadhid cilmiyeed kala duwan oo la sameeyo. Waxaa jira daraasad lagu sameeyo deegaanka iyada oo xogta lawaydiinayo bulsho weynta deegaanka ku nool. Waxaa kale oo jira daraasaad laga sameeyo sheybaadhyada gudahooda.

Qayb kasta oo ka mid ah aqoonta haddii aan u baahano inaan cilmi baadhis ku sameyno, waxaa lagama maarmaan ah, inaan helo xog la taaban karo oo daraasad ah. Cilmi baadhis aan xog loo hayn lama samayn karo haddii uu jirana waa mid xaqiiqada ka fogaan karta oo aan la qaadan Karin. Shay in la sameeyo markii la doono waxaa habboon in aan soo sheegno in la helo xog la taaban karo.

### 11.2.2 Hal abuurka

Muhiimadda xogtu ma'aha oo kaliya in hawl lagu bilaabo, balse waxaa kale oo ay xogtu muhiim u tahay sidii natiijooyinka dambana loo garan lahaa.

Wakhtiyadan aan joogno xogtu waxay noqotay shay qaali ah oo aad loo xiiseeyo xog la'aan wax lama qabto dhaq-dhaqaaq lama sameeyo ayay ka dhigan tahay qaybaha dhaqaale, siyaasadeed, bulsho, milatari, cilmi baadhista natiijooyin la taaban karo waxaa laga gaadhi karaa haddii lahayo xog dhab ah oo laga duulo ama wax laga bilaabo. Tartan kasta oo la rabo in guul laga soo hooyo (keeno) wuxuu u baahanyahay xog-xog la'aan sinaba guul looma gaadhi karo.

### 11.2.3 Kor u qaadista Noolaleed

Muhiimada xogtu ma'aha oo kaliya in hawl lagu bilaabo, waxaa kale oo ay xogtu muhiim u tahay sidii natiijooyinka dambana loo garan lahaa.

Xogta waa la adeegsadaa si loo helo sababta keenta dhibaatooyinka jira, taas oo dadka u fududaysa in dhibaatooyinka aas'aas loo helo qaab lagu xalliyo. Waddankeena Itoobiya waxaa wakhtiyo badan soo gaadha abaaro ay dad iyo xoolo badani naftooda ku waayaan, haddaba, maxaa sabab u ah abaarahaas is daba jooga ah?

Su'aalaha noocaas oo kale ah haddii jawaab xog la taaban karo ku salaysan loo helo. Waxaa la ogaan karaa sababaha dhaliya abaaraha dalkeena waxyeelada baas ku haya. Dadka ay abaaruhu wax yeelada soo gaadhsiiyeena waxay u baahan yihiin inay helaan gar-gaar loo fidiyo, gargaarka deg-dega ah, ee bulshada loo qaybinayaa wuxuu u baahan yahay in xog dhab ah oo ku saabsan tirada dadka ee u baahan gar-gaarka in la helo, waxaa kale oo xog u baahan gargaarku inta maal-mood ama bilood ee dadka uu hayn karo in la helo. Waxaa kale oo loo baahan yahay in xog laga helo qaabka gar-gaarka loo qaybin karo.

Jidka bulshada loo sii marin karo, dhammaan su'aalahaasi waxay u wada baahan yihiin in jawaabo xog dhab ah ku salaysan loo helo.

Waxaa dhici karta in xalka abaaraha lagaga bixi karaa yahay deegaanka oo la bedelo, qaabka beeraha loo beero oo la casriyeeyo IWM.

### 11.2.4 Horumarka Dalka

Bulshada marka lagu baraarujinayo inay ka qayb-galaan hawlaha horumarineed ee waddankooda, waxaa lagama maarmaan ah, in la helo xogta dhabta ah eek u saabsan tirada dadka iyo lacagta ama kharashka kale ee looga baahan yahay. Arrin kasta oo jirta waxaa go'aan sax ah laga qaadan karaa, marka la hayo xog dhab ah oo ku saabsan arrintaas la doonayo in la qabto.

## 11.3 Dhibaatooyinka ay keenaan arrimaha xog loo haynin

Qayb kasta oo ah xirfadaha jira waxay u baahan tahay xog in loo helo, tusaale ahaan qofka hargaha ka ganacsadaa wuxuu sayladaha caalamka ka tartami karaa haddii uu haysto xog ku saabsan qiimaha harguhu ka joogaan sayladaha dunida.

Haddiise xog la'aan uu dhoofiyo hargaha waxaa laga yaabaa khasaare dhaqaale oo aad u xoog badani inuu durbadiiba soo gaadho. Hargaha waddanka raba heerka tayada iyo noocyada ay rabaani waa kuwee? Dawladaha kale ee dunida hargaha ka dhoofiyaa ama iibsadaa waa kuwee?

Qaabkee bay u dhoofiyaan oo macaash intee le'eg baa laga helayaa? Wakhtigan xaadirka ah, qiimaha harguhu seyladaha dunida maxay ka joogaan?

Su'aalahaas oo dhan ganacsadaha harguhu jawaabtooda oo xog dhab ah ku saleysan inuu helo waa lagama maarmaan.

Waxaa kale oo bulshada dhexdeeda laga helaa dhakhtaro dhaqameed dadka daweeya,

waxayna bukaanka u adeegsadaan daawooyin deegaanka ay joogaan laga helay oo loo yaqaan daawooyin dhaqameed. Aqoonyahanadaas adeegsanaya daawooyin dhaqameedku waxay dadka ku daweeyaani waa qiyaas mar mar keenta in bukaanka waxyeelo aad u weyni soo gaadho ama dhintaba. Haddaba, wax qabadka noocaas oo kale ah haddaan aqoon dugsiyada laga helayn, isla markaasna aan lagu xoojin waxtarkeeda waxaa ka badnaan waxyeelada ay dadka soo gaadhsiinayaan.

**Layliska 3**

1. Waxaad sharaxdaan xidhiidhka ka dhaxeeya aqoonta iyo daraasaadka?
2. Waxaad sharaxdaan muhiimada aqoontu leedahay? Kadibna intaad 4 kooxood isku qaybisaan ka dooda?
3. Waxaad ka faalootaan dhibaatooyinka ay keenaan arrimaha xog loo haynin idinka oo koox-koox isku qaybinaya? Kadibna, fasalka ama ardayda hortooda ka soo jeediya?

## 11.4 Fikradaha iyo Aragtiyooyinka dib u dhaca

Buugaagta taariikhda marka aan eegno aqoonta ay xambaarsan yihiin waa kuwo loo baahan yahay inay xog dhab ah ku salaysan yihiin Runta taariikhdu leedahay waxay ku kala duwanaan karaan dadka soo ururiyay xogta ama qoray daacadnimada ay leeyihiin, taariikhyahanada qaarkood haddii ay noqdaan dad aan ka madax banaaneyn eex ku saabsan qaddiyada ay yihiin, diinta ay haystaan, mabda'a qaranimada wuxuu noqon karaa mid runta ka fog.

Mar mar waxaan aragnaa ama maqalnaa hadalo ama talo bixinno (fikrado) aad u quruxbadan oo aad moodaan iney run yihiin balse runta aad uga fog, qaarkood waa kuwo loo adeegsan karo digtoonaan iyo diyaargaraw oo wax lagu qiyaasi karo. Waxayna sababaan dib u dhac dhinac kasta ah.

### 11.4.1 Hababka lagu tirtiro fikradaha iyo aragtiyooyinka dib u dhaca

Aqoonta bilowgeeda iyo dhammaadkeedu waa run raadin Runtu waa mid leh xog dhab ah, ficil lagu imtixaamey, la taaban karo, laysku haleyn karo ama lagu kalsoon yahay. Runta iyo beenta waxaa lagu kala soocaa xogta ama caddeymaha lahayo, buugaagta oo la daalacdo, waayo aragnimada oo la korodhsado iyo iyada oo laga qayb galo hawlaha kala duwan ee ficilada u baahan waxaa ay ka mid yihiin dariiqyada lagu tir-tiro fikradaha iyo aragtiyaha dib u dhaca leh.

Haddaba, waxyaabaha ficil ahaan iyo aragti ahaanba aan aaragno inaga oo aan ku koobnaan, waxaa loo baahan yahay inaan aqoonta ka raadsano buugaagta la qoray oo ka kooban aqoon lagu soo uruuriyay cilmi-baadhis ama daraasaad aad u qoto dheer.

Aqoonta guud waxaan ka heli karnaa buugaagta ku saabsan arrimaha bulshada, siyaasadda, cilmi-nafsiga, farshaxanka iwm; oo aan akhrisano. Waxaa hadda la arki karoo ku salaysan yihiin qaybaha kalana arrin kale oo qiyaaseysa run mustaqbalka imaan karta oo tilmaan wanaagsan inna siin kara ama inagu jihayn kara. Haddaba, inaan dhammaan wax yaabahaas fahanno oo aan jidka aqoonta raacnaa waa arrin dhammaanteenba haddaan ardaynahay waxaa inagu waajib ah, islamarkaana dadaal inooga baahan in aan aqoonta qiimeyno.

# Aqoon Raadsi

## Gunaanadka Cutubka 11aad

Aqoonta waxaa lagu helaa Afar siyaabood oo kala ah sida waxbarashada caadiga ah, ta aan caadiga ahayn, qalabka warbaahinta, iyo Akhriska. Markaas ruuxu wuxuu ku kasban karaa Afartaba, aqoon aas'aasi ah. Si kastaba ha ahaatee, dugsiyadu kaalin weyn ayay ku leeyihiin xaaladaha wax ka badalka heerka nolosha, qoyska iyo tan dalkaba, islamarkaana loo hiigsan lahaa mustaqbal wacan oo waari kara.

Mar kasta oo dadku ku talax-tego baadi-goobka waxbarasho, waxaa sidoo kale kordha heerka daraasaadka aqoon iyo cilmi baadhis, si loo furdaamiyo/xaliyo dhibaatooyinka bulsho ee ka jira goobaha & deegaanada qaarkood.

Aqoontu waxay sidoo kale kaa caawisaa, yeelashada hal-abuur. Xirfadaha kala duwan ee hal-abuurna waa kuwo ku tiirsan aqoonta. Haddii la rabo in la yeesho xirfad qoraanimo ama Mahandisnimo wax ku ool ah. Waxaa qasab ah inaad yeelato aqoon xirfadeed oo aad u qotadheer. Ugu yaraan faa'iidada aqoontu leedahay, waxaa ka mid ah ruuxu markasta oo u heerka aqoontiisa kor u sii qaado, waxaa sii kordhaya dakhliga dhaqaale ee miishaar ahaan u soo gala bil ahaan, taas oo waxweyn u taraysa nolosha qoyskiisa. Dhinaca kale, dalka ay dadkiisu inta badan aqoon leeyihiin wuxuu noqdaa mid ka hormara dalalka kale ee aanay dadkoodu lahayn dad wax bartay oo tira badan. Sidaas awgeed, awontu waa xirfad dardar-galisa kartida, maskaxda & muruqa ruuxa bani aadamka ah, si uu ugaga faa'iidaysto hawlaha dhaqan-dhaqaale iyo bulshaba. Haddaba, guntii iyo gabagabadii aqoontu waa hal-bawlaha horumar ee bulshada, waana tan bildhaamisa tubta saxda ah lagu gaadhi karo horumar, barwaaqo iyo qaninimo ka hanaqaada dal. Markaas xukuumad & shacaba waxaa haboon in la balaadhiyo goobaha waxbarasho, si loo helo aqoon tiro iyo tayo wanaagsan leh.

## Erayada Furaha u ah Cutubka 11aad

| | |
|---|---|
| Xog lagu kulsoonaam karo: | warbixin xaqiiq ah oo laga soo xigtay ilo-lagu kalsoonayahay |
| Baadi-goob: | raadsasho, doonitaan |
| Warbaahin: | qalabka xogta dadweynaha loogu gudbiyo sida: Raadiyaha, Talefishinka, iwm |
| Cilmi-baadhis: | daraasad sahamineed ama mid xal raadiseed |
| Sanco: | hal-bauur |
| Isku filaan: | isdabaritaanka baahida aas'aasiga ah |

# Aqoon Raadsi

## Laylisyada Cutubka 11aad

I. Su'aalaha soo socda ku qor "Run" ama "been" midba ta ku haboon

1. Aragtiyada dib u hadhnimo waxaa ka mid ah magac dilka hawlaha hal-abuurnimo
2. Marka la helo aragtiyo cilmiyaysan, waxaa abuurmaya in la yareeyo fikradaha khaldan.
3. Si kor loogu qaado heerka nololeed, waxaa loo baahan yahay maahin aqoone, balse waa hanti (maal).
4. Dhammaan raadiyayaasha Idaacaduhu waa ilo-xogeed oo la isku halayn karayo
5. Siyaabaha lagu kasbado aqoonta waxaa ka mid ah Waxbarashada caadiga ah ee dugsiyada lagu bixiyo.

II. Erayadan soo socda isku aaddiya ee ku kala hoos qoran xarfaha 'B' iyo 'T'

| B | T |
|---|---|
| 1. Ilaha Aqooneed | b) Hubsiimo hal ayaa la siistaa |
| 2. qalabka warbaahinta | t) Warbixinada xaqiiqada iyo dhabta ah |
| 3. xogga lagu kalsoonaan karo | j) Idaacadaha & Jaraa'idada |
| 4. Waxay wax yeelo u keenaan amniga shacabka | x) Warbixinada aana n ku fadhin xaqiiqada. |
| | kh) Walbahaar |
| 5. Halista wararka ku tidhi ku teenka ayay tilmaamaysaa | d) Dugsiga |

III. Su'aalaha soo socda ka dooro jawaabaha saxda ah.

1. Waa goorma, marka la badali karo fikradaha dib u hadhnimo?
   b) Marka la balaadhiyo fikradaha cilmiyaysan
   t) Marka tixgelin gaar ah la siiyo warbixinada odhaaheed
   j) Marka la balaadhiyo aqoonta dhaqan
   x) Dhammaan
2. Adeega aqooneed marka la sheegayo, tee sax ah?
   b) Waxaa loo adeegsan karaa hawlaha cilmi-baadhis
   t) Waxay nagu abuurtaa fikrado aanu ku nacayno dhaqankayaga
   j) Waa mid na awoodsiisa inaanu ka taqalusno hab-dhaqanadana & waaya aragnimada aanu leenahay
   x) Dhammaan.

3. Kuwan soo socda, keeb aad isleedihiin, waxaa laga heli karaa aqoon nagu filan.
   b) Telifishinka
   t) Odhaahyada
   j) Wadahadlida shirarka
   x) Dugsiga (Iskuulka)
4. Sidee bay aqoontu gacan uga geysanaysaa kor u qaadista heerka noloshaada?
   b) Marka aynu aadno/tegno dalalka dibada
   t) Marka ayna awoodsiiso inaynu noqono ganacsade geesi ah
   j) Marka aynu noqono muwaadiniin leh hal xirfad Jacayl oo kaliya
   x) b & j weeyaan.
5. Kuwan soo socda, tee baan laga dheehanayn aragtiyada dib u hadhnimo?
   b) Gabadha oo wax la baro, waxay an faci dhamaan bulshada
   t) Haweenay wax-garadn, nin baa u dhillan
   j) Ilmaha iyo qalamidu ha cabeen biyaha
   x) t iyo j waa jawaabaha

## IV. Meelaha banana ereyada ku haboon ku buuxiya

1. Itoobiya gudaheeda, xirfadlayaasha loo tiring jiray dabaqada hoose waa ___________
2. Siyaabaha aqoonta loo adeegsado waxaa ka mid ah __________ iyo ______________.
3. _____________ waxay dhalin kartaa is fahan daro dhaxmarikarta dadka ama kooxaha
4. Dhamaan aragliyada Aabe iyo hooyo, miyaa lagu sheegi karaa kuwa dib u hadhaha side?
   Siyaabaha lagu kasbada aqoonta waxaa ugu muhinsa waxbarashada dugsiga, maadaama oo uu dugsigu yahay rugta aqoonta.

## V. Su'aalahan jawaabo koo-kooban ka bixiya.

1. Waa maxay ilaha-aqoonta cilmiyaysan ee ugu muhiimsan?
2. Akhriska, maxaa loogu sheegay wadooyinka lagu helo aqoonta
3. Sobobehee ayay fikradaha dib u hadhnimo ku noqdeen, kuwa wax yeelo leh?
4. Maxaa looga fadhiyaa ardayga in la tir-tiro fikradaha guracan (qaldan) ee dib u dhacnimo.